SOMALI

# 2009–2010

# Waa Hagaha Dugsiyada Dadweynaha Boston

## ee Qoysaska iyo Ardayda

### Ku Qoysaska iyo Ardayda

Daabacan waxa ku jira warar muhim ah. Fadlan akhri. Kadib, kala bax Heshiiska Waalidka iyo Ardayga ee ku yaal buuga badhtankiisa kuna soo celi Heshiiska dugsigaaga. Mahadsanid.








**Maxa ku jira gudaha**


- Iskaashiga Dugsiga/Qoyska
- Gudbinta (Promotion)
- Maqnaanshaha (Attendance)
- Imtixaanida
- Gaadiidka
- Barnaamijyada & Adeegyada Dugsiga
- Xeerka Anshaxa
- Kaararka Warbixinta
- Nidaamka Cusub ee Degenaanta
- Sharciga “No Child Left Behind”
- Iyo warar kaloo muhim ah


FOCUS On Children

Boston Public Schools

# Boston Public Schools CALENDAR 2009–2010

FOCUS On Children
Boston Public Schools

August 25-27 ........ New Teacher Institute: First-year teachers report
■ September 7 ........ Labor Day: No school
■ September 8–9 ........ All teachers and paras report
▲ September 10 ........ Students in grades 1-12 report, including grade 1 in ELCs and EECs: Full day of school
◆ September 14 ........ Kindergarten students report, including EECs and ELCs
● September 15 ........ Students in Special Education Early Childhood programs report
■ October 12 ........ Columbus Day: No school
■ November 11 ........ Veterans' Day: No school
■ November 25 ........ Early release for students and staff
■ November 26–27 ........ Thanksgiving Recess: No school
■ December 24–January 1 ........ Winter Recess: No school
January 4 ........ Students return from recess
■ January 18 ........ M. L. King Jr. Day: No school
■ February 15 ........ Presidents' Day: No school
■ February 16–19 ........ February Recess: No school
February 22 ........ Students return from recess
■ March 17 ........ Evacuation Day: No school
■ April 2 ........ Good Friday: No school
■ April 19 ........ Patriots' Day: No school
■ April 20–23 ........ Spring Recess: No school
April 26 ........ Students return from recess
■ May 31 ........ Memorial Day: No school
✸ June 9 ........ Last day for seniors
■ June 17 ........ Bunker Hill Day: No school
■ June 23 (or day 179) ........ Early release for students
▼ June 24 (or day 180) ........ Last day of school: Early release for students

- June 24 is the 180th school day, if no days are lost due to cancellations.
- June 30 is the 184th day required for calendar purposes.
- No graduation program should be scheduled before June 9, 2010.

◗ All BPS offices and Family Resource Centers closed.
❄ School cancelled due to inclement weather.

## Major Religious & Cultural Holidays

Aug. 21* ........ Ramadan begins
Sept. 19–20 ........ Rosh Hashanah
Sept. 20* ........ Eid al-Fitr
Sept. 28 ........ Yom Kippur
Oct. 17 ........ Diwali
Nov. 26 ........ Thanksgiving
Nov. 27* ........ Eid al-Adha
Dec. 12–19 ........ Hanukkah
Dec. 25 ........ Christmas Day
Dec. 26–Jan. 1 ........ Kwanzaa
Jan. 1 ........ New Year's Day
Jan. 6 ........ Three Kings Day
Feb. 14 ........ Chinese New Year
March 30 ........ Passover begins
April 2 ........ Good Friday
April 2 ........ Orthodox Holy Friday
April 4 ........ Easter
April 4 ........ Orthodox Easter
May 9 ........ Mother's Day
June 13 ........ Father's Day

Observance of Jewish and Islamic holidays begins at sundown of the preceding day.

* Estimated

## SEPTEMBER 2009

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| 6 | 7 ◗ | 8 ■ | 9 ■ | 10 ▲ | 11 | 12 |
| 13 | 14 ◆ | 15 ● | 16 | 17 | 18 | 19 |
| 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 |
| 27 | 28 | 29 | 30 | | | |

## OCTOBER 2009

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | 1 | 2 | 3 |
| 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 11 | 12 ◗ | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |

## NOVEMBER 2009

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 |
| 8 | 9 | 10 | 11 ◗ | 12 | 13 | 14 |
| 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 |
| 22 | 23 | 24 | 25 | 26 ◗ | 27 ◗ | 28 |
| 29 | 30 | | | | | |

## DECEMBER 2009

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 |
| 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 |
| 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 ◗ | 26 |
| 27 | 28 | 29 | 30 | 31 | | |

## JANUARY 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | 1 ◗ | 2 |
| 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 |
| 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 |
| 17 | 18 ◗ | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 |
| 24/31 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 |

## FEBRUARY 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 14 | 15 ◗ | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 |
| 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 28 | | | | | | |

## MARCH 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 14 | 15 | 16 | 17 ◗ | 18 | 19 | 20 |
| 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 28 | 29 | 30 | 31 | | | |

## APRIL 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | 1 | 2 ◗ | 3 |
| 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 18 | 19 ◗ | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | |

## MAY 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | 1 |
| 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 |
| 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 |
| 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 |
| 23/30 | 24/31 ◗ | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 |

## JUNE 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| 6 | 7 | 8 | 9 ✸ | 10 | 11 | 12 |
| 13 | 14 | 15 | 16 | 17 ◗ | 18 | 19 |
| 20 | 21 | 22 | 23 | 24 ▼ | 25 | 26 |
| 27 | 28 | 29 | 30 | | | |

## JULY 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | 1 | 2 | 3 |
| 4 | 5 ◗ | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 |

## AUGUST 2010

| S | M | T | W | Th | F | S |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 |
| 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 |
| 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 |
| 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 |
| 29 | 30 | 31 | | | | |

▶ Extenuating circumstances and/or inclement weather may necessitate changes to the calendar during the year. Visit www.bostonpublicschools.org for current information.

Produced by the Boston Public Schools Communications Office 3/24/09

# 2009–2010
# Waa Buuga Hagaha
# Dugsiyada Dadweynaha Boston
## ee Qoysaska iyo Ardayda

**Waxa soo saaray:**
Xafiiska Isgaarsiint a Dugsiyada Dadweynaha Boston
26 Court Street ▪ Boston, MA 02108
Tel: 617-635-9265 ▪ Fax: 617-635-9568
communications@boston.k12.ma.us
www.bostonpublicschools.org

*Hagahan Dugsiyada Dadweynaha Boston* waxa la heli karaa isagoo ku qoran afafka kala ah Kebfeerdi «Creole», Shiine, Igiriisi, Hayshiyan «Creole», Bortuqiis, Somaali, Isbanish, iyo Fiyatnamiis.

FOCUS On Children
Boston Public Schools

Qoraalkani wuxu koobayaa wax badan oo kala ah qawaaniin, nidaamyo, sharciyo iyo dhaqmaatiyo muhim u ah Dugsiyada Dadweynaha Boston ardaydooda, waalidka iyo ilaaliyeyaasha. Looguma tala gelin inuu noqdo diiwaan buuxa oo ay ku yaaliin qawaaniinta iyo nidaamyada oo dhan ee ku lug leh ardayda iyo waalidka.

Qawaaniinta fedraaliga iyo kuwa goboleed iyo nidaamyada DDB, sharciyada iyo dhaqmaatiyada heerarka goboleed ama rugaha dugsiyada intuba in la beddelo kama caagana. Xogta baa isbedeli karta ilaa markii Hagahan la daabacay Julay 2009.

# 2009–2010
# Waa Buuga Hagaha
# Dugsiyada Dadweynaha Boston
## ee Qoysaska iyo Ardayda

**Magaalada Boston**

Thomas M. Menino, Duqa Magaalada

**Guddiga Dugsiyada Boston**

Rev. Gregory G. Groover; Gudoomiye
Marchelle Raynor; Gudoomiye Ku-Xigeen
Helen Dájer
Alfreda Harris
Claudio Martinez
Michael D. O'Neill
Elizabeth Reilinger

**Dugsiyada Dadweynaha Boston**

Carol R. Johnson, Agaasimaha Guud

**Sebtembar 2009**

## Mawqifkayagu

Waa inaan caruurta magaaladan ku soo dhoweynaa Dugsiyada Dadweynaha Boston, halkaas oo waxbarid iyo waxbarasho haboon loogu diyaariyo ardaydeena oo idil si ay u hantaan heerar sareeya, iyadoo isla halkaas bulshada oo dhammi u wada shaqaeeyaan siday ugu foognaadaan ciyaalka.

## Nidaamka Takoor La'aanta

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxayan sina loogu ugu takoorin barnaamijyadooda, hawlahooda, saldgigyadooda, iyo fursadaha shaqa- siinta iyo tacliintatoona wax ku salaysan jiinsiyadda, midabka, da'da, naafada, lab iyo dhediga, diinta, asalka ummadeed, ama dhaqanka balwada himadda, umana dulqaataan nooc kasta oo takoor ah, hanjabaad, baqdin gelin, is-khasab iyo/ama haddidaad ah oo wax u dhimi kara sharafta cid kale iyagoo faragelinaya xornimadooda inay wax bartaan ama shaqaystaan.

# Shaxda Gudaha

**2009–2010 Kalandarka Dugsiyada** — **Gudaha Jeldiga Hore**

**Fariinta Agaasimaha Guud** — **4**

**Diwaanka Telefanada Adeegyada Qoysaska** — **5**

**Iskaashiga Dugsiga/Qoyska**

Kuxirnaanta Dugsiga 6
Golaha Waalidka Dugsiga iyo Golaha Rugta Dugsiga 6-7
Kooxaha Kale ee Waalidka 7
Xarumada Waxtarmada iyo Gacanufidinta Qoysaska 7
Qaabka Telefaka Laxiriirka Waxbarasho «Connect-Ed» 7
Soo Dhowaada Kuwa Dugsiga Booqdow! 8
Nidaamka Isgaarsiinta 8
Liiska Murugtirka Mushkiladaha 9
Wax dheeraad ah oo laga baran karo iskaashiga Qoysaska & Beelaha 9
Diyaarinta Kulamada Wax Ku-oolka ah Ee Waalidka-Macalimiinta 10
La Xiriirka Guriga: Siyaabo Sahlan ee Dhiirigelinta Waxbarasho 11
Udoorintaanka Buugagta Caruurta 11
Talosiin Waalid ee Akhriga iyo Xisaabta 12
DDB-TV 12

**Gudbinta iyo Qiimaynta**

Nidaamka Gudbinta 13
Nidaamka Gudbinta iyo Tegitaanka Dugsiga 14
Nidaamka Gudbinta: Adeegyada Taageerka 15
Qiimayntat: Tooxinta Hanashada Ardayga 16
MCAS 16
Dugsiga Hoose: Sookoobka Shuruudaha Gudbinta, Shuruudaha Imtixaanida, iyo Shaqaguriga 18
Dugsiga Dhexe: Sookoobka Shuruudaha Gudbinta, Shuruudaha Imtixaanida, iyo Shaqaguriga 20
Dugsiga Sare: Sookoobka Shuruudaha Gudbinta, Shuruudaha Imtixaanida, iyo Shaqaguriga 22

**Barnaamijyada Gaarka ah**

Barteyaalka Af Ingiriisiga 24
Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada la Xiriira 25
Waxbarashada Kaduwan 26
Fasalka Shaqada Horukacsan (AWC) 26
Dugiyada Imtixaanka 27
Waxkubaris Guri iyo Cusbital 27
Waxkubarista Guriga 27

**Adeegyada Ardayda**

Adeegyada Caafimaadka 28
Waxbarashada Isugalmoodka 30
Adeegyada Cuntada & Nafaqynta 32
Gaadiidka 37

**Heshiiska Waalidka &Ardayga: FADLAN SAXEEX EE SOO CELI!** — **33-36**

**Nidaamyada DDB**

Gurmadyada iyo Badbaadada Ardayga 39
Takoor La'aanta iyo Xuquuqda Madaniga ah 41
Xeerka Anshaxa 42
Isticmaalka Internetka Dugsiga 45
Shruudda Degenaansha Ardayda 46
Qoritaanka & Kumeelaynta Dugsiga 47
Diiwaanada Ardayga 49
Xafladaha Qalinjebinta 50
Shaqaguriga 50
Daahidda 50
Kabadhada Ardayda 50
Telefanada Gacanta 51
Hantida Shaqsiyeed 51
Kaararka Warbixinta 51
Joojinta Dugsiyada 51
Hawlgelinta Ardayda iyo Isxukunka 52
Lebisyada Dugsiyada 52
Xanaanada Buugagta iyo Alaabooyinka kale 52
Nidaamka Fayoqabka 52
Nidaamka Sigaarcabid La'aanta 52
Agabyada Dheeraadka ah ee Qoysaska 53

**Sharciga Ilmana Dib Loogama Tegayo**

(No Child Left Behind ama NCLB) 54
NCLB iyo Horukaca Haboon Sanadkiiba (AYP) 54
NCLB iyo Doorashada Dugsiga 55
NCLB Adeegyada Kaabida Waxbarashada (SES) 56
Kaararka Warbixinta Dugsiyada & Degmooyinka 56
NCLB iyo Tayada Macalinka 58
NCLB iyo Isafgaradka Guriga-iyo-Dugsiga 59
Qorshaha Hagaajinta Dugsiga Gebi ahaan (WSIP) 59
NCLB iyo Barteyaalka Af Ingiriisiga (ELL) 60
NCLB iyo Khiyaarka Doorashada Dugsi Nabadla' 60

**Hay'adaha Bixiya Tababarada Waalidka iyo Horumarinta Xirfadeed** — **61**

**Diiwaanka Telefanada (Directory) Dugsiyada Dadweynaha Boston** — **64**

**2009–2010 Xilliyada Saxidda iyo Kaltanka Kaararka Warbixinta** — **Gudaha Jeldiga Dambe**



# Fariinta Agaasimaha Guud

## Gacaliyeyaal Waalidiinta, Koriyeyaalka iyo Ardayda:

Ku soo dhowaada sanad dugsiyeed cusub ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waxan ku rajo weyn nahay la shaqantiina si loogu caawiyo ardayga dugsi kasta inay gaadhaan derejooyin sare aanu og nahay inay awood u leeyihiin hanashadooda.Sanadkan, shaqadeena waxa lagu wadayaa in lagu hogaamiyo mabaadi'da degmada ee Ajendaha Xawliyasan (Accelerated Agenda), ee diirada ku haysa sinaanta, helitaanka, iyo heer wax ku-ool ah. Xataa iyadoo miisaaniyada sanadku cidhiidi tahay, waxan u halgamaynaa sidaan ardayda oo dhan u siin lahayn waxbarasho heerka kowaad ah, oo leh khibrado kobcineed xaga fananka, barnamijyada dugsi kadib ee leh nabadgelyo iyo kala saryn, fursadaha jirdhiska, iyo qaabab fayoqab tawlan iyo taageero dhaqameed.

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay heegan u yihiin dhismaha iskaashi adag ee qoysaska ardadayada. Qayb ah heegankayagaas, waa anagoo ku farax weyn inaan soo ban dhigno Hagahan Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waa qoraal cusub oo qiimo leh oy ka buuxaan warar ku saabsan dugsiyadeena iyo kaqaybgalka qoysaska ee waxbarashada caruurtooda. Fadlan akhri oo kaydso. Waxad u baahan inaad dib u fiiriso sanaka oo idil.

## Maxaa Hagahan ka dhigay mid muhim ah?

Marka hore, wuxu sharxayaa nidaamyada saamayn kara ardaydeena: matalan, waxa laga rabo si ay ugu gudbaan fasalka ka sarreeya, iyo sida laga rabo inay ula dhaqmaan macallimiinta iyo ardayda kale. Wuxu kalee sharxayaa waxa dhici kara hadii himilooyinkaas ardaydu gaadhi kari waayaan.

Mida labaad, wuxu Haguhu soo koobayaa manhajka Dugsiyada Dadweynaha Boston, fasal ka fasal, oo ka talo bixinaya siyaabaha qoysasku ku caawin karaan waxbarashada ilmahooda.

Mida sadexaad, wuxu sharxayaa xuquuqda sharcigu u ballan qaadayo ardayda iyo waalidka. Tusaale ahaan: xuquuqda in si siman loola caamilo, iyadaan la eegayn jinsiyad iyo naafanimo, xuquuqka ogaanshaha heerka tacliinta macalinka ilmahaaga, iyo xuquuqda shaqsiyeed ee diwaanada ardayga ku saabsan. Wuxu kalee kaala talinayaa waxa kula gudboon hadaad istiraahdo xuquuqdaadii waa lagu xad gudbey.

Tan afraad, wuxu warar macna leh kaa siinayaa mawaadiic badan, min tijaabooyinka ilaa gaadiidka iyo dugsiyada xiritaankooda.

Ugu dambayn, waxa ku yaal diiwaanka cinwaanada Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo xafiisyada maamulka, liiska xalilaada mushkiladaha, agabyada waxbarashada ee qoysaska, iyo kalendarka sanad dugsiyedka ee gudaha jeldiga hore.

## Sharciyada Dugsiga Ku-salaysan

Midda kale ee soo raacda sharciyada fedraaliga ah iyo kuwa goboleedba, dugsi kastaa wuxu leeyahay sharciyadiisa ay ogolaadeen Golaha Rugta Dugsigu. Maamulaha ama madaxa dugsigu waa inuu kuu raaciyaa nuqulka sharciyada dugsiga Hagahan.

## Nidaamyadeena iyo sharciyada oo dhaan...

Ö waa in arday kasta lagu caawiyaa siduu u hanto tacliin heer sare ah ee meel deegaan nabadgelyo , sharaf, iyo waxbarasho togan leh. Taageeradiina iyo kaqaybgalkiina, waxan rajeynayaa inaan gaarno himiladaas inagoo isku duuban.

Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud

### Fadlan Saxeex Oo Soo Celi Heshiiska Waalidka & Ardayga!

Heshiiska Waalidka &Ardayga ee bogaga 33-36 ee Hagahan aad buu muhim u yahay. Waa xaanshi sharciyaysan oo lagu haynayo diiwaanka dugsiga. Fadlan bogaggaas ka saar buugyaraha (fiiri geftinada gaduudan), akhri oo saxeex qayb kasta, toosna ugu soo celi Heshiiska dugsiga ilmahaaga.

Waalidka oo dhan arrintaas waa ka codsanay inay sameeyaan si loo hubiyo inay Hagaha akhriyeen fahmeena nidaamyada iyo sharciyada saameeya ilmayawgooda. Waxan kalee u baahan nahay saxeexa waalid ama koriye si ilmahoodu uga qayb geli karo hawlaha kelee dugsiga.




Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay jecel yihiin inay maqlaan fikradaha akhristeyaalka Hagahan. Waxtar ma yahay? Wax war ah oo ka maqan ama wareergelin lihi ma jiraan? Wax fikrado ah ma haysaa oo Hagaha sanadka dambe lagu dari karo?

**Fadlan la xiriir:**
**communications@boston.k12.ma.us**
**ama 617-635-9265**

# Diiwaanka Telefanada Adeegyada Qoysaska

## Xafiisyada Dugsiyada Dadweynaha (DDB)

LAMBARKA DHEXE ....617-635-9000
Agaasimeyaalka Guud ee Tacliinta* ....617-635-9000
Tacliinta Dadka Waaweyn iyo Fiidkii Dugsi Sare ....617-635-9827
Waxbarashada Kaduwan....617-635-8035
Tegitaanka Dugsiga....617-635-8035
Golaha Latalinta Ardayda Boston (BSAC)....617-635-8079
Golaha Waalidiinta Magaalaweynta (CPC) ....617-635-9210
Isgaarsiinta (warbaahinta iyo qoraalada)....617-635-9265
Adeegyada Latalinta ....617-635-8030
Ushintirinta Xanaanada (Countdown to Kindergarten) ....617-635-6816
Manhajka iyo Waxbarida....617-635-9413
Bilawga Waxbarashada Caruurta ....617-635-9701
Barteyaalka Af Ingiriisiga (ELL) .... 617-635-9435
Adeegyada Qoridaa (kumeelaynta dugsi) ....617-635-9516
Sinaanta (arrimaha takoorka iyo xuquuqda madaniga ) ....617-635-9650
Dugsiyada Imtixaanka iyo Fasalka Shaqada Horukacsan (AWC)....617-635-9512
Hawlgelinta Qoyska iyo Ardayga(Xafiiska Dhexe)....617-635-9661
Hawlgelinta Qoyska iyo Ardayga (Taager Dugsi, Taageer Qoyska Laba-luqadle iyo Waxbarashada Gaarka ah)....617-635-7750
Xarunta Akhri/Qorida Qoyska....617-635-9300
Adeegyada Cuntada & Nafaqaynta....617-635-9144
Adeegyada Hanuuninta ....617-635-8030
Adeegyada Caafimaadka....617-635-6788
Dacwada & Racfaanka (arrimaha anshaxa)....617-635-9050
Ardayda Hoylaawe ....617-635-8037
Agabka Shaqada (shaqaalaha)....617-635-9600
TaknolijigaXogta & Barida (OIIT) ....617-635-9199
Imtixaanka Afafka....617-635-6547
Xarunta Qiimaynta Ardayda Cusub & Latalinta....617-635-1565
Dhexdhexaadshaha ama "Ombusperson" (Xafiiska Agaasinka Guud)....617-635-6995
Hogaamiyeyaalka Hawleed * .... 617-635-9000
Adeegyada Barashada Afafka iyo Taageerka ....617-635-9435
Cilmibaaris, Qiyaas, iyo Qiimayn; (imtixaanid) ....617-635-9450
Adeegyada Nabadgelyo ....617-635-8000
Guddiga Dugsiyada....617-635-9014
Waxbarashada Gaarka ah....617-635-8599
Golaha Latalinta Waalid ee Baahiyada Gaarka ah (Sped PAC)....617-635-8599
Diiwaanada Ardayda Ardayda ....617-635-9507
Dugsiga Kulaylaha ....617-635-9414
Xafiiska Agaasinka Guud ....617-635-9050
Golaha Latalinta Waalidka Boston ee «Title I» (BPAC)....617-635-7749
Xarunta Tababarka Qoysaska iyo Macalimiinta....617-635-7750
Gaadiidka....617-635-9520
Adeegyada Soodhaweynta....617-635-9085
Ruqsadaha Shaqada, Ardayda....617-635-8030

* Fadlan wac lambarka xafiiska dhexe ee DDB oo ka codso Agaasimaha Guud e Tacliinta ama Hogaanka Hawleed ee dugsiga ilmahaaga.

### BPS-TV ★ "Cable" Telefishanka xaga DDB

- Comcast Mawjada 24 iyo RCN Mawjada 13 ee Boston
- Kala xiriir barnaamijyada Waxbarashada qoysaska, wararka iyo bayaanada DDB, xafladaha dugsiyada, carwooyinka dugsiyada, isboortiga, Shirarka Gudiga Dugsiyada, iyo wax kaloo badan
- Booqo **www.bps-tv.org** wixi kaltan ah

## Xarumada Waxtarmada Qoyska ee DDB

**AAGA BARI ☎ 617-635-8015**
1216 Dorchester Ave., Dorchester
(kagadaal Burger King)

**AAGA GALBEED ☎ 617-635-8040**
515 Hyde Park Ave., Roslindale
(u dhowr Cummins Highway)

**AAGA WAQOOYI ☎ 617-635-9010**
Madison Park Complex
75 Malcolm X Blvd., Roxbury
(u dhow Roxbury Crossing MBTA station)

**XARUNTA GACANYARTA EAST BOSTON**
Akademiga Dugsiga Dhexe Umana, East Boston, ☎ 617-635-9597
Wac ama booqo "Website"-ka DDB xaga saacadaha

**2009–2010 SAACADAHA ADEEGA:**

*Sanad Dugsiyeedka:* Isniin–Jimce: 8:30 aroor–5 galab. Xarumada waxa la xiraa 1:30 gal. Arbacooyinka soo socda: Okt. 7, Nof. 4, Dis. 2, Abr. 7, Maajo 5, iyo Juun 2.

*Kulaylaha 2010:* Aaga Waqooyi FRC: Isniin–Jimce, 8:30 aroor 5 gal. Xarumada kale waa la xirayaa Juun 25 waxana la furayaa Agost 2, 2010.

*Waa xiran yihiin:* Ciidaha Fedraaliga, gobolka, iyo magaalada

** Saacadahani ma khuseeyaan Xafiiska Gacanyarta East Boston*

### Khadka Diiran ee Kunoqodka Dugsi & Diiwaangelinta
☎ 617-635-9046

Caawinada diiwaangelinta dugsi, meelaynta, bedelka, gaadiidka, iyo su'aalaha kalee dugsiga. Saacadaha shaqadu waa Isniin-Jimce sida soo socota:

Agost 24–Sebtembar 4, 2009 ■ 9 aroor ilaa 5 galab
Sebtembar 8–18, 2009 ■ 7 aroor ilaa 6 galab
Janaayo 4–Febraayo 5, 2010 ■ 8:30 aroor ilaa 5 galab

### Khadka Talobixinta Nabadgelyada Qarsoodiga ah
☎ 1-877-SCH-SAFE

Ardayda soo sheegaya hadidaad, hub, daroogo, iyo xaalado khatar ah.

### Khadka Talobixinta Degenaanta Magaalada
☎ 617-635-6775

Waxad ka tagtaa magac la'aan talobixinta xaga ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha Boston ee aan ku noolayn Boston

## Adeegyo Dheeraad ah

Boston: Adeegyada Magaalada/Xarunta Belediyaha (www.cityofboston.gov)
9 aroor- 5 galab....617-635-4000
Khadka Duqa Maagaalada 24-saac ....617-635-4500
Xarumada Dhalinyarada & Qoysaska (BCYF)....617-635-4920
Hay'ada Guryaha Boston ....617-988-4000
Xarumada Beelaha....617-635-4920
Khadka Caafimaadka Duqa Magaalada ....1-800-847-0710
Xafiika Reer Bostonka Cusub (afafka badan) ....617-635-2980
Qorshaha Boston ee Saraynta (Excellence) (bpe.org) ....617-227-8055
Maktabada Dadweynaha Boston (bpl.org)....617-536-5400 fid. 334
Waaxda Waxbarashada Massachusetts ee Dugsiyada Hoose iyo Sare (www.doe.mass.edu) ....1-781-338-3300
Xogta Dugsiyada "Charter School" ....1-781-338-3227
Haya'adaha Siiya Waalidka Tababarka iyo Agabyada .... Fiiri bogagga 61-63

# Iskaashiga Qoyska/Dugsiga
## La Xiriirka Dugsiga

Kaqaybgalka qoysku waxay dhextaal muhim ah kaga jirtaa ku caawinta ardayda aflaxaada dugsiga iyo horumarinta qabka xiskooda xaga beesha dugsiga. Dugsiyada Dadwynaha Boston waxay heegan u yihiin dhisidda baaxada shaqaalaha dugsiyadeen, qoysaska, ardayda iyo bulshada siloo dhidbo Iskaashi firfircoon ee xoojinaya waxbarashada ardayda iyo sii hagaajinta dugsiyada.Halkan waxa ku xusan tusaalooyin ku saabsan hawlaha dugsigu u fidiyo siday waalidku uga qayb qaadan lahaayeen waxbarashada ardayga:

- Shirarka fool ka-foolka ah ee waalidka iyo macallinka (ugu yaran laba gor sanadkii);
- Tababarrada ku saabsan maadooyinka ilmuhu dhigto iyo sidaad ilmahaaga ugu caawin lahayd isu diyaarinta imtixaanada;
- Barnaamijyada wax kuakhriga guriga;
- Booqashada guriga ee macallimiinta ama waalid kale;
- Xafladaha gaarka ah, sida Caweesyada Xisaabta iyo Akhri/Qoridda;
- Dejinta nidaamka iyo ismaamulka dugsiga; iyo
- Fursadaha ishurida – fasalada, Xarunta Qoyska ee dugsiga, hawlaha qaadhaan ururinta, iyo kulamada maaweelada.

Dugsi kasta ee dadweynaha Boston waxa laga filayaa inuu:

- meel u sameeyo waalidku ku kulmo;
- sameeyo kaltan usbuuc kasta ay macalimiintu waalidka la kulmaan;
- si degdeg ah looga jawaabaa codsiga waalidka;
- xiriir joogto ah lagula sameeyo waalidka afka guriga lagaga hadlo;
- lagu wargeliyo waalidka hab "soo dhoweyn-waalid ku jirto" xagga istaratiijiyadaha hagaajinta horukaca ardayga;
- xaga heerka dugsiga sare, siinta waalidka manhaj qoraal koban) ee maadooyinka muhimka ah ee koorso kasta la barto.

### Hawlgelinta Qoyska iyo Ilmana Dib Lagagama Tegayo (No Child Left Behind – NCLB)

Xaaaga sharciga fedraaliga ee «No Child Left Behind (NCLB)», dugsiyada idil ee u qalma maalgelinta «Title I» waa inay yeeshaan nidaam qoraal ah ee Kaqaybgalka Waalidka, oo waalidku wax ka sameeyey waxna ka ansixiyey. Nidaamkani waa inuu cadeeyaa sida waalidku uga qayb gelayo iskaashi ahaan waxbarashada ilmahooda.

Waxa intaas raacda, dugsi kasta ee "Title I" waa inuu sameeyaa Isafgarad Dugsi-iyo-Qoys, taas oo ah heshiis qeexaya mas'uuliyadaha maamulka, ardayda, macalimiinta, iyo waalidku fulinayaan si loo wanaajiyo hanahada ardayga. Kadib marka Isafgaradka ay ansixiyaan Golaha Rugta Dugsigu, waa in nuqulo loo diraa waalidka idil siday u soo saxeexaan.

Fiiri boga 56–57 sidaad wax uga ogaatid iskaashiga NCLB iyo iskaahiga guriga-dugsiga.



### Golaha Waalidka Dugsiga

Dugsiyada idil waa inay lahaadaan Golaha Waalidka Dugsiga (SPC). Golaha «SPC» waa inay isu keenaan waalidiinta idil ee dugsiga siday u taageeraan dugsiga oo garab u siiyaan tayada waxbarashada. Adoo ah waalid ama koriya arday ku jira DDB waxad toos u noqonaysaa xubin Golaha Dugsiga Waalidka. Wuxu Golaha «SPC» wuxu doortaawakiilada Golaaha Rugta Dugsiga (School Site Council -SSC) wuxuna si buuxda ula shaqeeyaa golaha "SSC" siday dibufiirin ugu sameeyaan miisaaniyada dugsiga, u ogolaadaan barnaamijyada, u taageeraan xafladaha, qaadhaana u ururiyaan hawlaha gaarka ee dugsiga.

Maxaa jira hadaan dugsigaagu lahayn golaha «SPC»? La xiriir Unugga Hawlgelinta Qoyska Dugsiga & Bulshada ee Xafiiska Hawlgelinta Qoyska & Bulshada, 617-635-7750. Iyagaa kugu caawinaya inaad mid bilawdo.

### Golaha Rugta Dugsiga

Go'aamo badan oo saameeya waxbarashada ardayda DDB ayaa dugsiyadu sameeyaan. Go'aamada dugsiga ku salaysan waa mas'uuliyada Golaha Rogta Waalidka.Matalan, Golayaasha Rugta Dugsiyada ayaa shaqa geliya macalimiinta (mararka qaarkood), ogolaada sharciyada dugsiga, oo go'aamiya in ardayda dugsiga lebis yeeshaan. Golaha Rugta Dugsigu waxay kale codsan karaan in laga cafiyo nidaamyada DDB. Waalidiintu waa xubno muhim ah oo ka mid ah golayaashaas.

Guddi-Hoosaadka Shaqaalaha ee Golaha Rugta Dugsiga baa ogolaan kara shaqaalaynta iyo bedelaada hoose ee macalimiinta. Waa in hal xubin waalid ku jiraan.

## Kooxaha kale ee waalidka

Waxa soo raaca Golaha Waalidka Dugsiga iyo Golaha Rugta Dugsiga, kooxaha DDB ee aan afkooda hoyo ahayn Ingiriisi, kuwa caruurtoodu naafada tahay, iyo kuwa caruurtooda kunjiraan barnaamijyada Title I. Telefanadu waxay ku yaaliin boga 9.

## Xarumada Waxtarmada Qoyska

Dugsiyada Dadweynaha Boston sadexdooda Xarumood ee Waxtarmada Qoyska (FRCs) iyo hal rug ee gacanyarta ahi waxay xaasaska u fidiyaan adeegyo badan. Soo booqda Xarumada "FRC" si:

- aad talo uga heshaan xulashadiina dugsi iyo nidaamyada DDB;
- loo qoro arday cusub dugsi;
- loo codsado bedelaad dugsiyo kale;
- loo buuxiyo cinwaan bedelid hadaad guurto;
- loo helo xogta (afafka badan) xaga dugsiyada, barnaamijyada kulaylaha, iyo adeegyada caafimaadka iyo agabyada dadka ay heli karaan xaasaska Boston.

## Gacan Ufidinta Qoysaska

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay si xoogle ugu shaqaynayaan xoojinta iskaashiga Guriga/dugsiga. Laba barnaamij ee Xafiiska Hawlgelintaa Qoyska & Bulshada, ayaa leh shaqaale xirfad iyo aqoon leh oo ku caawinaya fulinta arrintaas.

Qiyaasta dugsi waxay leeyihiin Isuduweyaalka Gacan Ufidinta Qoyska & Bulshada (Family & Community Outreach Coordinators ó FCOCs). Himilooyinkooda dhexetaalka ahi waa:

- Dhisidda xiriiryada ka dhexeeya waalidiinta iyo waalidiinta iyo macalimiinta
- Dhisidda awoodda waalidka siday u caawiyaan ilmahooda oo u noqdaan hogaamiyeyaal dugsi
- Ka dhigidda dugsiyada meelo waalidka lagu soo dhoweeyo

▶ **Xogta xagga FCOCs-yada 617-635-9569**

Unugga Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshadu wuxu la shaqeeyaa dugsiyada DDB oo idil siduu ugu caawiyo abaabulka Golayaasha Rugta Dugsiga, qorshaynta hawlgelinta waalidka xagga waxbarashada ilmahooda iyo fududaynta xiriirinta waalidka iyo shaqaalaha dugsiyada. Xubnaha shaqaalaha baa tababar khaas ah ku qaatay la shaqaynta waalidka aan af Ingiriisi badan aqoon ee haysta ilmoyaal ku jira barnaamijyada waxbarasha gaarka ah.

▶ **Xogta xagga Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska iyo Bulshada 617-635-7750**

## Qaabka Telefanka Laxiriirka Waxbarasho (Connect-Ed)

"Connect-Ed" waa qaab telefan iswada oo DDB isticmaasho si loola xiriiro qoysaska ardayda iyo shaqaalaha DDB. Waxan u isticmaalaa sidaan ugu gudbino si dhaqso ah wixi xog muhim ah, sida gurmadka degdega ah iyo xusuusinta xaga kulamada iyo waqtiyada lagu talagalay, iyo xataa «Ku soo dhowaada dugsi sanadeedka cusub». Waxad ka heli kartaa telefanka «Connect-Ed» dugsiga ilmahaaga ama «Xafiiska Dhexe» ee DDB.

### Xagga Golaha Waalidka Dugsiga

- Dugsi kasta waa inuu leeyahay Golaha Waalidka Dugsiga (SPC). Waalidka oo dhan waa xubno. Waalidiinta parents oo keliya ayaa znoqon kara xubin.
- Golaha Waalidka Dusigu waa meesha keliya ee waalidiintu ku cabiri karaan fikradahooda iyo taagerka dugsiga.
- Golaha Waalidka Dugsigu waxay ku doortaan shir gudoomiyeyaalka waqtiga dayrta, ugu dambayn Oktoobar 15. Shirkaas, waxay kale ku doortaan Golaha Rugta Dugsiga.
- Gudoomiyaalka Golayaasha Waalidka Dugsigu (SPC) waa inay si joogto ah kulan ula yeeshaan maamulaha siday uga wada hadlaan arrimaha dugsiga.

### Xagga Golaha Rugta Dugsiga

- Dugsi kastaa waa inuu leeyahay Golaha Rugta Dugsiga.
- Golaha Rugta Dugsigu waxay ka kooban yihiin wakiilada waalidka, macalimiinta, maamulaha, iyo xubno taageera. Golayaashan dugsiga sarena waxa ku jira xubno ardayda ka socota. Tirada waalidka waxa le'eg xubnaha macalimiinta.
- Wakiilada waalidka ee Golaha Rugta Dugsiga waxa la doorta maalinta kulanka doorashada sanadkiiba ee Golaha Waalidka Dugsiga. Kulankaas waa in la qabtaa ilaa Oktoobar 15.
- Golaha Rugta Dugsiga:
- waxay dib u fiiriyaan oo ansixiyaan Qorshaha Wanaajinta Dugsiga Dhamaantiis;
- waxay ansixiyaan miisaaniyada makhaasirta furan (waa miisaaniyada kuwaan "xirnayn"),
- waxay ogolaadaan qorshayaasha kordhinta ka qaybgalka waalidiinta,
- waxay ansixiyaan kacafinta sharciyada DDB iyo qandaraasyada ururada shaqaalaha,
- waxay dib u fiiriyaan oo ansixiyaan talooyinka culays weyn ku yeelan kara beesha dugsiga .
- Wakiilada Golaha Rugta Dugsigu waa inay jawaabcelin u sameeyaan Golaha "SPC".
- Kulamada Golaha Rugta Dugsigu waa u furan yihiin waalidka idil iyo cidii kaleba.

**Wixi xog dheeraad ah: Wac Unugga Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshada ee Xafiiska Hawlgelinta Qoyska &Ardayga:**
**✆ 617-635-7750**

# Iskaashiga Qoyska/Dugsiga: Xiriirka Dugsiga (waa socotaa)

## Soo Dhowaada Kuwa Booqanayow!

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay waalidka iyo dadka kaleba ku soo dhoweynayaan booqashada dugsiyada iyo fasallada. Isla markaas, waa inaan hubinaa nabadgelyada ardayda iyo shaqaalaha dugsiyada, iyo inaan taasi wax u dhimayn hawlaha waxbarashada

Dugsiyadu waa inay ka war hayaan dadka ku dhex jira iyo sababaha ay u joogaan. Dugsiyada hoose oo dhami waxay leeyihiin hab fidiyoo guuxa markaas qofna sooma geli karo dugsiga hadaan shaqaluhu ka war hayn. Dugsiyada Dhexe iyo kuwa sare waxa jooga shaqale nabadgelyada loo tababaray.

Waxa intaas raacda, DDB waxay habeeyeen talaabooyinka soo socda oo loogu talagalay dadka dugsiyada soo booqda, kuwaas ay ka mid yihiin waalidka, shaqqalaha waaxda waxbarashada, iyo dad kaleba.

- Dadka soo booqanaya oo *dhan* waa inay marka hore soo maraan xafiiska dugsiga intaanay meel kale u gudbin, waana inay saxeexaan markay baxayaa. Dugsiyada qaarkood waxay irida hore dhigaan miis halkaas oo dadka soo booqdaa saxeexaan gelitaanka iyo bixitaanka. Hase ahaatee hadaan cidi fadhiyin waa in la tagaa xafiiska.
- Dadka booqanaya oo *dhan* waa in la siiyaa aqoonsi markay saxeexaan buuga martida. Waana inay soo celiyaan markay baxayaan. Fadalan hubi in kaarka lagu siiyey muuqdo intaad dugsiga ku jirto. Kaararka aqoonsiga looma baahna waqtiga xafladaha Aqlka Furan, Habeenka Waalidka iyo kuwa kale ee dugsigu marba u soo abaabulo shacbiga.
- Si loo daryeelo nabadgelyada ardayda iyo shaqaalaha, waxanu u qaadanaynaa dadkaan buuga saxeexin aan muujin karin kaarka booqashada kuwo ku xad gudbaya dugsiga. Qof shaqaalaha dugsiga ka mid ayaau sheegi kara inay dibadda uga baxaan dugsiga iyo fagaarihiisa.
- Dadka doonaya inay la kulmaan macallin ama maamulka waa inay ballan dhigtaan. Macallimiintu waxay usbuucii leeyihiin waqti lou tala galay la kulanka waalidka. Ballan looma baahna waqtiga Aqalka Furan, Habeenada Waalidka iyo xafladaha kale ee bulshada loo furo.
- Macalimiinta filaya qof soo booqanaya waa inay xafiiska u sii sheegaan. Mararka qaarkood, qof shaqaalaha ka mid ah ayaa qofkaa u kaxayn kara meesha macallinku joogo.
- Mararka qaarkood, waxa dhici karta mushkilad ka dhexaysa waalid iyo macallin ama shaqaale kale. Hadii waqti kulan ah loo qabtay si mushkilada loo afjaro, waxa lagu qaban donaa xafiis ama qolka shirarka – laakin maaha qaolka fasalka. Waa in waalidku marka hore ka xaadiraa xafiiska kadibna loo kaxeeya meesha shirku noqon doono. Qof maamulka ka mid ah ee xafiiska weyn oobjoog noqon doona
- Hadii waalidku rabo inay ilmaha dugsiga ka kaxaystaan kahor iyadaan waqtigii dhamaan, hadii loo baahdo, waa in waalidku dugsiga soo wacaa xafiiska dugsiga kahor, ilmahana ka kaxaystaan xafiiska ama meel kale oo dugsigunkeenay. Walidku waa inayan toos fasalka u tegin si ay ilmaha u soo kaxaystaan. Dugsigu ilmaha uma dhiibayaan qof aan ahayn cidda ka mas'uul ah hadaan waalidku fasaxin aqoonsina qofku keensan.
- Mararka qaarkood, waalidka ama dadka kale ee dugsiga soo booqdaa waxay geliyaan rabshad hawlaha dugsiga iyagoo ku adkaysanaya inay galaan fasalka iyagaan isasii sheegin, waxayna dhibaan shaqaalaha, iyagoo qoob iyo qayli isku daraya, afxumana ku hadlaya. Hadii falxumadaasi sii socoto, maamulaha dugsigu wuxu xakamayn karaa qofkaas imaatinkiisa dugsiga ama mustaqbalka waaba u diidi karaa soo gelitaanka dhismaha iyo barxada dugsiga.

## Nidaamka Isgaarsiinta

Dugsiyada Dadweynaha Boston, Guddiga Dugsiyada Boston, Agaasimaha Guud iyo dhamaan shaqaalaha dhexe ee dugsiyada ku salaysan waxa xil ka saran yahay inay si sax ah oo wax ku-ool ah ula xiriiraan qoysaska, ardayda, kuwa kalee la shaqeeya, kuwa is-kaashiga la leh iyo bulshada. Xiriir joogta ahi waa lagama maarmaan xagga horumarinta iyo joogtaynta iskaashiyada wax ku-oolka ah ee guriga/dugsiga/bushada dhexdeeda si loo hagaajiyo guulgaarka ardayga.

Guddiga Dugsiyada Boston waxay xaqiijinayaan mabaadi'dan:

- Qoysaska iyo muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan waxa ka socda dugsiyadooda dadweynaha.
- Shaqaalaha DD oo dhami waxa waajib ku ah xaqiijinta in shacbiga si habsami ah oo haboon loo wargeliyo.
- Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo qoysasku waxay ka faa'iidaysanayaan wadaagga wararka haboon – xumaan iyo samaanba.
- Xiriirada qoraal iyo afba ee dugsiyada iyo shaqaaluhu waa inay muraayad u noqdaan in DDB heegan u yihiin taageerka caruurta idil iyo qoysaska iyagoo isha ku haya guulgaarka ardayga ee ku saabsan waxbarid iyo waxbarasho tayo sare.
- Xiriirka wax ku-oolka ahi waa isweydaarsi inuu noqdo, waana in xafiiska dhexe iyo dugsiyadu helaan siyaabo xogta looga helo qoysaska, ardayda iyo bulshada xagga arrimaha iyo go'aanada muhimka ah.
- Luqadda loo isticmaalo la-xiriirka qoysaska iyo bulshada waa inay ahaadaan kuwa aanay ku jirin afka cilmiyeed ee ayan aqoon dadka aan cilmi badan lahayni.
- Xiriirka idil waa inuu noqdaa mid muraayad u ah oo xasaasi ah xagga kala duwanaanta qoysaska DDB iyo shaqaalaha, kana xor yahay eexda xagga jinsiyadda, dhalashada, luqadda, waxbarashada, dakhliga, lab iyo dheddignimada, diinta, habdhaqanka balwadda, ama naafanimada.

Wixi xog dheeraad ah xagga Nidaamka Xiriirka booqo website-ka DDB ama wac 617-635-9265.

# Uqareemidda Ilmahaaga:
## Liiska Murugtirka Mushkiladaha

Haday jirto mushkilad adiga iyo dugsiga, waxan jecel nahay inaan xal u helno. Sida ugu dhaqso bada xalilka muhkilada, fadlan soo wac dadka ama xafiisyada hoose siday isugu xigaan.

### Arrimaha Saameeya Waxbarashada Ilmahaaga

1. Macalin
2. Maamule ama Madax dugsi
3. Xafiiska Agaasimaha Guud ee Tacliinta ★

### Arrimaha Guud ee Dugsiyada

1. Maamule ama Maadaxa Dugsiga
2. Hogaamiyaha Hawleed ★
3. Dhexdhexaadiyaha (Ombudsperson) Agaasinka Guud, 617-635-6995◆

### Dawladaynta Dugsiga (Golayaasha Dugsiga Waalidka & Rugta Dugsiga)

1. Maamulaha ama Madaxa Dugsiga
2. Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshada: 617-635-7750
3. Kaaliyaha Agaasimaha Guud ee Hawlgelinta Qoyska & Ardayga, 617-635-9661

### Anshaxa

1. Maamule ama Madaxa dugsiga
2. Hogaamiyaha Hawleed ★
3. Xafiiska Agaasinka Guud, 617-635-9050

### Nabadgelyada

1. Maamulaha ama madaxa dugsiga
2. Hogaamiyaha Hawleed ★
3. 1-877-SCH-SAFE, khadka «talobixinta» qarsoodiga ah ee nabadgelyada

### Gaadiidka

1. Maamulaha ama madaxa dugsiga
2. Waaxda Gaadiidka, 617-635-9520

### Meelaynta, Bedelaada, Liisaska Sugida Dugsiyada, iyo Degenaanshaha

1. Khadka Diiran ee Dugsiyada, 617-635-9046 (fiiri boga 5 xaga maalmaha adeega)
2. Xarumada Waxtarmada Qoyska (fiiri boga 5)
3. Adeegyada Qoritaaanka, 617-635-9501
4. Nidaamka racfaanka ee degenaanshaha: Dhexdhexaadiyaha Xaafiiska Agaasinka (Ombudsperson)◆, 617-635-6995

**XUSUUSNOW:** Maamulayaasha iyo madaxda dugsiyadu ma bedeli karaan meelaynta dugsi, mana ku balan qaadi karaan in ilmahaagu galo dugsi aad rabto.

### Arrimaha Barteyaalka Af Ingiriisiga (ELL)

1. Macalinka
2. Maamulaha ama Madaxa Dugsiga
3. Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshada 617-635-7750
4. Barashada Af Ingiriisiga, 617-635- 9435

### Arrimaha Waxbarashada Gaarka ah

1. Macalinka
2. Maamulaha ama Madaxa Dugsiga
3. Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshada, 617-635-7750
4. Kaaliyeyaalka Agasimeyaalka Barnaamijyada (ADP) Waxbarashada Gaarka ah, 617-635-8599
5. Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah, 617-635-8599

★ Dugsiyada Boston waxay u qaybsan yihiin noocyo: hoose, dhexe/K-8, sare iyo tijaabo. Nooc kastaa wuxu leeyahay Agaasimaha Guud ee Tacliinta, Kaaliyaha Agaasimaha Guud, iyo Hogaamiyaha Hawleed. Lambaradatelefanadu waxay ku yaaliin boga 5.

◆ Dhexdhexaadiyuhu (Ombudsperson) wuxu u adeegaa shacbiga guud—siiba waalidka—xaga qiimayna iyo/ama dhedhexaadinaya mushkiladaha la xiriira dugsiyada. Dhexdhexaadiyuhu ama "Ombudsperson"-ku wuxu warbixin u gudbiyaa Agaasimaha Guud iyo Gudiga Dugsiyada.

## Wax ka sii baro Iskaashiga Qoyska/Dugsiga

- Tag "website"-ka DDB, la xiriir dugsiga, ama wac:

| | |
|---|---|
| Golaha Latalinta Waalidka Boston ee Title I (BPAC) | 617-635-9210 |
| Golaha Waalidiinta Magaaloweynta (CPC) | 617-635-9210 |
| Xarumada Waxtarmada Qoyska | Fiiri boga 5 |
| Xafiiska Hawlgelinta Qoyska & Ardayga | 617-635-9661 |
| Golaha Talinta Waalidka Baahiyaha Gaarka ah | 617-635-9210 |

- Fiiri bogaga 61–63 xaga liisaka hay'adaha bixiya agabyada la xiriira waxbarahada iyo taageerada qoysaska.

## Ma Og Tahay...

- Maaha inaad sugto maalinta Aqalka Furan (Open House) ee dugsia sidaad ula kulanto macalinka ilmahaaga. Macalimiinta waxay leeyihiin waqti loogu tala galay inay la kulmaan waalidka. Wac dugsiga sidaad balan ula qabsato macalinka—xaga telefanka ama la kulan dugsiga ah.
- Dhamaadka Sebtembar, dugsi kastaa waa inuu siiyaa waalidka magaca iyo telefanka shaqaalaha dugsiga (iyo macalinka ilmaha ugu jira) ee waalidku wici karo haday welwel ka qabaan horukaca ilmahooda.

# Isudiyaarinta Kulan Macno leh ee Waalidka-Macalinka

Waqtiga kulanka macalimiinta iyo waalidka, isu diyaarinta wacani waxay waalidka ku caawinaysaa inay si dheeraad ah uga faa'iidaystaan kulanka oo aqoona sii wacan ka gaaraan siday ugu caawin lahaayeen in ilmahoodu aflaxo. Isu diyaarinta fiicani waxay kalee waalidka ku caawinaysaa gogoldhigga xiriir joogto ah ee macalimiinta lala yeesho.

## Helitaanka Talaabo Bilaw Wacan

Waalidku waa inay ku dadaalaan inay la dhistaan xiriir wacan macalinka. Hal si oo taas loo samayn lahaa waa bixinta faalo waxtar u ah macalinka. Maatalan, inaad macalinka ugu mahad celiso tusaalaha wacan ee buuga shaqaguriga ilmaha uu ku qoray ama fiiro gaar ah uu ilmaha ku siiyey barashada xisaabta iskudhufadka.

Inta badan, kulamada waalidka-macalinka, macalimiintu waxay ka waramaan shaqada ardayga waxana laga yaabaa inay bixiyaan karaka warbixinta. Waqtigaasi waa fursad fiican in lagala hadlo macalinka siyaabaha waxbarashada iyo sida loo qiyaaso horukaca ardayga. Ardayda ma waxa lagu qiyaasaa imtixaano? Shaqooyin? Kaqaybgalka fasalka? Mashruucyo? Waxay kale waalidku warsan karaan macalinka inuu ku caawiyo fahamka nidaamyada dugsiga.

## Sidee Ilmahagu wax u Wadaa?

Mar hadii kulanka waalidka-macalinku yahay ilaa 20 daqiiqo, waalidku waa inay ku tashadaan inay ka hadlaan maadooyin kooban. Markaad samaynayso liis su'aalo ah, waa inay kuwa ugu muhimsan marka hore weydiisaa.

Haalkan waxa ah su'aalo macalinka aad ka weydiin karto ilmahaaga:

- Sidee weeye ilmahaygu maalintii? Ma ka qayb gala/gashaa doodaha iyo hawlaha dugsiga?
- Waa kuwee maadooyinka ilmuhu ugu fiican yahay iyo kuwuu ugu xun liito? Sidee uga caawin karaa meelaha shaqo u baahan?
- Waa maxay cabirrada heerka fasalka ilmahayga?
- Sidee ilmahagu ula caamila caruurta iyo dadka waaweyn?
- Ilaa intee baan wax ka tari karaa hawlaha shaqaguriga loo soo diro?
- Ilmahaygu ma wwuxu ku la dhigtaa maadooyin kala duwan fasalo iyo kooxo kala duwan? Sidee baa kooxahaas loo dejiyey?
- Ilmahaygu ma u dadaalaa intii tamartiis/tamarteed ah?

## Ka Qaybgelinta Ardayga

Waxa soo kordhaya dugsiyada dhexe iyo kuwa sare ayaa arday in ka qaybgelinta ardayda shirarka waalid-macalin ay ardayga siinayaan dareen mas'uuliyadeed xaga waxbarashadiisa/waxbarashadeeda. Waqtiga shirarka, ardaydu waxay ka wadahalayaan shaqooyinka ay qabtaan ó isugeynta guud ee tusaya dadaalka ardayga, horukaca, iyo kasbashada xagga mid ama maadooyin ka badan. Ilmuhu wuxu u sharxayaa waalidka iyo macalinka waxa shaqadu ku wacan tahay, wuxu bartay/baratay, iyo meelaha caawimaad u baahan.

Hadaan ardaygu ka qayb gelin shirka, waalidku horey u weydiin karaan ilmaha waxyaabaha uu dugsiga ka tabanayo. Isla markaas, waalidku wuxu weydiin karaa waxyaabuhuu ku xoogsan yahay iyo kuwu ku liito/liidato, iyo maadooyinkuu jecel yahay iyo kuwuusan sidaas u jeclayn. Waqtibaa la helayaa hadii kulanka khor waalidku ilmaha kala hadlay buugagta, fasalada, iyo xisadaha ilmuhu dhigto.

Waalidku waxay macalimiinta u sheegi karaan wixi isbedel weyn ah ee nolosha ilmaha ku dhacay (dhimashada neef ama bahal ay haysteen, awow/ayeeyo bukaan ah, waalid isfuraya, ama reerka oo meel kazoo guuray), ama hawlo muhim ah ee ilmuhu ku foogan yahay (sida isbortiga, sahamada, adeega bulshada, ama shaqo dugsi kadib).

## Foodsaarka Mushkiladaha

Shirarka waalid-macalin waa waqti ku haboon kawada hadalka dhcadooyinka oo idil —xag tacliin iyo xag dabeecadba—ee ilmuhu dugsiga kala kulmo. Marka mushkiladi timaado, waalidku waxay jeclaysanayaan inay

- iska ilaashaan iska horimaad cadho ama cudurdaar. Oy helaan tusaalooyin.
- Wediiyaan waxa mushkilada laga qabanayo iyo istaratiijooyinka dugsiga waxtar u noqonaya.
- Saameeyaan qorshe ficil ay ku jiraan talaabooyin waalidku qaadi karo xaga guriga iyo kuwo macalinku macalinku qaadayao hadii arrintu dugsiga ka dhacdo.
- La dhigo qorshe kulan dabagal ah si loogu tashado sida ugu fiican ee xiriirka loo wadi karo (telefan, "e-mail", ama warqado guriga loo diro).

## Dabagalka

Marka kulanka kadib lagala hadlayo ilmaha, xooga saar wayaabaha wacan ee la sheegay toosna u muuji mushkiladaha la soo bandhigay. Haday habootaato, u sharax ilmaha wixi shorshe ah ee lagu taliyey in la sameeyo.

Sida fiican ee loo sii wadi karo xiriirka macalainka waa iyadoo lagu dhaho «mahadsanid» warqad ama telefan loo diro. La xiriirka macalinka, xataa marka arrimuhu wacan yihiin, waxay ku caawinaysa ardayga inuu dugsiga si wacan u dhigto. Marka ilmuhu ogaado in waalidka macalinku si joogto ah u wada shaqeeyaan, wuxu ilmuhu arkayaan in waxbarashadu tahay muhimada aad u saraysa una baahan heegan iyo dadaal.

ó waxa qoray Ted Villaire
(waxa tifaf tiray Dugsiyada Dadweynaha Boston)

La daabacay iyadoo fasax laga helay National PTA website, www.pta.org

# Iskaashiga Qoyska/Dugsiga:
## Kuxirnaanta Guriga

### Siyaabo Sahlan ee Barashada lagu Dhiirigelinayo

Halkan waxa ah siyaabo sahlan aad guriga ku samayn karto adoo ku caawinaya ilmahaaga inuu wax barto oo aflaxo.

1 **Ilmahaaga tus inaad aaminsan tahay.** Ilmahaagu hakaa maqlo, laga bilaabo markay da'da yaryihiin, inaad rumaysan tahay inay aflaxayaan. Ku soco inaad sidaas u sheegto da' kasta.

2 **La hadal, la hees, oo la akhri ilmahaagaóinta ugu badan aad karayso!** Siyaabahaas idil aad ilmaha afka ugu bandhigayso waa muhim, laga bilaabayo markay murjuca yihiin. Isku day in dad waaweyn ama walaalo ka weyni wax u akhriyaan maalin kasta.

3 **Ka qayb geli qaraabada.** Ka codso dadka ilmaha danaynayoo dhanóeedooyin/habar-yaro, adeero/abtiyaal, awoowe/ayeeyo, ilma abti/ilmaadeer. Kuwa lagaga tago, derisk, iyo saaxiibadaóinay ku dhiiri geliyaan in ilmuhu dugsiga ku aflaxo.

4 **Sookoob daawashada TV-ga.** Isku day inaad xakamayso inta TV ama fidiyoo ilmuhu daawan karaan, ama ha kula joogeen, ama qof lagaga tegey, ama keligood ha ahaadeen. Caruurta daawada sadex saac iyo in ka badan TV-ga maalin walba waxay halis u yihiinin ka badan kuwa kale mushkiladha waxabarasho iyo foojignaanta iyo helitaanka heerar hoose xaga dugsiga. Run ahaan, waa u wacan tahay reerka oo dhan in TV-ga la bakhtiiyo oo la sheekaysto, tamshle loo baxo, wax la akhriyo, ama muusik la dhegeysto.

5 **U muuji dhaqmaati wacan xagga dugsiga iyo tacliinto.** Ka hadal sidaad u danayso sida ilmahaagu dugsiga ku yihiin. Isku weydiinta su'aalo sahlan sida «manta saaxiibkaa ma joogey dugsiga? Maanta wax cusub ma ka samaysay dugsiga?» Hadaad karto, isku day inaad hesho kaqaybgelka dugsiga ilmahaga.

6 **Xaqiiji in ilmahaagu sameeyaan shaqguriga.** Fiiri shaqaguriga ilmahaaga habeen kasta. Weydii inay sharxaan waxay dhiganayaan. Hubi in waxa loo soo diro ay fuliyaan. Haday suurtogal noqoto, u samee meelaan sanqadh lahayn oo iftiin wacan inay wax ku bartaan, fiid kastana waqti u xidh lagu sameeyo shaqaguriga. TV-ga bakhtii waqtiga shaqaguriga. Hadii ilmuhu ku dhahaan shaqaguri ma jirto in badan, ka hubi macalinka.

7 **Ku caawi ilmahaaga maamulka iyo agaasinka waqtiga.** Hubi inay maado kasta u haystaan bug ay wax ku qoraan iyo fayl. Isku day inaad hayso qalimo, waraaqo iyo qalabka kale ee waxbarasho. Tus sida qoraal cad loo sameeyo ee loo qoro waxyaabaha loo soo diro. Waqti u dhig maalin kasta ee lagu sameeyoó dibna haw dhigin ilaa waqtiga la seexanayo. Inta badan waxa wacan inay hawsha adag marka hore qabtaan, intayan daalin. Hase sahatee, mararka qaarkood waa wacan tahay inay waxa sahlan ku bilaabaan siday si wacan ugu soo jeestaan kuwa adag.

8 **Xaqiiji in ilmahaagu hurdo ku filan helo.** Caruurta, iyo xitaa dhalinyaradu, waxay u baahan yihiin ugu yaraan sagaal saacadood oo hurdo habeen kasta siday ugu fiicnaadaan dugsiga. Sida Machadyada Caafimaadka Umaddu dhigeen, cunuga aan helin hurdo ku filan wuxu mushkilad ka helayaa dhegeysiga duruusta iyo jawaab dhaqso ah inuu bixiyo, wuxuna yeelan karaa mushkilado xaga dabeecada In loo dhigo waqti hurdo oo joogto ah ilmaha waa sida sahlan oo lagu dhiirin karo waxbarashada.

Waxa laga soo guuriyey: www.colorincolorado.org/home simpleways.html.
Wixi fikrado dheeraad ah ee sidaad ilmahaaga guriga ugu caawin lahayd, weydii macalinka. Macal-imiintu waxay haystaan waqti loogu tala galay la xiriirka waalidka usbuuc kasta.



### Udoorista Buugagta Caruurta

**Maxaan wax ugu akhriyayaa ilma-hayga?**

Caruurtu way jecel yihiin markaa waalidka, qof lagaga tegey ama qof weyni wax u akhriyo - waana siyaabaha ugu muhimsan ee lagu caawin karo in lagu hagaajiyo kartida afka ee dugsiga ka baxsan. Marka ilmaha wax loo akhriyo waxay kale dhistaa aqqontooda erayada waxayna siisaa aqoonta saldhig ah ee ku caawin doonta fahamka buugag sii adag ee dugsiga yaal.

**Inantaydu buugagta waa akhrisan kar-taa. Hadana ma inaan wax u akhriyaa?**

Haa! Xataa dadka waaweyni waa jecel yihiin in wax loo akhriyo. (Waa waxa loo jecel yahay «buugagta mulaaxda ku duuban».) Caruurtu way fahmi karaan oo ku istareexi karaan in loo akhriyo buugagta iyaga ku adag inay akhristaan.

**Maxaan ku garan karaa buugtaan inan-kayga u dooro inay ku adag yihiin?**

Buugagta caruurtu keligood akhristaan waa inay kuwo sahlan ahaadaan sidayan u nicin. Ku day «habka shanta farood». Hadii ilmuhu tiriyo shan eray ee 100 erayba (waa hal bog) uusan akhriyi Karin, buugaasi waa mid adag. Caruurtu waxay u baahan karaan akhriska buugag heerka fasalkooda ka hooseeya. Haday ku aflaxaan akhriga buugagta u sahlan, waxay rabayaan inay kuwa kale sii akhriyaanówaxayna beri dhow akhriyi doonaan buugag ka sii adag.

# Iskaashiga Qoyska/Dugsiga: Kuxirnaanta Guriga (waa socotaa)

## Talosiinta Waalid xaga Akhriga

- ☑ Caruurta yaryari habeen kasta si sare wax ha kuugu akhriyaan (xataa buugta majaajiladu waa OK!), adiguna sare wax ugu akhri ilmaha, af Ingiriisiga ama afka hooyo
- ☑ U door meel aan sanqadh lahayn, oo aan wax jeediya lahayn, si ilmahaagu habeenkii uga shaqeeyo hawsha akhriga loo soo diray.
- ☑ Ilmahaagu meelaha caadiga ah wax ha ku akhristo (baabuurka, akhriska cuntada sida laysugu daro, dukaanada waaweyn, waqtiga quraacda – xataa xamaamka!)
- ☑ Hadaad u ogolaato in ilmahaagu ku arko adigoo wax akhriyaya taasi way ku hiyi kicinaysa inuu daneeyo.
- ☑ Marka ilmahaagu wax akhrisanayo, tus higaada iyo hanaanka ku dhawaaqa.
- ☑ Ka weydii su'aalo ilmahaaga shaqsiyadaha iyo dhacdooyinka sheekada. Weydii waxa shakhsi sheekada ku jiraa si gooniya wax u samaynayo. Weydii inay jawaabteeda ku taageerto warar ku jira sheekada. Intaan sheekada la dhamayn, weydii waxa dhici doona iyo sababta.
- ☑ Qoraalku waa qayb muhim ah oo akhriska ka mid ah. Weydii ilmahaaga, kadib markuu sheeko akhriyo, inuu qoro dhacdo ka dambaysa ama shakhsi ku jiray sheekada mid kale ku bedelo. Ku dhiiri geli inuu qoraaga buuga dhambaal u diro.
- ☑ Bilow naadi buug ee waalid-ilmo ado soo dooraya "buuga bisha" ood labadiinuba akhridaan kadibna ka wada hadashaan.
- ☑ U kaxee ilmahaaga maktabada ama dukaanka buugagta inta badan aad karaysid. Ku caawi siduu u dalbado kaadh maktabadeed.
- ☑ Ku dhiiri geli ilmahaaga akhriska maadooyin la daneeyo ee jaraa'dka iyo internetka.
- ☑ Weydii ilmahaaga filim ama konjeerto ay aragtay, soona hel bug arrintaas ku saabsan.
- ☑ Ilmahaaga u bandhig alaab badan oo kala duwan oo daabacan. Ha soo ogaado faraqa u dhexeeya maqaalo, sheekooyin, buugag dugsi, wargeysyo, joornaalo iy jaraa'id.

### Ha moogaan «Hawlqabad Gal» – Samaynta Iskuxirka Guriga-Dugsiga

Waa barnaamij dhab ah oo laysla hadlo, ee BNN Waa Comcast Mawjada 23 iyo RCN Mawjada 13

Kala xiriir Khamiiis kasta, 6–6:30 galabti.

Mawduucyada laga soo jeediyeo barnaamijka waxa ku jira Fahamka MCAS, Fahamka Manhajka "Baadhitaanka" (Investigative) Xisaabta, Hawlgelinta Qoyska iyo Ardayga, Agabyada Dugsi Kadib, Waxbarashada Taageerida, iyo in ka badan.

Sida darteed, tv-ga daar, mawgada hel, oo "hawlgal samee!"

## Talosiino Waalidka xagga Xisaabta

- ☑ Bilawga sanadka cusub, ka codso macalinka liis agabyo iyo fikrado ku caawinaya ilmahaaga shaqaguriga xisaabta (sida kaararka midabada leh, agabyada internetka, umeerinta dugsi kadib, iyo hawlaka guriga).
- ☑ Isku day inaad ogaatid sida ilmahaaga xisaabta loogu dhigo, hana barin "tabo gaaban" ee ka hor imaanka sida macalinku wax u baro. Taasi wareer bay u kordhinaysaa ilmahaaga. Dugsiyo badani waxay qabtaan Habeenada Xisaabta si waalidka loo baro tabaha dugsigu isticmaalo xagga barista xisaabta.

### Ma Ogtahay...

- Xafiiska Hawlgelinta Qoyska & Ardayda DDB wuxu u fidiyaa saminaaro qoysaska DDB manhajyo xisaab iyo fananka af Ingiriisiga iyo maadooyin kale, sida imtixaanada MCAS iyo sida ay ilmahooda uga caawin karaan shaqo guriga. Wac Xarunta Tababarka «FSE» wixi xog dheeraad ah, 617-635-7750.

- ☑ Isticmaal adeegyada guriga sidaad u xoojisid barista xisaabta. Fursadaha maalin kasta ee xalilaada mushkiladaha xisaabta waxa ku jira:
  - *Tirinta*: Waxad weydiisaa su'aalaha sida, "Imisa qof baa ina hor socda?" "Ma ku ridi kartaa dambiisha 10 qardaas oo caano fadhi ah?"
  - *Iskuxigida iyo naqshadaha:* Iska dambayntu waa ku muhim xisaabta. La fiiri iskuxigitaanka ilmahaaga: "Waxa muuqata in cid keliyihi inaga horayso. Soo hel naqshado sahlan oo wada socda—midabada marmarka guryaha ama rakaada jaanta dadka lugaynaya. Weydii ilmahaaga naqshadaha u muuqda adoo isticmaalaya waxyaabaha yaryar ee hareeraha ku araktid.
  - *Jajabka iyo qaybaha boqolkiiba:* "Hadii cunto la samaynayo u baahan tahay 1⁄4 koob sonkor ah aan rabno inaan cuntada labanlaabno, waa meeqa sonkorta aan rabnaa?" "Hadii kabahan qiimuhu yahay $34 hadaana sicirkii 50% la dhimay, waa meeqa sicirka kabuhu hada?"
- ☑ La xiriir macalinka sidaad u ogaatid in ilmahaagu ku shaqeeyo heerka fasalka uu ku jiro iyo waxa qoysku u qaban karo si loo wanaajiyo horukaca tacliinta ilmaha.

### Agabyada (Resources):

- 25 Ways Parents Can Read With Children. The Parent Institute; Virginia, 1998.
- www.ed.gov/parents/academic/involve/homework/index.html.

# Nidaamka Gudbinta Dugsiyada Dadweynaha Boston

Dugsiyada Dadweynaha Boston (DDB) waxay heegan u yihiin in qalinjebiye kastaa noqdo arday weligii jira, shaqaale wax soosar leh, wadani mas'uul ah, iyo ka qaybgeale maskax leh ee beelaheena kala duwnan. Macalin kasta, maamule, waalid/koriye, iyo dadka waaweyn ee kale ee daneeya nolosha ardayda DDB wuxu ka qayb qaataa mas'uuliyada in lagu caawiyo ardayda idil sida uga soo baxaan himilooyinkaas.

Nidaamka gudbintu wuxu xoojinayaa himilooyinka iyo mas'uuliyadaha loo dejiyey Cabirrada Waxbarashada Magaalaweynta DDB. Nidaamka gudbintu:

- wuxu qeexayaa himilooyinka aan u hayno ardayda idil iyo tabaha taageerka ee dugsiyadu isticmaalaan si loogu caawiyo inay aflaxaan;
- wuxu xaqiijinayaa in gudbinaha la shaqaysto waxayna ku salaysan yihiin hanashada tacliimeed;
- wuxu yaraynayaa inta suurtogal ah baahida in ardayda fasal dib loogu cesho;
- wuxu xaqiijinayaa in ardaydu ku bilowdo sanad dugsiyeed kasta xirfadaha iyo cilmiga ay u baahan yihiinqabtaan shqada heerka fasalakooda. iyo in qalijebiyeyaalku u carbisan yihiin tacliin sare, nolo qaangaadh ah, iyo shaqayn
- wuxu xaqiijinayaa in ardayda loo diyaariyo inay ku aflaxaan imtixaanka;
- wuxu dhisayaa taxane taageeraya ardayda kana dalbaya halgan adag;
- wuxu aqoonsan yahay in ardaydu xawliyo kala duwan wax ku barato wuxuna dalbaya dhismeyaal maamul oo tixgelinaya kala duwanaantaas ardayda; wuxu kalee
- qeexayaa siyaabaha macalimiinta, maamuleyaasha, ardayda, iyo waalidku xilkooda u gutaan.

## Shuruudaha Gudbinta ee Fasalada Idil

Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudo dhawr ah oo layska rabo si loogu gudbiyo fasalka ku xiga. Ardayda idil waa inay keenaan heerka najaxa ee koorsooyinka qaarkood waana inay fuliyaan tegitaanka dugsiga. Fasalda qarkood, waa in ardaydu ku aflaxdaa imtixaano cabiran ee akhriska iyo xisaabta.

Dugsiyadu waxay degsan karaan shuruudaha gudbinta ee ka sareeya kuwa ku xusan bogagga 18–23. Shuruudahaas dheeraadka ah waa inay ansixiyaan Golaha Rugta Dugsigu (School Site Council).

## Barteyaalka Af Ingiriisiga (English Language Learners – ELL)

Ardayda ku jira barnaamijyada ELL waa inay ka soo baxaan shuruudaha gudbinta iyo qalinjebinta. Hase ahaatee, waxay heli karaan tixgelino gaar ah. Matalan, Ardayda Isbanishka ku hadla ee kartida af Ingiriisigu liidato waxay ku qaadan karaan afka Isbanishka fasalka 10 imtixaanka MCAS ee xisaabta iyo ku celin imtixaanadaas.

## Ardayda Naafada ah

Ardayda naafada ah waxa laga filayaa inay buuxiyaan shuruudaha gudbinta iyo qalinjebinta. Barnaamijka «Individualized Education Program (IEP)» ama Qorshaha Qaybta 504 (Section 504 Plan) ayaa dhigaya shuruudaha laga rabo iyo qorshaha dugsiga ee buuxinaya himilooyinka gudbinta. Waxay kale sharxaysaa shuruudaha ardaygu ku qaadan karo imtixaanada cabira iyo kuwa fasalada kaduwan ii qiimayntaba.




### Heerarka Aflaxaada Duruusta

Macalimiintu waxay ku saleeyaan heerarka ay ardayda siiyaan dhawr isir, ay ku jirto:

- tirooyinka la keeno imtixaanada fasalka;
- buuxinta hawlo loo diray—matalan, warbixin bug, ama mashruuc saynis. Nidaamka Gudbintu wuxu dhigayaa heerarka ardaydu hawlahaas ku helaan waa inay noqdaan ugu yaraan 20% of heerarka ay helaan dhamaadka sanadka;
- hawlaha laysu diro shaqguriga;
- ka qaybgalka doodaha fasalka iyo hawlaha kale ;
- buugagtay ku qoraan duruusta ay qaataan;
- imtixaanada magaalaweynta: Fasalka 3, heerarka Ingiriisiga waxay lagu cabiraa qayb ahaan tirooyinka ardaydu keenaan ee imtixaanada akhriska ee magaalaweynta. Faslada 6-12, heerarka ardayda ee Ingiriisiga, taariikhda, iyo sayniska waxa laga cabiraa qayb ahaan tirooyinka ay keenaan imtixaanada magaalaweynta. Fasalda idil, heerarka ardayda ee xisaabta waxa laga cabiraa qayb ahaan tirooyinka ay keenaan ee imtixaanada xisaabta magaalaweynta.

Heerka aflaxaada ee koorso kasta, imtixaanka fasalka, ama hawl kaloo laysu diray waxa laga cabiraa in la keeno **60%** ama wax ka sareeya.

### La Socodka Horukaca

Waalidku waxay war uga hayn karaan horukaca ilmahooda xaga:

- kaararka warbixinta (fiiri kaltanka ku yaal jeldiga gudaha Hagahan)
- shirarka waalid-macalin
- warbixinada gaarka ee imtixaanka MCAS (dayrta baa loo diraa guriga)
- dibufiirinta shaqaguriga, imtixaanada, buugagta lagu qoro duruusta.

# Nidaamka Gudbinta iyo Kaxaadirka Dugsiga

Waxa weheliya shuruudaha tacliimeed ee layska rabo in la buuxiyo, waa in ardaydu fuliyaan qawaaniinta gobolka iyo shuruudaha DDB ee tegitaanka dugsiga.

Tegitaanka fiican ee dugsiga ee aflaxaadu waa wada socdaan. Marka maqnaanshaha ardaygu sii batabа – xataa hadii maqnaanshaha laga fursan waayo – waa ku sii adkaanaysaa ardayga inuu la socdo fasalka. Ardayda xaadiraada xumi ayaa uga sii dhow inay saaqidaan imtixaanka MCAS ardayda si wacan dugsiga u xaadira.

## Nidaamka Kaxaadirka DDB

1. Arday kastaa waaa inuu dugsiga joogaa ugu yaraan maalin badhkeed si loogu qoro "xaadir." Maamulaha dugsiga ka hubi maalin badhkeed waxay tahay. Dugsiyada badankooda waxay tahay:
   - 3 saacadood dugsiga hoose
   - 3 saacadood iyo 5 daqiiqo dugsiga dhexe
   - 3 saacadood iyo 10 daqiiqo dugsiga sare

   Ardayda timaada bilawga maalinta kadib waa inay raacaan nidaamyada ka daahidda dugsi si loogu texgeliyo joogitaan maalintaas. Dugsiyada hoose iyo dhexe maaha inay ku xisaabiyaan daahida badan sidi maqnaansho. **Dugsiyada Sare way ku xisaabin karaan daahid badan aan cudurdaar lahayn sidi maqanaansho aan cudurdaar lahayn.** Dugsi sare oo kastaaba isagaa samaysan kara nidaamkiisa, isagoo la shaqaynaya Golaha Rugta Dugsiga iyo wakiilada ardayda. Waa in qoysaska lagu ogeysiiyaa telefan ama qoraal kadib maqanaanshaha kowaad ee arday soo daahay, iyadoo loogu darayo digniin sida nidaamka dugsigu dhigayo.
2. Ardayga loo qoray in ka badan sadex (dugsiga dhexe iyo kan sare) ama afar (waa dugsiga hoose e), ama in ka badan 12 maalmood oo cudur daar la'aan ah sannadkii wuxu helayaa derejada «NC (no credit – kayd la'aan) haduu ardaygu sidiisa kale imtixaankii ugu aflaxay. Haddii ardaygu derejadii laga rabey keeni waayo, kaasi ama taasi waxa la siinayaa «F» ama «1» (waa dhacay).
3. Haddii arday keeno «NC» mar ama in kabadan oo teeram, laakin uusan cudur daar la'aan ku maaqnaan 12 casho in ka badan sannadkii, sannadka aakhirkiisa waxa «NC»-da loogu rogayaa hadba derejaduu helay.
4. Ardayga waa loogu beddeli karaa «NC»-da derejada erey/lambar fasal, waana heli karaa derejo kaydeed, hadduu ku aflaxo imtixaanka sanada aakhirkeeda ama xilliga kulaylaha.

## Maqnaanshaha Cudurdaarka leh

Ardaydu waa inay warqad keenaan maalinta ay maqnaadaanba. Warqadda waa in lagu qoraa taariikhda iyo sababta uu la maqnaa, lambarka telefoonka waalidka ama ilaaliyaha lagala xidhiidhi karo, iyo saxeexa waalidka ama ilaaliyaha.

Ardayda fursad waa loo siinaya inay dib u gutaan shaqadii ay ka maqnaayeen hadday cudur daar haysteen. Cudur daarrada waxa ka mid ah:

- xanuun ama dhaawac uu ardaygu dugsiga la imaan kari waayey. Xanuunka ama dhaawaca waa inuu soo qeexay dhakhtar, kaaliso ama waalid;
- geeri reerka toos ugu timid (wwlid, walaal, awow/ayeeyo, abti/adeer, eedo/habaryar. Ilmaadeer) ama dhibaato kale ee khaas ahaan ama reer ahaan ugu timid;
- tegid maxkamadeed;
- baadhitaan maskaxeed maalin dugsi. Waa in waalidku cadayn keenaan (sida warqad cusbatalku soo qoray) oo tusaya inaan baadhista la samayn Karin marka dugsiga laga baxo;
- fasayada diineed;
- booqashada dugsiyada waxbarashada gaarka ah ee marar ay tagaan ardayda naafada ah;
- sababo kale Golaga Rugta Dugsigu ansixiyeen.

## Waa maxay Maqnaanshaha Cudur Daar La'aantu?

Waalidka qaar waxay moodaan in maqnaansho la aqbalayo hadii waalidku warqad soo dhiibo. Taasi run maaha. Halkan waxa ku yaal maqnaaanshaha cudurdaar la' qaarkood —xataa hadii waalidku warqad soo qoro:

- maqnaanshaha joogto loo caadaysto iyadaan xanuun ama dhaawac jirin. Mararkaas oo kale, si maqnaanta loo aqbalo, waa in waalidku warqad ka keenaa dhakhtar cadaynaysa inuu xanuun ama dhaawac awgiis la iman kari waayey dugsiga;
- ardayga oo loo baahday in ilmo ilaaliyo;
- u goynta fasalka;
- fasax reerku meel isu raacay;
- safar dalkii hooyoloogu kacay;
- fasax diineed oo maalintii ama maalmihii kalendarka dugsu dhigay laga kororsaday.

Golaha Rugta Dugsiga, kadib marka kulan caam ah la qabto, waa kordhin karaan maqnaanshaha cudurdaar la'aanta. Ka fiiri Sharci-Dugsiyeedka wixi tafaasiil ah. Markay suurtgal noqotaba, waalidku waa inay la xiriiraan maamulka intayan ogolaan in ilmuhu ka maqnaado dugsiga hadayan hubin in maqnaanshahaas la aqbali karo.

Ardaydu iyagaa ka mas'uul ah inay soo bedaan shaqadii ka baaqatay markay maqnaadaan. Hase ahaatee dugsiga lagama rabo inay arday ku caawiyaan inay soo bedaan imtixaanadii iyo hawlihii ka baaqday haday maqnaadaan sabab la'aan.

Ardayda lix goor ama in kabadan maqnaada sabab la'aan, waxa macalin ama maamulhu/madaxa dugsigu u dirayaa Kooxda Taageerka Ardayga ee dugsiga (Student Support Team –SST). Kooxda SST waxay fiirinayaan kiiska ardayga waxayna la shaqaynayaan qoyska si loogu dejiyo qorshe ardaygu itaatinkkisa dugsiga ku hagaajiyo.

## Kormeerayaasha Kaxaadirka Dugsiyada

Iyagoo la xiriiraya shaqaalaha dugsiyada, kormeerayaasha DDB ee tegitaanka dugsiyada waxay baadhaan mushkiladaha maqnaanshaha siiba kuwa baxsan dugsiga gudihiisa. Waxay la shaqeeyaan bulshada, guriyahay booqdaan, waxayna la taliyaan ardayda iyo reerahooda. Markay ka fursan weydo, kormeerayaasha maqnaanshuhu way qoraan oo u soo gudbiyaan Maxkamadaha Caruurta kiisaka aan rajada laga waayo.

- Kormeerayaasha Tegidda Dugsiga 617-635-8035

# Taageerka Ardayda u Baahan Caawimaad Dheeraad ah Si Loo Gudbiyo

Sebtembar aakhirkeeda waa in dugsi kastaa u soo gudbiyaa waalidka magacyada shaqaalaha dugsiga iyo telefankooda, macallinka ardayga ka sokow, si ay ula socdaan horumarka ilmahooda.

Bashtanka xilli sixitaanka kasta, waa in dugsigu u diraa «ogeysiino digniineed» waalidka ardayda halis u ah inay dhacaan. Kaltanka xilliga sixitaanku wuxu ku jiraa gudaha jeldiga dambe ee Hagahan.

Ilaa Oktoobar badhtankeeda, waa in macallimiintu soo ogaadaan ardayda khatarta ugu jirta inaanay ka soo bixi karin derejada tacliimeed ee fasalkay ku jiraan; waana inay waalidka ugu gudbiyaan qoraal dhibaatadaas. Dugsiga markaas waxa u bannaan dhawr arrimood si ay ardaygaas ugu caawiyaan siduu u aflixi lahaa, sida:

- umeerin dugsiga kadib;
- bedelaada kaltank xisadaha ama macalinka; ama
- u dirid adeegyada taageerka beesha ku slaysan.

Marka Janaayo la soo gaadho, waa in dugsiyadu u diraan digniino qoraal ah waalidka ardayda halis u ah in dib loo celiyo. Min Febraayo ilaa Juun, waa in dugsiyadu xuriir qoraal ah la haystaan waalidka siday ula socodsiiyaan hrukaca ilmahooda. Nuqulada waraaqahaas waa in diiwaanka lagu hayaa.



## Qorsheyaalka Aflaxaada Arday Kasta (ISSP)

Dugsiyada degmo kasta ee Massachusetts waa inay arday kasta u abuuraan qorshaha «ISSP» ee keena Heerka 1 ama 2 imtixaanka MCAS ee fananka Ingiriisiga (ELA) iyo/ama xisaabta. Qorshaha ISSP waxay sharxaysaa sida dugsigu ugu caawinayo ardayga sare u qaadka kartidiisa/kartideeda tacliimeed.

Dugsiyada waxay ku fuliyaan ISSPs si meerto ku salaysan markay helaan tirooyinkii la keenay MCAS iyo warar kale. Dugsigu waa inuu u diraa waalidka nuqul qorshaha ISSP.

Waa in ISSP si toos ah u waajahdaa baahiyaha waxbarasho ee ka soo baxay imtixaanka MCAS iyo qiyaasaha kale ee dugsiga iyo degmada. Halahaas waxbarasho waxay noqonayaan qayb ka mid shada koorsada ardayga ee caadiga ah maalin dugsiyeedka. Hawlahaas waxa ku jira in rdayga la bedelo kaltanka, xisadaha, ama taageerooyinka la siiyo; waxana ku jiri kara barnaamijyada dugsi kadib ama kulaylaha.

Laxiriir maamulka dugsiga hadii:

- aad su'aalo ka qabto qorshaha ISSP ee ilmahaaga;
- aadan helin nuqulka ISSP; ama
- hadaan ilmahaaga loo fidin adeegyada ku sharaxan qorshaha ISSP.

## Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha

Ardayda fasalada 3, 6, 7, 8, iyo 9 waa inay tagaan Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha haday shuruudahan buuxin waayaan:

1. ku aflaxaada fananka af Ingiriisiga (ELA)/ (ESL)-la ama xisaabta; oy ku aflaxaan
2. mid akhris iyo mid xisaab ah imtixaanada laga rabo ee fasalkooda (fiiri bogaga 18–23).

Ardayda fasalada 11 iyo 12 waa inay tagaan Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha haday ku aflaxaan koorsooyinkii laga rabey laakin ayan ku aflixin imtixaanka MCAS fasalka 10 ee «ELA» iyo/ama xisaabta.

## Dibufiirinta Kulaylaha ee Dugsiga Sare

Dibufiirinta Kulaylaha ee Dugsiga Sare waxa loogu tala galay fasalada dugsiga sare iyo fasalada 7 iyo 8 ee dugsiyada imtixaanka ee ku dhacay ha lama laba koorso aakhrikiina keenay heerka F+ (50%-59%). Koorsooyinka waaweyn oo dhan waa la bixiyaa. Waxay ardayda siisaa fursad uu ku aflixi lahaa koorsada oo u kasban lahaa dhibco uu ku helo gudbin iyo qalinjebin. Ardayda fasalada 9 iyo 10 waxay qaadan karaan hal koorso. Ardayda fasalada 11 iyo 12 waxay qaadan karaan laba koorso.

Ardaydu ma geli karaan barnaamijka Dibufiirinta Kulaylaha ee Dugsiga Sare haday keeneen heerar ka hooseeya 50% ama maqnaayeen in ka badan 30 casho.

Ardaydu waxay kalee fursad u haystaan **Dibuhanashada Kaydka** (Credit Recovery), taasoo ah waxbarasho ku dhisan Internetka oo ardaydu koorsooyin ku qaadan karaan ay ku dhaceen. Wixi xog dheeraad ah kala xiriir taliyaha dugsiga.

## Dib ugunoqoshada Fasal

Nidaamka Gudbintu wuxu dhigayaa inaan ardaydu dugsiga hoose (fasalada 1-5) ku jiri Karin in ka badanlix sano ama dugsiga dhexe (fasalada 6-8) in ka badan afar sano. Hase ahaatee, ardaygu fasal waa ku noqon karaa in mar ka badan, markay isla fiiriyaan maamulaha, macalinka, iyo shaqaalaha taageerka, hadii ardaygu:

1. haduu tegi waayo Barnaamijka Kalaguurka Kulaylaha sidi laga rabey; ama AMA
2. ka soo bixi waayo shuruudihii korska oo dhan.

Maamulaha/madaxa dugsigaya amarka ugu dambeeya bixin kara xagga go'aanada gudbinta ama dib ucelinta.

# Qiimaynta:

## Cabirka Hanashada Ardayga

Sanadka oo dhan macalimiintu ardayda way imtixaanaan, oo qiyaasaan waxay barteen iyo waxay kari karaan. Qiyaasida waxa ku jira tijaabooyinka qalinka-iyo warqada, warbixinaha oraahda iyo qoraalka, hawlqaabadyo iyo mashaariic.

Macalimiinta iyo shirkadaha daabaca buugagta dugsiyada lagu dhigto ayaa sameeyaa qiyaasaha lagu sameeyo ardayda. Tijaabooyin kale, sida qiyaasaha Dugsiyada Dadweynaha Boston (DDB) ee koorsada dhexdeeda ama koorsada dhamaadkeeda ha ahaato Nigiriisi, xisaab, taariikh, iyo saynis, waxa sameeya macalimiinta DDB si loogu isticmaalo DDB oo dhan. Imtixaanada MCAS, ee lagu sharxay boga soo socda, waxa lagu qaataa dugsiyada dadweynaha dhan ee gobolka. DDB waxay kale sameeyaan tijaabooyin kala duwanee akhris iyo xisaab ee lagu qaato dugsiyada degmooyinka dhaan ee Maraykanka.

- Imtixaanada lagu qaato fasal kasta, ka eeg boga 19 (xanaano-fasalka 5), boga 21 (fasalada 6-8) iyo boga 23 (dugsiga sare).
- Wixi warar dheeraad ah ee kartida ilmahaaga, weydii macalinka, maamulaha, ama mada dugsiga.
- Wixi su'aalo guud ee qiimaynta, kala xiriir Xafiiska Qiimaynta, Qiyaasida & Cilmibaarista, 617-635-9450.

### MCAS

Arday kasta ee dhigta dugsiyada dadweynaha Massachusetts waa inuu qataa imtixaanada MCAS (Habka Qiyaasida Buuxda ee Massachusetts). MCAS waxa lagu qaataa fasalada 3-10. Maadooyinka laysku imtixaamo waxay ku xiran yihiin heerka fasalka. Waxa ku jira fananka af Ingiriisiga (ELA), fahamka akhriska, xisaabta, saynis, iyo teknolojiga/injineernimada, iyo taariikh/sayniska dhaqanka (waa la hakiyey 2010). Imtixaanada MCAS waxay tijaabiyaan heerka ardayda iyo dugsiyadu uga soo baxaan cabirrada waxbarasho ee gobolku dejiyey.

Imtixaanada MCAS waa iskujir su'aalaha kala doorashada badan (ee ardaygu hal ka doorto jawaabo badan) iyo su'aalo gaaban iyo madax furan (ee ardaygu jawaab u qoro ama ku muujiyo). Ardayda fasalada 4, 7, iyo 10 waxay kale qoraan sheeko hal'abuur ee ka mid ah tijaabada fanaka af Ingiriisiga.

Sidaad u aragto su'aalihii imtixaanada MCAS ee 1998–2009, tag «website»-ka: www.doe.mass.edu/mcas/testitems.html.

### Sidee loo Isticmaalaa Natiijooyinka MCAS?

Macalimiinta, waalidka, iyo ardaydu waxay u isticmaalaan natiijooyinka MCAS si ay:

- ula socdaan horukaca ardayga: MCAS waa kamid dhawr imtixaan oo Dugsiyada Dadweynaha Boston ku isticmaalaan go'aaminta gudbinta;
- u ogaadaan xoogga, jilayca, iyo gol daloolada ku jirta manhajka iyo waxbarida;
- u ururiyaan wararka lagu isticmaali karohagaajinta kartida ardayga; iyo
- ogaanshaha ardayda u baahan taageer tacliimeed dheeraad ah.

Waaxda Waxbarashada Mass. ee Waxbarashada Hoose iyo Dhexe (ESE) waxay ku isticmaalaan natiijooyinka MCAS iyo warar kale ogaanshaha in dugsiyada iyo degmooyinku ay ka soo baxeen cabirrada lagu hagaajinayo kartida tacliinta ardayga. Intaas waxa raacda, sida uu dhigayo sharciga Ilmana dib lagagama tegayo (No Child Left Behind - NCLB), Waaxda Waxbarashada Mass. (ESE) Waxay ka war bixisaa Horukaca Haboon Sanadkiiba (Adequate Yearly Progress – AYP) ee dugsiyada iyo demooyinka eek u salaysan natiijooyinka MCAS. Ka fiiri warar dheeraad ah boga 54.

---

### Qimaynuhu Ujeedooyin Badan Bay Ka Jawaabaan

**Heerarka kaararka warbixnta.** Tirooyinka imtixaanada la kasbado waa qayb ka mid heerka kaararka warbixinta ee maado kasta.

**Qiimaynaha ugu hooseeya (Benchmarks).** DDB waxay isticmaalaan natiijooyinka qiyaasaha qaarkood siday u go'aamiyaan derejada tacliinta ardayga. Marka ardaydu kasban waayaan heerka «benchmark» (waa tirade ugu hoosaysa aflaxaada) ee imtixaanada, waxa la siin karaa taageer dheeraad ah, waxay geli karaan dugsi kulayle, ama waxay ku noqon karaan koorso ama fasal. *Matalan:* DIBELS, DRA; SRI; Imtixaanada Baadhista Koorso Dhamaadkeed [Investigations End-of-Course tests] (fiiri bogaga 18-23.)

**Qiimaynta Xogsiinta (Formative Assessments)** waa hawlo ama tijaabooyin joogto ah, aan rasmi ahayn ee ka «xogsiinaya» macalinka waxa arday kastaa yaqaan iyo wuxu u baahan inuu barto. Macalimiintu waxay u isticmaalaan inay wax ka bedelaan waxbaridooda iyo sida isbedelkaas u saameeyo waxbarashada ardayga. *Matalan:* shirarka arday-macali; DRA.

**Qiimaynta Iskudhan (Summative Assessments)** waxay jimiyaan «wadarta» waxbarashada ardayda, inta badan sanad dugsiyeedka badhtankiisa ama aakhirkiisa. Waxay ku caawiyaan macalinka ama dugsiga meelaha xoogsan aama wiiqsan ee manhajkooda ama waxbaridooda (sida marka ardayda badankoodu jawaab khalad ah ka baxshaan su'aal gaar ah). *Matalan:* MCAS; qiyaasta xisaabta dhamaadka koorsada DDB.

**Natiijooyinka imtixaanku** waxay tusaan ardayda u qalma barnaamijyada iyo dugsiyada gaarka ah. *Matalan:* Imtixaanka gelitaanka Shaqada Horukacsan (Advanced Work Class –AWC); ISEE ee gelitaanka dugsiyada imtixaanka.

***Isha laga keensaday:*** Boston Plan for Excellence, FOCUS Newsletter for Boston Teachers, Spring 2004; iyo Dugsiyada Dadweynaha Boston.

## Shuruudaha Qalinjebinta ee MCAS

Si looga qalin jebiyo dugsida sare, waa inay arday ardaydu hantaan Aqoonsiga Kariyeed (Competency Determination - CD)) xaga Fananka Af Ingiriisga (ELA), Xisaabta ito Sayniska iyo Teknolojiga/Injineernimada (STE) (laga bilaabo aradayda fasalka 2010 ka qalin jebinaya) isla markaasna ka soo baxaya shuruudaha koorsooyinka laga rabo iyo kaxaadirka dugsiga. Si loo hanto Dibloomka "CD" ee ELA-ga iyo Xisaabta, waa in ardaygu gaadhaan Heerka Kartiyeed amd Heerka Ka Sareeya ( Profiecient or Advanced)). Ardayda hela eerka kartiyeed ee Ubaahan Siihagaajin xaga ELA ama/iyo xisaabta waa inay kalee buuxiyaan shuruuda Qorshaha Kartida Waxbarasho (EPP), taas oo ah qorshe shaqsiyeed ee kahortaga ay ku jirto qayb qiimayneed. (Fadlan weydii madaxa dugsiga ilmahaaga wixi xog dheeraad ah xaga EEP). Si loo hanto "CD" ee "STE"-da waa in ardaygu ku aflaxaa miduun imtixaanada MCAS ee sayniska.

Ardayda marka ugu horaysa ku aflixi waaya imtixaanka MCAS-ka dugsi sare waxay dib u qaadan karaan markay dugsiga sare ka baxaan. Hadiise, sida kale, ardaygu ugu yaraan imtixaanka qaato sadex goor ama ka qayb galay laba goor Qiimaynta MCAS ee Kaduwan, oo weli ku aflixi waayo ELA ama/iyo xisaabta, wuxu ardaygu u qalmi karaa codsiga Racfaanka Kartida (MCAS Performance Appeal). Si loogu qalmo dacwada Racfaanka Kartida MCAS ee maadooyinka "STE", waa In ardaygu qaatay Imtixaanka sayniska MCAS ee dugsi sareugu yaraan ugu yaran hal mar (ama dhameeyey Qiimaynta MCAS-ta Kaduwan laba goor) waana inuu hada dhigtaa fasalka STE ama dhameeyey fasalka 12-aad. Xaga hasraxaada hanaanka iyo u qalmida shuruudaha, booqo website-ka DDB. Kala xiriir madaxa dugsiga sidaad u heshid in ilmahaagu u qalmo arrinta racfaanka Waaxda Waxbarashada Massachusetts ee Dugsiyada Hoose iyo Sare.

### Wixi Warar Dheeraad ah ee MCAS ka raadi:

- Waaxda Waxbarashada Mass. ee Dugsiyada Hoose iyo Sare: www.doe.mass.edu/mcas/
- MCAS Khadka Diiran ee Xogta Waalidka: 1-866-MCAS220
- Website-ka Dugsiyada Dadweynaha Boston

## Baabi'inta Faraqa Hanashada (Eliminating the Achievement Gap)



Waa xaqiiqo ka jirta Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo degmooyinka dugsiyada magaalooyinka ee Maraykan oo dhan, inuu jiro faraq u dhexeeya xagga cabirada aflaxaada ardayda, sida tirooyinka imtixaanka la keeno iyo cabirrada qalinjebinta u dhexaysa kooxaha ardayda oo ku xiran jinsiyadda, dhlashada, ama naafonimada. Farqiyadahaas waxa la dhahaa **Faraqa Hanashada** ama «Achievement Gap».

Dugsiyada Dadwynaha Boston waxay si xoogan heegan ugu yihiin joogtaynta filashooyinka sare ee arday ksta ee ku jira dusgi kasta ama fasal kasta. **Nidaamkayaga Faraqa Hanashadu** wuxu dhigayaa in dhamaan nidaamyada iyo camalfalida DDB ay muraayad u noqdaan himilda baabi'inta faraqa hanashada iyo xqiijinta aflaxaada cilmiyeed e ardayda idil. Waxa la filayaa in shaqaalaha idil ee Dugsiyada Dadweynaha Boston ay heegan u noqdaan himiladaas kana hawl galaan sida ardayda, qoysaska, qaybaha shaqsiyadeed, kooxaha diimeed, hay'adaha beelaha la xiriira, iyo machadyada sare ee tacliinta ay dhamaan u wada shaqeeyaan si loo soo afjaro faraqa hanashada.

Sidaad u akhrido dhamaan Nidaamka Faraqa Hanashada , tag webtite-ka DDB ama wac sidaad nuqul u hesho 617-635-9014.

### MCAS: Su´aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo

**Ardayda oo dhan ma inay qaataan baa imtixaanka MCAS?**

Haa, ardayda idil eek u jira dugsiyada dadweynaha Mass waa in la imtixaano. Waxa kuwan ku jira dugsiyada tijaabada (pilot) iyo kuwa madaxbanaan (charter). Mida kale, ardayda waxbarashada gaarka ah e ku jira dugsiyada la leeyahay ee DDB kharshka ka bixiso waa in la imtixaano.

**Sidee u heli karaa tirooyinka ilmahaygu helay imtixaanada MCAS?**

Waalidku waxay ka helayaan warbixinta MCAS ee ilmahooda boosta ama toos dugsiga. Natiijooyinkii gu´gii 2007 waxa in la soo diraa Dayrta 2007.

**Maxaa jira hadii ilmahaygu dhigto waxbarashada gaarka ah?**

Ardayda waxbarashada gaarka oo dhan waa laga rabaa imtixaanada, laakiin taxanaha waa la bedeli karaa si ilmahaaga baahidiisa loo tixgeliyo. Siyaabaha looga qaadayo imtixaanada waa inay si cad ugu yaaliin barnaamijka «IEP» ama Qorshaha Qaybta 504.

**Maxaa jira hadii ilmahaygu yahay Barte afka Ingiriisiga (ELL)?**

Ardayda idil waa laga rabaa inay qaataan imtixaanada MCAS e xisaabta iyo sayniska iyo teknloloji/handasada. Laakin, ardayda sanadka ugu horeeya ku jira dugsiyada Maraykanka, ka qaybgalka imtixaanka MCAS ee Fananka Af Ingiriisiga ( ELA) iyo Taariikhda/Duruusta Dhaqanka waa ikhtiyaari. (Taariikhda/duruusta Dhaqanka lama bixinayo 2010).

Waxa intaas raacda, ardayda ELL ee fasalada K2-12 waa in laga qaadaa Qiimaynta Kartida Ingiriisiga ee Mass – Akhriga/Qoridda (MEPA R/W) iyo Qiimaynta Afka Ingiriisiga ee Mass.–Kuhaadalka (MELA-O). Imtixaanka MEPA wuxu qiyaasaa kartida ardayga ee akhriga iyo qorida Ingiriisiga. Tijaabada MELA-O waxay qiyaastaa kartida ardayga ee ku hadalka iyo fahamka Ingiriisiga.



# Shuruudaha Gudbinta Oo Kooban ★ Dugsiga Hoose (Fasalaada 1-5)

**Si looga gudbiyo fasalka 5, waa in ardaygu...**

- ku guulaystaa Afka Ingiriisiga/ESL-ka sannad walba
- uu guulaystaa xisaabta sannad walba
- uu dhigtaa sayniska iyo taariikhda sannad walba
- ku guulaystaa 3 fasal 4 ka mid ah Saynis+ Taariikh ee fasallada 4-5
- dhamaystiraa 90 saacadood ee waxbarashada Fanka la xiriirta sannad walba (isku celcelin 30 daqiiqo maalin walba)

★ Golayada Rugta Dugsigu way codayn karaan shuruudo koorso iyo tijaabo ka sareeya inta bogan ku qoran.

## Qiimaynaha Ardaydu ku qaataan Dugsiga Hoose

| | | |
|---|---|---|
| DDB Qiimaynta Dhexaadka Koorsada iyo Dhamaadka Koorsada Xisaabta | K-5 | Garashada sare ee cabirrada xisaabta ardaydu dhigteen |
| Qiimaynta Unugga Dhamaadka Baadhitaanka Xisaabeed | 2-5 | Imtixaano DDB xaga garashada sare ee aqoonta laysbaray 4-6 wiigyadii tegey |
| PALS<br>Tijaabada Cabirka erayada<br>DIBELS<br>TRC<br>GRADE<br>Qiimaynta Akhriga Flynt-Cooter<br>Qiimaynta Horumarinta Akhriga (DRA)<br>Baaxadda Akhriga Dugsiyeed (SRI) | K0-K1<br>K0-K2<br>K2-3<br>1-3<br>1-5<br>3<br>3<br>4-5 | Fahamka akhriga, kuhadalka fiican, akhriga odhaahda, iyo fahamka dhegeysiga<br>Awooda qorida |
| MCAS | 3<br><br>4<br><br>5 | Fahamka akhriga Fananka af Ingiriisiga (ELA), xisaabta.<br><br>Fahamka akhriga ELA; Qorida halabuurka ELA; xisaabta<br><br>Fahamka akhriga fananka af Ingiriisiga (ELA); xisaab; saynis & teknoloji/ injineernimo; taariikh/saynis dhaqameed *(ala hakiyey2010).*. |
| Qiimaynta Afka Ingiriisiga Mass-Kuhadalka (MELA-O) | K-5 | Xirfadaha afka Ingiriisiga kuhadal iyo dhegeysi ee barteyaalka af Ingiriisiga. |
| Qiimaynta Kartida Ingiriisiga Mass. (Mass. English Prof. Assessmen R/W; MEPA/R/W) | K2-5 | Xirfadaha afka Ingiriisiga akhriga iyo qorida ee barteyaalka af Ingiriisiga. |
| Qiimaynta Umadda ee Horukaca Waxbarashada (National Assessment Educational Progress – NAEP), heer ummadeed | 4 | Taariikhda Maraykan, Macluumaadka iyo Juqraafi, oo laga bixinayey dugsiyo kooban oo xulashi ah. |
| Imtixaanada cabbiran ee akhriga iyo xisaabta Ingiriisi lagu siiyo ardayda idil iyo Isbanishke ee ardayda «ELL»-ka | 3-5 | Xirfadaha eraybixinta/ aqoonta erayada iyo fahamka akhriga; awooda ku isticmaalka xirfadaha saldhiga xisaabta mushkilado adag. Kumeelaynta Imtixaanka Fasalka Shaqo Horukacsan (AWC); ka fiiri boga 27 wixi warar dheeraad ah. |

### Shuruudaha Shaqaguriga

Shaqa-gurigu wuxu kaabaa duruusta lagu qaato fasalka wuxuna dhiiri geliyaa xakamaynta nafta iyo xilkasnimada shaqsiyeed. Waana arrin muhim u ah sare u qaadka iskaashiga guriga iyo dugsiga.

**CARUURTA XANNAANADA:** Waxa macallimiintu siin kartaa gabayo yaryar, heeso caruureed, ama waxyaabo kale oo guriga lagu baran karo fasalkana lagu weydiin doono.

Waqtiga lagu talinayo:
30-60 daqiiqo maalintii

**DUGSIGA HOOSE 1-3:** Shaqa-guriyeedku waa inuu u dhigmaa awoodda iyo horukaca ilmuhu ku sameeyey maaddada ugu weyn maalin-dugsiyeedkaas, sida akhriska IYO xisaabta. Arrinta dhextaalka ahi waa barashada gurigu saray u qaadaysaa iskaashiga hoyga iyo dugsiga waxayna xoojinaysaa farsamooyin gaar ah.

Waqtiga lagu talinayo:
30-60 daqiiqo maalintii

**DUGSIGA HOOSE 4-5:** Shaqa-dugsiyeedku waa inuu xoogga saaraa maaddooyinka waaweyn waana inuu kala duwanaadaan. Matalan, waxa lagu dari karaa hawlo qoraal iyo afkaba ah, deris qaadasho, wax akhriska madadaalada ah, hawl qoraal ah, iyo diyaarinta warbixinnada.

Waqtiga lagu talinayo:
30-60 daqiiqo maalintii

**FIIRI:** Nidaamka Shaqagurigu iminka dibufiirin baa lagu hayaa. Wixi isbedlo ah xaga nidaamka waxa lagu baahin doonaa Website-ka degmada waxana laga helayaa dugsiyada.

# Shuruudaha Gudbinta Dugsiyada Hoose: Xanaanada–Fasalka 5

| | | |
|---|---|---|
| **K0–K2** | Ardayda xanaanada ku jirta lagama rabo shuruudo gudbineed. | |
| **Fasalka 1** | Si loogu gudbiyo fasalka 2, ardaydu waa inay ka soo baxaan labadan shardi:<br>1. Waa inay ku aflaxaan Fananka Ingiriisiga (ELA) ama ESL-ka; Ingiriisig<br>2. Waa inay ku aflaxaan xisaabta.<br><br>Fasalka 1-aad lagama rabo shuruudaha imtixaanada qarriran. | |
| **Fasalka 2** | Si ay ugu gudbaan fasalka 3 (Barnaamijka laba-luqadle ahayn) ardaydu waa inay ku aflaxaan shuruudahan oo idil:<br>1. Waa inay ku aflaxaan Fananka Ingiriisiga (ELA) ama ESL-ka<br>2. Waa inay ku aflaxaan xisaabta.<br>3. Ku aflaxaan imtixaanada soo socda mid ahaan akhris ah iyo mid ahaan xisaab:<br>Akhris: DRA, Flint-Cooter<br>Xisaab: Qiimaynta Dhamaadka Baadhitaanka Xubinta; Qiimaynta dhamaadka sanadka; Qiimaynta Dhamaadka Kulaylaha | |
| **Fasalka 3** | Si ay ugu gudbaan fasalka 4, waa in ardaydu fuliyaan labadan shardi:<br>1. Ku aflaxa Fananka af Ingiriisiga (ELA) ama Ingiriisiga ESL-ka. Si ay ugu aflaxaan ELA/ESL, waa in ardaydu ku aflaxaan shaqada koorsada, waana Inay ku aflaxaan mid ahaan tijaabooyinka akhrtiga ee soo socda:<br>▪ TerraNova<br>▪ Qiimaynta Horumarinta Akhriska (DRA)<br>▪ Qiimaynta Akhriga Flynt-Cooper<br>▪ SRI<br>▪ Qiimaynta degmeda Dhamaadka Barbaarinta<br><br>2. Ku aflxaan Xisaabta. Si ay ugu aflaxaan waa inay ardaydu kasbadaan heerka aflaxaada shaqadii koorsada. Ardaydu qaataan tijaabooyinkan xisaabta ee soo socda:<br>▪ Qiimaynta Xisaabta Dhamaadka Koorsada DDB<br>▪ Qiimaynaha Dhamaadka Unugga Baadhista Xisaabta, iyo Dhamaadka Kulaylaha<br>▪ Qiimaynta degmada dhamaadka barbaarinta | ▶ Ardayda ka bixi waaya ELA/ESL kuna aflixi waaya tijaabo akhris iyo xisaab ah waxa la siinaya "Madhamaysan" waana inay galaan Barnaamijka Kalaguurka Kulaylaha. Haday ku aflixi waayaan labada koorsoba iyo tijaabo akhris ah marka Barnaamijka Kulayluhu dhamaado waxa ku noqonayaan fasalka 3-aad.<br><br>▶ Haday akhriska ku ku aflaxaan, kuna aflaxaan shaqada koorsada xisaabta, laakin ayan ku aflixin Imtixaanka xisaabta dhamaadka Barnaamijka Kalaguurka Kulaylaha, waxa loo gudbinayaa fasalka 4-aad waxana taageero dheeraad ah lagu siinayaa xisaabta. |
| **Fasalka 4** | Si loogu gudbo fasalka 5, waa in ardaydu fuliyaan shuruudahan oo dhan:<br>1. Ku aflaxaan Fananka af Ingiriisiga (ELA) ama Ingiriisiga ESL-ka.<br>2. Ku aflaxaan Xisaabta.<br>3. Ku aflaxan Sayniska ama Taariikhda. | |
| **Fasalka 5** | Si loogu gudbo fasalka 6, ardaydu waa inay fuliyaan shuruudahan oo idil:<br>1. Ku afalaxaan Fananka af Ingiriisiga (ELA) ama Ingiriisiga ESL-ka.<br>2. Ku aflaxaan xisaabta.<br>3. Ku aflaxaan mid ahaan akhriska imtixaanada soo socda:<br>SRI, Flynt Cooter,Terra Nova, qiimaynta degmada dhamaadka barbaarinta<br>4. Ku aflaxaa mid ahaan xisaabta imtixaanada soo socda:<br>Qiimaynaha Dhamaadka Unugga Baadhista Xisaabta, Qiimaynta Dhamaadka Sanadka, Qiimaynta Dhamaadka Kulaylaha, qiimaynta degmada dhamaadka barbaarinta<br>5. (a) Ku aflaxaa saynis iyo taariikh; hadii labadan maado mid keliya uu ku aflaxay fasalka 4; AMA<br>(b) Ku aflaxaa saynis ama taariikh, hadii labadaba uu ku aflaxay fasalkii 4. | |



# Shuruudaha Gudbinta oo Kooban ★ Dugsiga Dhexe (Fasalada 6–8)

**Si loogu gudbiyo dugsiga dhexe, waa in ardaygu...**

- Ku guulaystaa 5 ka mid ah 6 dersi oo kala ah Afka Ingiriisiga/ESL-ka+ Xisaabta
- Ku guulaystaa 10 ka mid ah 12 dersi oo Saynis+ Taariikh+ Xisaab+ Ingiriisi/ESL-ka
- Dhamaystiraa 3 xilli-tacliimeed ee waxbarashada Fanka
- Dhamaystiraa 2 xilli-tacliimeed tababarka Jidh-dhiska
- Dhmaystiraa 2 xilli-tacliimeed tababarka Caafimaadka.

★ Golaha Rugta Dugsigu wuxu go'aamin karaa samaynta shuruudo ka sareeya kuwa bogan ku yaal ee koorsooyinka iyo imtixaanada.

## Shuruudaha Shaqaguriga

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay aaminsan yihiin in waqtiga ardaygu ku dadaalo shaqa-guriyeedka micna lihi, in horukacoodu mid la taaban karo noqonayo. Shaqa-guriyeedku wuxu kaabaa duruusta lagu qaato fasalka wuxuna dhiiri geliyaa xakamaynta nafta iyo xilkasnimada shaqsiyeed. Waana arrin muhim u ah sare u qaadka iskaashiga guriga iyo dugsiga.

Arday kasta ee fasalada 6-8 dusgi dhexe ee DDB waa in shaqa-guri loo diraan maalin kasta ee dugsiyeed. Macalimiinta maaddooyinka waaweyn dhigaa waa inay isla xiriiraan oo isuduwaan hawlaha shaqa-guriyeedka. Maaddooyinka qaar waa in habeenno gaara laga shaqeeyaa, sida hawsha laysu diro habeen kasta isku mid noqoto oo loo helo waqti lagu dhammeeyo. Shaqa-guriyeedka waa inuu noqdaa isir ka mid ah kaararka warbixinnada derejada.

**Waqtiga lagu talinayo:**
2 saac maalintii

FIIRI: Nidaamka Shaqaguriga iminka dibufiirin baa lagu hayaa. Wixi isbedello ah xaga nidaamka waxa lagu fidin doonaa Website-ka degmada waxana laga helayaa dugsiyada.

## Qiimaynta Ardaydu ku Qaadato Dugsiga Dhexe

| Qiyaasida | Fasalada | Maxaa la tijaabiyaa? |
|---|---|---|
| Qiimaynaha koorsooyinka dhexe iyo kuwa dhamaadka ee DDBmoorsada | 6-8 | Ka adkaanta maadooyika dhextaalka ah ee laysku baro dugsiyada dhexee DDB oo dhan waqtiga koorsooyinka dhexe iyo gebi ahaan kuwa la qaato oo idil. |
| Hawsha Qoraalka laysu diro – Sayniska | 6-8 | Awood soo bandhiggafikradahafenedaada ee qorida. |
| Tijabooyinka cabiran ee akhriga xisaabta ee afka Ingiriiisiga | 6 iyo 8 | Xirfadaha Ingiriisiga iyo xisaabta, si loogu ogolaado gelida dugsiyada imtixaanka (boga 27). |
| MCAS | 6 | Fahamka akhriga Fananka Af Ingiriisiga (ELA); xisaab. |
| | 7 | Fahamka akhriga Fananka Af Ingiriisiga (ELA); halabuurka qoraalka ELA; xisaab; taariikh/sayniska dhaqameed. |
| | 8 | Fahamka akhriga ELA; xisaab; Saynis & teknoloji/injineernimo. |
| Qiimayntaa Af Ingiriisiga Mass–Kuhadalka (MELA-O) | 6-8 | Xirfadaha Kuhadalka iyo dhegeysi ee ardayda ELL-ga |
| Qiimaynta Kartida Ingiriisiga Mass. (RW, MEPA-R/W) | 6-8 | Xirfadaha akhrigal iyo qorida ee Xirfadaha akhriga af Ingiriisiga iyo dhegeysiga ee ardayda ELL-ka. |
| Qiimaynta Barbaarinta | 6-8 | Fananka af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta. |
| Qiimaynta Umadda ee Horukaca Waxbarashada (National Assessment Progresss – NAEP) (heer umadeed) | 8 | Taariikhda Maraykan, Macluumaadka, Juqraafiga, iyo qorida(tijaabada warqada iyo laabiska); oo lagu bixiyo dugsio kooban oo xulashi ah |
| Baaxada Akhriga Dugsiyeed (Scholastic Reading Inventroy – SRI) | 6-8 | Fahamka akhriga. |

# Dugsiga Dhexe Shuruudaha Gudbinta: Fasalada 6–8

| | | |
|---|---|---|
| **Fasalka 6** | Si fasalka 7 loogu gudbo, ardaydu waa inay ku aflaxaan sadex koorsooyinka soo socda:<br>1. Ingiriisi: Fananka Af Ingiriisiga (ELA) 6; AWC ELA 6; aama Ingiriisiga ESL 1-5.<br>Si ELA/ESL-ka loogu aflaxo, waa in ardaydu ku aflaxaan ugu yaraan hal ka mid ah tijabooyinkan akhriga ee soo socda:<br>■ Baaxadda Akhriska Tacliimeed (SRI)<br>■ Habka Qiimaynta Flynt-Cooter ee Akhriga<br>■ Qiimaynta degmada ee dhamaadka barbaarinta<br>2. Xisaab: Xisaabta 6 ama AWC Xisaab 6<br>Si xisaabta loogu aflaxao, waa in ardaydu koorsada shaqada fasalka ku aflaxaan iyo ugu yaraan hal ka mid ah tijaabooyinkan xisaabta ee soo socda:<br>■ Qiimaynta Xisaabta Dhamaadka Sanadka<br>■ Qiimaynta Xisaabta Dhamaadka Kulaylaha<br>■ Hawlqabadyada Xisaabta<br>■ Qiimaynta degmada ee dhamaadka barbaarinta<br>3. Saynis: Saniska Midaysan 6; AWC Saynis 6<br>4. Taariikh: Taariikhda/Saynis Dhaqameedka 6 ama AWC Taariikh/ Saynis Dhaqameedka 6 | ▶ Ardaydaan ku aflixi waaya ELA/ESL iyo xisaab iyo ugu yaraan hal tijaabo akhris iyo hal tijaabo xisaab waa Inay galaan Barnaamijka Kalaguurka Kulaylaha<br>▶ Ardaydaan ku aflixin shaqda koorsada ELA/ESL-ka iyo xisaabta oo ku aflaxa ugu yaraan tijaabo akhris iyo tijaabo xisaab, dhamaadka Barnaamijka Kala-wareega Kulalah way ku dhacayaan koorska sanadkaas waana in dib loogu celiyaa. |
| **Fasalka 7** | Si fasalka 8 loogu gudbo, ardaydu waa inay lix koorso kaga aflaxaan fasallada 6 iyo 7:<br>Fananka Ingiriisiga ELA ama ESL-ka; Xisaabta; Saynsika; iyo Taariikhda.<br>Waa inay koorsooyinka ugu yaraan ka mid yihiin:<br>■ Saddex Fananka Ingiriisiga/ESL-ka + koorsooyinka Xisaabta<br>■ Hal koorso Saynis, iyo<br>■ Hal koorso Taariikh ah. | ▶ Ardayda ku aflixi waaya Fananka Af Ingiriisiga/ESL-ka xisaabta labadaba waa inay galaan Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha.<br>▶ Ardaydu waxay ku kasbanayaan "credit" (Kayd) koorsooyinka oo keliya hadday galaan Barnaamijka Kala-wareega Kulaylaha ah oo ay markaas ku aflaxaan shaqada koorsda. Ardayda geli waayaa way ku saaqaidayaan koorsada ama koorsooyinka. |
| **Fasalka 8** | Si dugsiga sare loogu gudbo fasalka 9, waa in ardaydu ku guulaystaan toban koorso ee maadooyinka soo socda fasalladii 6, 7 iyo 8. Fananka Ingiriisiga ama ESL-ka; Xisaabta; Saynsika; iyo Taariikhda.<br>Koorsooyinka waa inay ugu yaraan ku jiraan:<br>■ Shan koorso Fananka Ingiriisiga/ESL-ka iyo Xisaab<br>■ Laba koorso oo Saynis ah<br>■ Laba koorso ee Taariikh ah | ▶ Ardaydaan ku aflixin (ELA)/ ESL-ka iyo xisaabta waa inay galaan Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha.<br>▶ Ardaydu waxay koorsooyinka kayd (credit) ku helayaan oo keliya hadii ay galaan Barnaamijka Kala-wareega Kulaylaha oy ku aflaxaan shaqada koorska. Ardayda geli waaya waa ku dhacaayaan koorska (koorsooyinka).<br>▶ Ardayda fulin waaya shuruudaha koorska fasalka 8-aad dhamaadka Barnaamija Kala-wareega Kulayluhu, waa la celinayaaa. Ardayda kahor la reebay mar labaad waa la reebi karaa oo keliya kadib marka arrintaas ay dabagal ku sameeyaan maamulaha dugsiga, macallimiinta, shaqaalaha kale ee gacanyaraha u ah, iyo waalidka. |



## Shuruudaha Gudbinta iyo Qalinjebinta Dugsiga Sare★

Xaga nidaamka gudbinta iyo qalinjebinta dugsiga sare ee DDB ee la ansixiyey 2004, ardaydu waxay raacaan "wadada maab shqsi ahaaneed" (personal road maap) xaga qalinjebinta oy ay Iyago horumarin ku sameeyaan Iyadoo ay caawinayaanlataliyeyaal, macalimiin, kuway lagu daydo (mentors), iyo xubnaha qoyskooda.

Dugsiyada sare ee DDB waxay raacaan sadex hilin (pathways) mid ahaan oo u diyaarinaya ardayda idil jaamicad, barashooyinka kale ee dugsi sare kadib, iyo shaqooyin anfaca. Hilimadan oo idil waxay ardayda u oggolaanayaan inay qaataan koorsooyin ka madax banaan heerka fasalka ay ku jiraan. Metelan, hal arday wuxu qaadan karaa Taariikhda Maraykan 1 ee fasalka 10, iyadoo arday kalena uu ku qaato sanadka fasalka 11. Ardayda qaar baa u baahan mudo afar sano ka badan siday u dhamays tiraan shuruudaha qalinjebinta oo idil.

Marka dugsi sare la dooranayo, ardayda iyo qoysasku waa inay xaqiijiyaan inay wax ka ogaadaan hilinka dugsigu taabacay xagga qaadasha dibloomka dugsiga sare ee DDB.

★ Iyadoo laga hogaaminayo Xafiiska Taageerka Dugsiga Sare, Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay dibufiirin ku wadaan shuruudaha gudbinta ardayda dugsiga sare ee DDB wuxuna talooyinbixin siin doonaa agaasimaha guud iyo gudiga dugsiyada sanadka 2010–2011.

### Shuruudaha Shaqaguriga

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay aaminsan yihiin in waqtiga ardaygu ku dadaalo shaqa-guriyeedka micna lihi, in horukacoodu mid la taaban karo noqonayo. Shaqa-guriyeedku wuxu kaabaa duruusta lagu qaato fasalka wuxuna dhiiri geliyaa xakamaynta nafta iyo xilkasnimada shaqsiyeed. Waana arrin muhim u ah sare u qaadka iskaashiga guriga iyo dugsiga.

Shaqa-gurigu waxay keentaa carbin waxayna xoojisaa barashada duruusta maalintaas, u diyaar galka duruusta maalinta soo socota, iyo/ama hawlaha qota dheeraynaya fahanka ardayga. Dugsigu waa inuu lahadaa qorshe shaqa-guriyeed oo ku xiran manhajka dugsiga.

Macallimiintu waa inay iskaashadaan si aan ardayda. hawsha looga badin habeenna. Matalan, Waxa laga yaabaa in dugsi habeen kasta ugu tala galo akhris iyo qoraal; xisaab iyo taariikh Isniinta, Arbacada iyo Jimcaha; duruusta bulshada iyo afafka qalaadna Talaadada iyo Khamiista. Shaqa-guriyeedku qayb buu kamid yahay kaararka warbixinnada derejada.

**Waqtiga lagu talinayo:**
2½ saacadood maalintii

**FIIRI:** Nidaamka Shaqagurigu iminka dibufiirin baa lagu hayaa. Wixi isbedlo ah xaga nidaamka waxa lagu fidin doonaa Website-ka degmada waxana laga helayaa dugsiyada

## Qiimaynta Ardaydu ku Qaadato Dugsiga Sare

| Qiimaynta | Fasalada | Maxaa la Tijaabiyaa? |
|---|---|---|
| Hawlaha Xisaabta DDB | Giddi | Awooda isticmaalka xisaabta ee su'aalaha adag. |
| Qiimaynta Koorsooyinka Dhexe iyo Dhamaadka DDB | Giddi | Ka adkaanta waxa laysku baro koorsooyinka dhextaalka ah dugsiyada saree idil ee DDB waqtiga koorsada dhexe iyo gebiahaan koorsada idil. |
| MCAS: Fananka Afka Ingiriisi (ELA) | 10 (iyo imtixaan kucelin ilaa laga aflaxo) | Fahamka akhriga, halabuurka qoraalka, iyo fahamka afka iyo suugaanta. Ardaydu waa inay keenaan heerka Kartida/ Heerka Sare ama ay helaan tirada Ubaahan Siihagaajin oo fuliyaan derejada "EPP" siday u qalin jebiyaan. |
| MCAS: Xisaab | 10 (iyo imtixaan ku celin ilaa laga aflaxo) | Garashada tirada, tirooyinka Isku xiran, aljebra, joomateri, istaatistika, iyo hilaada . Ardaydu waa inay keenaan heerka Kartida/Heerka Sare ama ay helaan tirada Ubaahan Siihagaajin oo fuliyaan derejada "EPP" siday u qalin jebiyaan. |
| MCAS: Saynis; Teknoloji/ Enginernimo | 9-11 (ku darkucelin imtixaan ilaa lagau aflaxo) | Ardayda koorsooyinka qaadanay Biyoloji; kimiya, bilawga fisikada, iyo teknoloji/inginiirnimo; Ardaydu waa inay ku aflaxdaan hal imtixaan saynis ah siday u qalin jebiyaan, laga bilaabo Fasalka 2010. |
| MCAS: Taariikh Maraykan | 10-11 | Waa la hakiyey sanadka 2010 |
| Qiimaynta Afka Ingiriisiga Mass-Kuhadalka (MELA-O) | Giddi | Xirfadaha kuhadal iyo dhegeysi Ingiriisi; Ardayda Barteyaalka Ingiriisiga (ELL)-ka. |
| Qiimaynta Kartida Ingiriisiga Mass. (MEPA) | Giddi | Xirfadaha qoraalka iyo akhriska Ingiriisga; ee ardyda ELL-ka. |
| Qiimaynta Tijaabada Hibada Dugsiyeed (SAT) ACT™ | 11-12 | Waa in kuliyado badan la codsadaa. Imtixaanada Ingiriisi, akhris, xisaab, iyo saynis. Tijaabooyin kale oo akhris, iyo maadooyin kale. |
| Tijaabada Bilawga SAT (PSAT) | 10-11 | U diyaargalka imtixaanada SATs; Tirooyinka loo u magacaabida «National Merit Scholars». |
| Baaxada Akhriska Tacliinta (SRI) | 9 | Fahamka Akhriga |
| Shaqada laysu diro ee Qorida Caadiga ah | 9-12 | Awooda soo bandhigidda qoraal ahaan fikradda xallilaada |
| Qiimaynta Umadeed ee Horukaca Waxbarasho (NAEP) - heerka goboleed | 12 | Taariikhda Maraykan, Macluumaatka, Juqraafi, iyo Qorida (tijaabo kombiyuutar ku salaysan); oo laga bixiyo dugsiyo kooban oo xulashi ah. |

# Shuruudaha Gudbinta iyo Qalinjebinta Dugsiga Sare ★

| | |
|---|---|
| **Hilinka I** | ■ Qaado oo ku aflax afar kooroso Ingiriisi ah<br>■ Qaado oo ku aflax sadex koorso taariikh ah, ay ku jiraan Taariikh Maraykan 1 & 2<br>■ Qaado oo ku aflax ugu yaraan sadex koorso xisaab ah, ay ku jiraan Aljebra, Jomitari, iyo Aljebra Sare<br>■ Qaado oo ku aflax **sadex kooso shaybaar saynis ah, ay ku jiraan laba kuwa soo socda**: biyoloji, kimiya, fisika<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso afafka aduunka**<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso semistar ee fananka**<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso semistar ee waxbarashada jirdhiska**<br>■ Qaado oo ku aflax **hal koorso semistar caafimaad**<br>■ Qaado oo ku aflax **hal koorso semistar kombiyuutar**<br>■ Qaado oo ku aflax Fasalka 10 MCAS Fananka Af Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta |
| **Hilinka II** | ■ Qaado oo ku aflax **aafar koorso Insaaniyada ah**, oo daboolaya cabirrada jira ee Ingiriisiga iyo Taariikhda Maraykan 1 & 2<br>■ Qaado oo ku aflax sadex koorso xisaab ah, ay ku jiraan Aljebra, Jomitari, iyo Aljebra Sare<br>■ Qaado oo ku aflax **sadex kooso shaybaar saynis ah, ay ku jiraan laba kuwa soo socda**: biyoloji, kimiya, fisika<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso afafka aduunka**<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso semistar ee fananka**<br>■ Qaado oo ku aflax **laba koorso semistar ee waxbarashada jirdhiska**<br>■ Qaado oo ku aflax **hal koorso semistar caafimaad**<br>■ Qaado oo ku aflax **hal koorso semistar kombiyuutar**<br>■ Qaado oo ku aflax Fasalka 10 MCAS Fananka Af Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta |
| **Hilinka III** | Dugsi wuxu horumar ku samayn karaa liiska shuruudaha koorsooyinka laga rabo ee daboolaya cabirrada goboleed ee laga ansixiyey Dugsiyada Dadweynaha Boston. Dugsiyada Hilinka III waxa hada ku jira dugsiyada Imtixaanka, dugsiyada tijaabo (pilot) qaarkood) Dugsiyada Gobolka Horace Mann (charter schools), Dugsiga Sare Madison Park, iyo barnaamijyada Waxbarashada Kaduwan (Alternative Education programs). |

**SANADKA KOWAAD:**

▶ Ardayda aan ku aflaxin ugu yaraan hal imtixaan akhris ahiyo hal imtixaan xisaab ah, laakin dhameeyeyshuruudaha kalee koorsada, waxay sanadkaas helayaan qiimaynta "ma dhamaysan" ee ELA/ESL iyo/ama xisaabta. Tan waxa loo bedeli karaa heer aflaxaad hadii ardaygu ka qayb gelo Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha oo ku aflaxo imtixaanka akhriga iyo xisaabta dhamaadka barnaamijka.

▶ Ardayda aan ku aflaxin imtixaanka akhrigaa iyo xisaabta dhamaadka Barnaamijka Kalawareega Kulaylaha way ku dhacayaan ELA/ESL-ka iyo/ama xisaabta. Waana ku noqon doonaan kuwaas iyo wixi koorsooyin kale ay ku dhaceen sanadka kowaad, laakin waxay qaadan karaan koorsooyinka sanadka labaad maadooyinka ay ku aflaxeen.

**FASALA 2010 KELIYA:**

▶ Ardayda sanadkooda ugu dambeeya ku jira aan ku aflaxin qaybta imtixaanka MCAS ilaa Sebtembar 2009 lagama rabo Inay qaataan Aljebraha Sare. Ardaydani waxay qaadanayaan Imtixaanka MCAS ee Xisaabta "Math Prep 12".

▶ Ardayda ku aflaxa November 2009 tijaabada kucelinta Imtixaanka MCAS waxay geli doonaan hal semistar Aljebraha Sare Febraayo 2010. Ardaydanu waa Inay ku aflaxaan kooskan si ay u qalin jebiyaan.

▶ Ardayda ku aflaxa November 2009 tijaabada kucelinta waxay sii wadayaan Imtixaanka MCAS Math Prep 12. Ardayda ku aflaxa Maajo 2010 MCAS lagama rabo Inay ku aflaxaan Aljebraha Sare si ay u qalin jebiyaan, haday ku aflaxaan MCAS Math Prep 12.

★ Golayaasha Waalidka Dugsiyadu waxay u codayn karaan shuruudo koorso iyo imtixaano ka badan kuwa liiska kore ku jira.

## Sy'aalaha iyo Jawaabaha xaga Nidaamka Gudbinta iyo Qalinjebinta Dugsiga Sare

**Hadii ardaydu ku dhacaan koorsooyinka qaarkood, ma inay sanadka dhan dib ugu noqdaan baa?**

Maya. Waxay koorsooyinkaas qadan karaan sanadka soo socda, waqtiga kulaylaha, ama dugsi habeenkii ahólaakin koray u socon karaan xaga maadooyinka ay ku aflaxeen. Ardaydu waxay kalee fursad u haystaan gelitaanka **Kayd Labakaclayn** (**Credit Recovery**), ee ah fursad internetka wax lagu barto oo u ogolaanaysa ardayda inay dib u qaataan koorsooyinka ay ku dhaceen. Wixi xog dheeraad ah, arag lataliyahaaga hanuuninta. Ardayda fasalka 12-aad (Senior) waxay kalee fursad u haystaan gelida qalinjebint kulaylaha ee degmada guud hadii ay ka baaqdeen qalinjebinta dugsigooda.

**Hadii ardaydu qaataan koorsooyin kala duwan sanadaha kala duwan xaga hilimada, goormay qaadanayaan imtixaanka MCAS fasalka 10-aad?**

Ardayda badankoodu waxay Imtixaanka MCAS qaataan fasalka 10. Ardayda qaar aan ku aflaxin sanadka kowaad Fananka Af Ingiriisiga iyo xisaabta sanadkooda kowaad waxay sugi karaan ilaa ay ku aflaxaan koorsooyinkaas..

**Iyado ay jiraan hilmo hal ka badan, maxa ka dhacaya dugiga kulaylaha ee magaalaweynta?**

DDB waxay dugsiyada magaalaweynta siiyaan kulaylaha koorsooyinka idil ee laga rabo. Hadii dugsi u baahado koorsooyin ka badan shuruudaha saldhiga ah ee degmadu ka rabto, waa In dugsigu helaa agabyada daboolaya siduu u fuliyo barnaamijkiisa kulaylaha.

**Waa dadkee kuwa ardayda iyo waalidkoodu wax ka weydiin karaan Nidaamka Gudbinta iyo Qalinjebinta Dugsiga Sare?**

▶ Waaxda Hanuuninta Dugsigaaga
▶ Waaxda Hanuuninta DDB 617-635-8030
▶ Xafiiska Agaasimaga Guud ee Dugsiga Sare 617-635-8079

# Barnaamijyada Gaarka ah:

## Barteyaalka Af Ingiriisiga

Dugsiyada Dadweynaha Boston (DDB) waxay ahmiyadda kowaad saaraan waxbaridda tayada ugu saraysa ee Barteyaalka Af Ingiriisiga (English Langugage Learners -ELL). DDB waxay fidiyaan adeegyo iyo kala doorashooyin badan sday ugu caawiyaan ardaydan barashada degdegga ah ee Ingiriisiga iyagoo dhiganaya sugaanta, qoridda, xisaabta, sayniska, taariikhda'culuumta dhaqanka, iyo fananka.

### Waa kuma Bartaha Af Ingiriisigu (ELL)?

Baarteyaalka af Ingiriisigu waa ardayda aan ku hadal Ingiriisiga ama afkooda hooyo uusan ahayn Ingiriisiga, iyo kuwa aan weli awood u lahayn inay wax ku bartaan af Ingiriisi. Waxa kale ardaydaas lagu tilmaami karaa «Kaaarti kooban u leh Ingiriisiga» (Limited English Proficient – LEP). Qiyaasta 11,000 oo arday DDB (waa 19% ardayda Boston) ayaa ku jira barnaamijyada barteyaalka af Ingiriisiga.

### Sidee baa ardayda loogu qoraa barnaamijyada ELL-ka?

Arday kasta ee gelaya dugsi degmo ugu horaynta waa Inuu buuxiyaa arjiga sahaminta afka guriga lagaga hadlo. hadii sahamintu tusto In Ilmuhu u qalmo adeegyada ELL-ga, waa In degmada dugsigu qiimaysaa kartidiisa afka Ingiriisiga (dhegeysaiga, kuhadalka, akhriga, qorida). Waalidka iyo koriyeyaalka ardayda u qalma adeegyada ELL-ka waxay sharciyan u leeyihiin In loogu sheego barnaamijka u diyaarsan hab ay garan karaan (xaga sansaanka luqada wax lagu barayo) si ay kadib u doortaan barnaamijka ay (waa waalidka iyo koriyeyaalka eh) ay rumaysan yihiin inuu sida ugu haboon waxtar u yahay baahida ilmahooda.

### Waa maxay khiyaarada Dugsiyada Ddadweynaha Boston siinayaan Barteyaalka Af Ingiriisiga (English Languge Learners-ELL)?

Xaga Dugsiyada Dadweynaha Boston, khiyaarada waalidka/koriyeyaalku ardayda ELL-ku kala doorankaraan waxa ku jira:

- Gelitaanka Ingiriisi Sugan (isku-fillaansho ah) -SEI
- Gelitaanka Ingiriisi Sugan (waxbarasho guud) -SEI
- Waxbarashada Laba-luqadle Isweydaarsan (Two-Way Bilingual Education)
- Waxbarashada Laba-luqadlaha Kalawareega (Transitional Bilingual Education)

**Gelitaanka Ingiriisi Sugan (isku-filaansho ah):** Qolfasalkan, ardaydu gebi ahaan waa Barteyaalka Af Ingiriisiga. Waxa la isticmaalaa qalabka waxbarida si loogu caawiyo ardayda barashada Ingiriisiga iyo qoraalkeeda. Waxa raacda , in loo fidiyo Ingiriisiga sida Af Labaad (English as a Second Language -ESL).

**Gelitaanka Ingiriisi Sugan (waxbarasho guud):** Qolfasalkan, ardaydu waxay isugu jiraan kuwa waxbarashada guud iyo Barteyaalka Af Ingiriisiga. Waxa la isticmaalaa qalabka waxbarida si loogu caawiyo ardayda barashada Ingiriisiga iyo qoraalkeeda. Waxa raacda , in loo fidiyo Ingiriisiga sida Af Labaad (English as a Second Language -ESL).

**Waxbarashada Laba-luqadle Isweydaarsan:** Qolfasalkan, Laba Afood ba ardayda la siiya kuwa Ingiriisiga ku hadla iyo kuwa af kale yaqaan (waqtigan, waxa ka jira oo keliya DDB barnaamijyada Isbanishka oo isweydaar ah). Akhris/qorida iyo ludka labadaba waxa loogu dhigaa ardayda labada afba. Ingiriisga sida Af Labaad (ESL) Isagana waa loo fidiyaa kuwa aan Ingiriisigu afka hooyo u ahayn.

**Waxbarashada Laba-luqadlaha Kalawareega** (TBE)★: Qolfasalkan, waxbarida tacliint waxa lagu fidiyaa Af Ingiriisiga oo ah luqada kowaad, iyadoo lagu isticmaalo qolfasalka inta badan Ingiriisiga marka heerka horumarka af Ingiriisigu sii kordhaba, ilaa ay gebi ahaan u wareegaan af Ingiriisiga. Qayb sidan ka mid ahi, waa Iyadoo ardayda Idil la baro Ingiriisiga sida Af Labaad (ESL) maca kubarashada afka hooyo.

**Akhris/Qorida Afka Hooyo** (Native Language Literacy) waa barnaamij gaar ahee Waxbarashada Kalawareega Laba-luqadlaha loo hindisay ka jawaabida baahiyaha gaarka ah ee ardayda, da'da 9 iyo wixi ka weyn, aan aqoon u lahayn akhriga/qorida afkooda hooyo, ama dugsi aan gelin. Himiladu waa in ardayda lagu caawiyo helitaanka xirfadaha af Ingiriisiga iyo xirfadadaha tacliimeed ee asaasiga ah iyo aqoonta, iyo in ay bartaan hiddaha habka dugsiyada Maraykanka.

★ Ardayda ku jira barnaamiyada TBE waxay u baahan yihiin kacafin ku saxeexan waalidka/koriyaha oo lagu aqoonsanayo In waalidku uu gaar ahaan codsaday barnaamijka TBE-ga. Fiiri hoos.

### Waqtigee baa ardayga ELL-ku codsan karaa kacafin (waiver)?

Waalidka Barteyaalka Af Ingiriisigu (ELL) waxay codsan karaan ku meelaynta fasalada Waxbarashada Laba-luqadlaha Kalawareega, oo kacafin looga sameeyo Gelitaanka Ingiriisiga Sugan (SEI), haday Is dhahaan Ilmahooda bay faa'Iido u tahay.

### Muxuu yahay hanaanka loo marayaa si loo helo kacafinta ilmaha 10 sano ka yar?

1. Waa in ilmuhu ugu yaraan ku jiraa 30 casho barnaamijka SEI intaan waalidku codsan.
2. Waalidku waa inuu dugsiga tagaa siduu u dalbado kacafinta. Waqtigaas, maaaamuluhu wuxu siinayaa waalidka war buuxa xagga barnaamijka ELL. Waana in waalidka warkaas lagu siiyaa afka uu garanayo.
3. Hadii maamulaha dugsigu kula heshiiyo in ilmahaas la siiyo kacafin, wa in maamuluhu warqad qoraal ah ku bixiyaaisagoo/iyadoo sababaha sheegaya/sheegaysa.

Maamulahaa iyo agaasimaha guud waa inay labaduba ansixiyaan kacafinta.

### Kacafin ma leeyihiin ardayda 10-jirka iyo wax ka weyni?

Haa. Ardayda10 sano jirta ama ka weyn, waxa sharcigu ogol yahay inay kacafin ka qaadan karaan SEI marka maamulaha dugsiga iyo macalimiintu rumaystaan in ardaygu si ka wacan horukac tacliimeed ku samayn karo oo si dhaqso Ingiriisiga ugu baranayo Waxbarashada Laba-luqadlaha Kalawareega. Maamulaha

## Bartaha Af Ingiriisigu (waa socotaa)

ama gacan yarihiisa/yaraheeda baa waalidka siinaya arjiga kacafinta siday u saxeexaan. Kacafinta waxa loo dirayaa Xarunta Adeegyada Qiimaynta iyo Latalinta Ardayga Cusub halkaa oo lagu maarayn doono.

**Wixi warar dheeraad ah ee barnaamijyada Barashada Af Ingiriisiga**

- Xafiiska DDB ee Barteyaalka Af Ingiriisiga, 617-635-9435
- Khubarada Gacansiinta DDB xagga Hawlgelinta Dugsiga, Qoyska & Bulshada Laba-luqadlaha, 617-635-7750
- Waaxda Waxbarashada Massachusetts ee Dugsiyada Hoose iyo Sare, www.doe.mass.edu/ell/

### Xafiiska Qiimaynta & Latalinta Ardayda Cusub
### Tel.: 617-635-6515

Waa adeeg cusub ee ardayda Dugsiyada K-12 ee run ahaan iyo mustaqbal ahaanba ELL-ka.
Wuxu furan yahay maalmaha dugsiyada, 8:00 aroor ilaa 4:00 galab wuxuna ku yaa Dugsiga Sare ee Madison Park Technical Vocational.

- Waxa lagu imtixaamaa afka hooyo iyo Ingiriisiga
- Waxa lagala taliyaa xaga waxbarashada iyo shaqada mustaqbalka
- Waxa a siiyaa hanuunin xagga DDB iyo adeegyada magaalada Boston
- Xogbixinno iyo agabyo qoysaska loo fidiyo.

# Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada la Xiriira

Sharciga Federaaligu wuxu ballan qaadayaa in arday kastaa xaq u leeyahay waxbarasho habboon oo lacag la'aaneed iyadaan loo eegayn naafanimo ama kala dhantaalkiisa. Sharciga Goboleedka (CMR 28) wuxu kalee ballan qaadayaa xaqa waxbarashada lagu heli karo «degaanka ugu xakamaynta yar,» sida meelaha caadiga ah ee ardayda aan naafo qabin.

### Aadeegyada Waxbarashada Gaarka

Aadeegyada Waxbarashada Gaarka waxa ka mid ah:

- Waxbarid gaar ahaan loo hindisay si loo daboolo baahiyaha ardayda naafada ah.
- Galitaanka manhajka guud iyo barnaamijyada loo hindisay inay bixiyaan fursado wabarid haboon xaga jawiga waxbarashada guud.
- Sii wadaida adeegyada, ay ku jiraan aanse ku ekayn jawiyada iskudarka, agabka iyo kuwa madaxbanaan.
- Adeegyada la xiriira, ay ku jiraan anse aan ku ekayn hadalka, terabiyadda waxqabsashada, iyo tarabiyadda jidhka.
- Waxbarida gaarka ah ee ardayda qaba naafonimada maqalka, araga iyo jidhka.

Saddex (3) dugsi baa u jira ardayda naafada ah: Waa Dugsiga Dhegoolka iyo Dhegaha Kakan ee Horace, Dugsiga Horumarinta Carter ee ardayda aad u garashada hooseeya, iyo Dugsiga McKinley ee ardayda wax uga dhiman yihiin xagga dareenka iyo dabeecadda, iyo Dugsiga McKinley ee ardayda naafada ulis xaga famka iyo dabeecadda.

Haddaad rumaysan tahay ilmahaagu dhibaatuu ku qabaa waxbarashada caadiga ah naafonimo awgeed, waxad xaq u leedahay inaad madaxa dugsiga ama Fududeeyaha Kooxda Qiimaynta (Evaluation Team Facilitator – ETF) weydiisato in ilmahaaga qiimayn lagu sameeyo si loo ogaado inuu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo in kale.

### Adeegyada la Xiriira

Dugsi kastaa wuxu leeyahay Kooxda Taageerka Ardayda siday ugu caawiyaan ardayda baahiyahooda khaaska ah. Shaqaalaha iyo waaxaha soo socda waa xubnaha dhextaalka u ah Kooxaha Taageerka Ardayda waxayna ardayda si toosa ugu fidiyaan adeegyada:

- **Isuduweyaalka taageerka ardayda** waxay diyaariyaan shirarka kooxda taageerka ardayda waxayna ku xiraan dugsiyada iskaashiga iyo adeegyada bulshada dugsiga ka baxsan.
- **Lataliyeyaalka hanunintu** waxay ardayda ku caawiyaa arrimo kala duwan, ay ku jiraan qorshaynta kuliyadeed iyo shaqada mustaqbalka.
- **Kaalisooyinka dugigu** waxay ku hawlan yihiin caafimaadka ardayda. Xaqiiji inaad kaalisada dugsiga u sheegto haday jiraan arrimo caafimaad ee ku lug yeelan kara kartida waxbarashada ilmahaaga. Fadlan fiiri boga 28.
- **Dhaqtarada sikolojiga ee dugsiga** iyo **lataliyeyaalka dejinta xasiloonida ardayga** ee ku caawiya tilmaamida ardayda naafo qaba oo sameeya talooyin si loo hagaajiyo hanashada tacliimeed. Waxay kalee fidiyaan adeegyada latalinta shaqsi ahaan iyo koox ahaanba.
- Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay kalee siiyaan ardayda aan ku meelgaadh ahaan haysan guri **inay Talaabada Ardayga Hoylaawaaha ah** wax ku taraan. Wac hadaad adeegyadan u baahato.

### Wixi warar dheeraad ah

- Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada la Xiriira 617-635-8599
- Hawlgelinta Qoyska & Bulshada 617-635-7750
- Adeegyada Taageerka Ardayda 617-635-8030
- Talaabada Ardayga Hoylaawaha ah 617-635-8030
- Webka: www.doe.mass/sped/prb hadaad rabtid nuqulka buuga Waaxda Mass. ee Waxbarashada Dugsiyada Hoose & Sare xaga Xuquuqdq Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah, oo afaf badan ku quran. Hadaadan haysan gelitaanka Internet-ka weydii maamulaha dugsiga. Hadaadan haysan Internetka, weydiiso maamulaha.

# Barnaamijyada Gaarka Ah: Waxbarashada Ka Duwan

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay bixiyaan barnaamijyo kala jaad ah xagga Waxbarashada Ka Duwan (Alternative Education) oo loogu talo galay inay daboolaan baahida ardayda dugsiyada dhexe iyo sare ee ku aflixi karin jawiga dugsiyada caadiga ah. Barnaamijyadaasi waxay bixiyaan adeegyo taageero culus iyo habab kala duwan ee waxbarasho.

Mase ku ballan qaadi karno in arday kasta ee codsada waxbarasho ka duwan inuu helo barnaamij caynkaas ah.

### Barnaamijyada Waxbarashada Ka Duwan

- **Ardayda Waaweyn.** Akademiyada Farsamada Dadka Waaweyn ee Boston (BATA) eek u taal Dugsiga Sare Madison Park waa ardayda da'dooda tahay 20-22 sano.
- **Ardayda rabshoolaha ah iyo kuwa la eryo.** Kuwani waxay galaan barnaamijyo uu ugu tala galay Agaasimaha Waaxda Waxbarashada Kaduwan. Himiladu waxaay tahay in lagu cesho ardayga dugsi dhexe ama sare.
- **Ardayda Maxkamad ku lug leh.** Ardaydan waxa meeleeya Waaxda Adeegyada Dhalinyarada (DYS), Waaxda Caruurta iyo Qoysaska (DCF), ama maxkamadaha.
- **Kahortagga Dhicitaanka ama Horumarka Waxbarashada Guud (GED).** Ardaydan iyo/ama qoysaska waxay doortaan gelitaanka mid ka mid ah barnaamijyadan waayo khibradihii xumaa ay kala kulmeen dugsiyada ama waayo waxay rabaan inay waddo kale ku helaan dibloomaha dugsiga sare. Waxa talo ka soo bixin kara dugsigii ay ka yimaadeen ama/iyo qoyska ardayga. Xaga wararka guud ee «GED»-da: doe.mass.edu/ged/
- **Dhalinyarada Dugsiga Gooyaama Lunsan.** Xarunta Dibuhawlgelinta Cusub ee DDB waxay fidisaa adeegyo kahortagga lagu baadho si ardayda loogu caawiyo inay sii wataan waxbarashadooda looguna diyaarsho aflaxaad dugsi sare kadib.
- **Dugsiyada Kaduwan ee dhalinyarada uuraysta iyo dhalinyarada dhibaato ka hayso daroogada.**

### Wixi warar dheeraad ah xaga Barnaamijyada Waxbarashada Ka Duwan

- ▶ Waxbarashada Kaduwan 617-635-8035
- ▶ Xarunta Dibuhawlgelinta 617-635-6650

## Fasalka Shaqada Horukacsan (AWC)

Fasalka Shaqada Horukacsan (Advanced Work Class -AWC) waa barnaamij buuxa oo ardayda u qalanta ee fasallada 4, 5 iyo 6. Barnaamijyadan «AWC» waxa laga helaa sadexda aagaga meelaynta dugsiyada oo idil. Shan iyo-toban dugsi baa leh «AWC» ee fasalada 4-5 iyo 12 dugsi oo AWC u leh fasalka 6. Fasaladu waa af Ingiriisi iyo Isbanish.

Aradayda AWC waxay dhigtaan maaddooyinka iyo sugaanta ardayda kale ay isku fasallada yihiin, laakiin si ka ballaadhan baa loogu dhigaa. Ardayda waxa laga rabaa inay dhameeyaan duruus kaloo badan fasalka iyo gurigaba. Xisaabta waxay ku qaataan tan fasalkooda iyo qaar ka mid ah fasalka ka sareeya. (Matalan ardayda fasalka 6 waxay qaataan kala bar duruusta fasalka 7 marka sanadku dhamaado.) Xagga Ingiriisiga, waxay ardaydu sameeyaan akhris iyo qoraal dheeraad ah iyo suugaano ka badan kuwa manhajka. Waxay kale ardaydu qaataan afaf ajnebiya: Isbanish, Faransiis, Shiine, iyo Jabaaniis.

### Sidee ardaydu u galaan barnaamijka AWC?

Ardayda oo dhami waxay ku galaan imtixaanada umadda ee akhriga iyo xisaabta fasalada 3, 4, iyo 5 si loo ogaado inay u qalmaan AWC-ga. Imtixaanada waxa la qaadaa Sebtembar ama Oktoobar horaanteedda. Barteyaalka Af Ingiriisigu (ELL) waa ku qaadan karaan imtixaanada af Isbanishka.

Si uu ardaygu barnaamijka ugu jiro ilaa fasalka 6, waa inuu keenaa fasalka 5-aad heerka 3 ama 4 waxa loo diro oo dhan, waa inay ka soo baxaan shuruuda xaadiraada DDB, waana inay si joogto ah ugu aflaxaa Imtixaanada akhriga iyo xisaabta.

### Sidee ku ogaanayaa in ilmahaygu u qalmo?

DDB waxay boosta ku diraan ku soo dhoweyn ardayda u qalanta bisha Janaayo. Hadii ardayda u qalantaa ka bataan kuraasta AWC ee jirta, waxa ardayda lagu casuumaa siday u kala sareeyaan.



### Sidee loogu meeleeyaa ardayda AWC?

Ardayda u qalmaa waxay helayaan arji lagu taxay kala doorashada AWC ee aagooda iyo kala doorasho aan ahayn barnaamijka AWC.

Meelaynta AWC waxa la sameeyaa iyadoo la raacayo habka ku meelaynta caadiga ee DDB (eek u dhisan xulashada, walaalaha, aaga lugaynta, iyo tirooyinka qori tuurka.) Waalidku wuxu lambarro ku kala qorayaa dugsiyada arjiga ku yaal siduu u kala jecel yahay. Xulashadu waxay noqon kartaa dugsiyo isku dhafan ee AWC leh ama aan lahayn - laakin hadaad rabto kumeelayn AWC, xaqiiji inaad xulato barnaamijyada AWC oo keliya.

### Wixi warar dheeraad ah ee Fasalka Shaqada Horukacsan (AWC) wac:

- ▶ Ogolaanshaha AWC 617-635-9512
- ▶ Manhajka AWC 617-635-9202

# Dugsiyada Imtixaanka

Boston waxay leedahay saddex dugsi oo loo yaqaan «dugsiyada imtixaanka», kuwaas oo ardaydu ku gasho imtixaan ka dhexeeya iyo waxa qof walbaa keeno. Waxay kala yihiin Boston Latin Academy, Boston Latin School, iyo John O'Bryant School of Mathematicas and Science. Saddexdaba waxa loogu tala galay fasallada 7–12 waxana gala fasallada 7 iyo 9. Dugsiga O'Bryant waxa kalee loo qaataa tira kooban ee arday cusub fasalka 10. Waxay bixiyaan manhaj adag oo ardayda loogu carbiyo siday u geli lahaayeen jaamicad. Dugsiyada imtixaanku waxa lagu qaataa duruus iyo shaqa-guri ka badan kuwa dugsiyada sare ee DDB badankooda.

Codsiga gelitaanka dugsiyadaas waxay ku xidhan tahay natiijooyinka lagu keeno imtixaano loo yaqaan ISEE – Imtixaanada Gelitaanka Dugsiyada ee Madaxbanaan – iyo dhibcaha laysku celceliyey ee derejada ardayga (Grade Point Average – GPA).

### Imtixaanka Gelitaanka Dugsiyada Madaxbanaan

Ardayda dalba dugsiyada imtixaanka oo idil kuwa Boston iyo kuwaan degeneynba- waa inay imtixaanada ISEE qaataan Diisambar 31 kahor ee sanad dugsiyeedka ay codsadeen. Waxay ku qaadan karaan imtixaanka ISEE xarun imtixaan ee Boston ama xarun kale ee imtixaan. Imtixaanada ISEE waxa lagu qaadaaa Boston sabti, Nofambar 7, 2009.

Looma baahna inay ardaydu ku nool yihiin Boston markay imtixaanka gelayaan. Ardayda aan ku noolayn Boston waa inay iska diiwaan geliyaan Xafiiska DDB ee Xafiiska Adeega Meelaynta, 26 Court Street, waana inay bixiyaan lacagta imtixaanka iyadoo ah «money order» kuna qoraan «payable to the City of Boston». Ardayda ku nool Boston waxay arjiga u keeni karaan maamulaha ama madaxa dugsigooda. Warqadaha laysku diiwaan geliyo ISSE-da waxa laga helaa dugsiyada, maktabadaha iyo naadiyada Wiilasha iyo Hablaha. Ardayda qaadanaya imtixaanka ISEE Nofambar 7 waa inay ku soo ceshaan arjiyada codsiga dugsiyadooda ilaa bisha Sebtembar 23, 2009.

### Iskucelcelinta Dhibcaha Derejada (GPA)

GPA-da waa iyadoo laysku daray dhibcaha ardayga ee uu Ingiriisida iyo Xisaabta ku helay markuu ku jiray fasallada 5 iyo 7 iyo labada xilli-dugsi (terms) ee ugu horreeyey fasallada 6 iyo 8. Bisha Janaayo sanad walba ardayda codsatoo idil, waxa loo dirayaa arjiyada GPA-da. Ardayda dugsiyadoodu waa inay ku soo celiyaan arjiyada DDB Xafiiska Adeegyada Meelaynta ilaa Jimcaha ugu horeeya ee Febraayo. Si tartiib ah Dib ufiiri arjiga dhamaystirka dhibcaha (GPA):Derejooyinka lama bedeli karo kadib marka arjiga la dhiibo.

### Degenaanta Codsadeyaalka Dugsiyada Imtixaanka

Ardayda codsada oo dhami waa inay qoraal ku soo cadeeyaan inay ku nool yihiin Boston.

- Ardayda aan hadda ku jirin Dugsiyada Dadweynaha Boston waa inay ugu yaraan keenaan sadex cadaymood ee degenaanshaha Boston qof ahaan (eeg boga 46) mid ahaan Xarumada Waxtarmada Qoyska ilaa 5:00 galabti Jimcaha Febraayo 5, 2010. Waxa lagaa rabi karaa waraaqo dheeraad ah. Arday kasta aan ku jirin DDB ee keeni waaya ugu yaraansadexda cadaymood ee kuwa la ansixiyey shaqsi ahaan ilaa Jimcaha Febraayo 5 ugu horeeya, looma tixgelinayo lagumana casuumayo gelitaanka dugsiyada imtixaanka. Xogta meesha, goorma iyo sida loo cadaynayo degenaanshaha waxa boosta la dhigayaa bisha Disambar.

  **DDB ma aqbalayaan cadaymo degenaansho ee boosta, email-ka ama fakas lagu soo diray, ama kuwa qof ahaan la keenay marka waqtiga la rabay dhaco. Waxan ka xun nahay inaan shuruudsan qofna laga dhaaafayn.**

- Si loo ogolaado ku casunka wiilka ama gabarta qoys dugsi imtixaan, waa in waalidku/Koriyuhu saxeexaa oo soo celiyaa arjiga taariikhda casuumida ku e gee ku taal arjiga. Aqbalaada casuumida, wuxu waalidku ama kooriyuhu ku xaqiijinayaa in ardaygu run ahaan ku nool yahay Magaalada Boston. Taasi waxay saamaysaa ardayda iminka dhigta Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo ardayda dhigta dugsiyada kale ee aan ahayn DDB.

### Wixi warar dheerad ah ee ku saabsan Dugsiyada Imtixaanka

- Wac 617-635-9512
- Wac Miduun Xarumada Waxtarmada Qoyska (eeg boga 5).
- Eeg bogagga 46-47 wixi degenaanshaha ku saabsan ee dheeraad ah
- Booqo website-ka DDB

# Waxkubaris Guri iyo Cusbital

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay u fidiyaan waxbarasho iyo umeerin ardayda "siday la noqoto dhakhtarkooda, ay tahay inay gurigooda joogaan, ama cusbitalka, maalin ama habeen-dhax, ama labadaba waqti dhan ugu yaraan afar iyo toban casho ee sanad dugsiyeedka." Intaan aradaygaas la siin adeegaas, dhakhtar sharciyaysani waa inuu buxiyaa arji gobolku rabo.

### Wixi warar dheeraad ah xaga Waxkubarista Guriga iyo Cusbitalka

- Waxbarashada Gaarka ah & Adeegyada la Xiriira 617-635-6633

# Waxkubarista Guriga

Waalidka ku nool Boston ee doonaya in ilmahoda wax lagu baro hoygooda waa inay arji u qortaan DDB Waaxda Waxbarashada Kaduwan si loogu ansixiyo. Waana inay cadeeyaan in ra'yigooda waxkubarista gurigu ay la socoto Tusaalooyinka Waxbarashada Guriga ee Massachusetts oo waafaqsan tahay shuruudaha goboleed ee sharciga Xaadiraada Qasabka ah (Compulsory Attendance law).

### Wixi warar dheeraad ah xagga Waxkubarista Guriga

- Waxbarashada Kaduwan 617-635-8035

# Adeegyada Ardayda:
## Adeegyada Caafimaad

### Kaalisada Dugsiga

Dugsi kastaba wuxu leeyahay Kaaliso. Dusgiyada qaarkood kaalisaa joogta maalin walba, qaarna dugsi kale ayay la wadaagaan kaaliso. Haddaad rabto inaad la hadasho kalisada dugsiga, waxad wacdaa lambarka dugsiga telefanka ilmahaaga.

Kalisooyinka waxa waxa sharciyeeya Waxda Waxbarashada Dugsiyada waana inay ka bixi karaan farsamooyinka caafimaadka ee dhigan. Isla markaas, waxay gidigood Shahaado ku haystaanWadnaha Dhibib kicintiisa (CPR) iyo Gurmadka Hore (First Aid). Kaalisooyinku waa inay:

- qiimeeyaan oo maamulaan baahida caafimaadka srdayda dugsiyada oo dhan;
- aqoonsadaan oo maamulaan ardayda baahida gaarka qaba;
- la shaqeeyaan kooxaha kale ee dugsiyada si loo dhidbo jawi nabad iyo caafimaad;
- siiyaan ardayda dawooyinka loo soo qoray;
- bixiyaan gurmadka iyo caafimaadka degegdegga;
- ku caawiyaan qoysaska siday u helaan caymiska iyo carmaha caafimaadka;
- maamulaan xakamaynta cudurrada faafa.

Waxad ku caawin kartaa kaalisada dugsiga ilmahaaga inay u xanaanayso sidatan:

- inaad u sheegto kaalisada cudurrada ilmahaaga;
- inaad le xiriirto haddii wax laga bedelo dawooyinka ilmahaaga, iyo
- inaad cusboonaysiiso caarka caafimaadka degdegga ee ilmahaaga si mar walba laydiin heli karo.



### Talaalada

Sida sharciga gobolku dhigayo, waa in ardayda la tallaalaa intaan dugsiga la diiwaan gelin. Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay rabaan in ardaydu yeeshaan talaalo buuxa siday u galaan dugsiga.

FIIRI: Hadii ilmuhu 4 sano gaaro isaga ama iyadu waa inay qataan talaalada xanaanada K1/K2. Hase ahaatee hadii cunugu 3 sano keliya yahaya waqtiga la qorayo, LAGAMA RABO inauu qaatay talaalada 4-sano jirka.

Shaxda soo socota waxay tilmaamaysaa tusaalooyinka Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts ee talaalada iyo gelitaanka dugsiga.

#### Talaalada Laga Rabo in Dugsiga la Qoro

| | K0 (da'da 3) | K1/K2 (da'da 4–5) | Fasalada 1–6 | Fasalaada 7–12 |
|---|---|---|---|---|
| **Hepatitis B** | 3 talaal | 3 talaal | 3 talaal | 3 talaal |
| **DtaP/DTP/ DT/Td** | ≥ 4 talaal DTaP/DTP | 5 talaal DTaP/ DTP | ≥ 4 talaal DTaP/ DTP ama ≥ 3 doses Td | 4 talaal DTaP/ DTPama ≥ 3 Td +1 Td xoojiye |
| **Polio** | ≥ 3 talaal | 4 talaal | ≥ 3 talaal | ≥ 3 talaal |
| **Hib** | 1-4 talaal | N/A | N/A | N/A |
| **MMR (Jadeeco)** | 1 talaal | 2 measles, 1 mumps, 1 rubella | 2 measles, 1 mumps, 1 rubella | 2 measles, 1 mumps, 1 rubella |
| **Varicella (chickenpox) [Busbus]** | 1 talaal* | 1 talaal* | 1 talaal* | < 13 sano: 1* ≥ 13 sano: 2* |

*ama cadayn in cudurku ku dhacay.

Wixi warar dheeraad ah, fadlan aad: www.mass.gov/dph/cdc/epii/imm/school_req/schoolentry.pdf. Fadlan la xiriir Adeegyada Caafimaadka DDB 617-635-6788 hadaad su'aalo qabto.

Waalidku waa inuu keenaa xaanshiyo dhakhtar soo saxeexay oo tusaya in ilmaha laga talaalay majinka, xiiqdheerta, teetanada, dabaysha, jadeecada, iyo cagaarshowga. Waa in diiwaanku tusaa maalinta, taariikhda, iyo sanadka talaalada lagu sameeyey.

**Talaalka busbuska ama «Varicella»** (chickenpox) waxa laga rabaa hadaan ilmaha busbus ku dhicin. Waa in la cadeeyaa in taariikh busbus ku dhacay oo dhakhtar warqad ku qoray ama diiwaan talaal. Waan in diiwaanku tusaa maalinta, bisha, iyo sanadka talaalka la siiyey.

Waxanu kalee aad ugu talinaynaa in ardayda ilmahaaga loo sameeyaa Qiimaynta Khatarka Cudurka Feeraha.

**Talaalka Meningococcal** loogama baahna gelitaanka dugsi. Laakin Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Masachusetts waxay ku talinayaan talaalka meningococcal ee caruurta da'da 11-12 sano jira, iyo dhalinyarada gelaya dugsi sare (da'da 15). Kaalisooyinka dugsi baa ku haya warqadaha «Cudurka Meningococcal iyo Ardayda: Su'aalaha inta badan la isweydiiyo» qolka caafimaadka, ama nuqul waxad ka helaysaa dhakhtaarkaaga caafimaadka.

**Diiwaangelinta talaaladu waa mid aad muhim u ah.** Waalidka/ilaaliyeyaasha ayaa ka mas'uul ah in tallaalka ardayda loo sii wado, waana in kaalisada lala socodsiiyaa marka tallaal cusub la siiyaba. Kaalissoyinka dugsiyadau si joogto ah ayay ula socdaan rocoorada tallaalada ardayda.

Ardayda aan talaalkoodu dhamaysnayn dugsiga waa loo diidi karaa. Hadii dugsiga uu ka qarxo cudurka busbusku oo aan xaanshiyuhu cadaynayn in ilmahaaga busbus ku dhacay ama laga talaalay, ilmaha dugsiga loo ogolaan mayo. Sharciyadaas waxa dejiyey Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Hogaanka Caafimaadka Boston (Mass. Dept. of Public Health and Boston Health Commission).

## Talaalada (waa socotaa)

**WADCIYO GAAR AH.** Haddan wax degdeg ah ama cudur dadka ku fiday jirin, ardaydu waa bilaabi karaan dugsiga haddii waalidka ama ilaaliyuhu qoraal ku soo (1) dhiibo uu saxeexay dhaqtar ama wadaad oo dhigaya inaan ilmahaas la tallali karin arrin caafimaad awgeed, ama (2) haddii tallaalku ka hor imaanayo xag diineed.

## Baadhista Gidhka

In kastoo waalidku mas'uul ka yihiin caafimaadka ilmahooda, Dugsiga ayaa ka mas'uul ah nabadgelyada iyo daryeelka inta ardaydu dugsiga joogaan. Marka ardaydu dugsiga ku cusub yihhin waa inay soo bandhigaan muddo lix bilood gudahood ah baadhis caafimaad oo buuxda. Kaalisada waxa laga rabaa inay dalbato cusboonaynta faylka caafimaadka sanadka afraad, sanadka lixaad iyo kan saqaalaad intaba

Usbuuca ugu horeeya ee dugsiga, kaalisada dugsigu waxay weydiisan kartaa baadhis dhawaan jidhka laga qaaday. Hadii waqtiga kulaylaha dugsigu xiran yahay ilmahaaga talaal cusub la siiyey, waa in loo keenaa kaalisada.

ArdaydA idil waa inay haystaan fayl baadhista caafimaadka jidhka fasalada 4, 6, iyo 9. Waana in ardaydu haystaan faylka baadhista jidhka oo buuxa haday rabaan inay ka qayb galan cayaaraha iyo jir-dhiska

Xusuusnow ina xarumaha caafimaadka badankoodu laba usbuuc ku diyaariyaan ricooradaas.

## Daawooyinka Dugsiga Lagu Qaato

Kaalisooyinka dugsiyada oo keliya ayaa bixin kara daawada ilmaha loo soo qoro. Inta badan kaalisadu waa qofka maamula daawo siinta. Hase ahaatee, waxa jira sadex duruufood oo qof aan kaalisada ahayni ku siin karo arday daawo.

1. Marka ardaygu safar dibadda ah u baxo (field trip) kaalisadu qof weyn bay wakilan kartaa oo tababar siin kartaa siduu daawada (daawooyinka) arday u siiyo.
2. Ardayda halista ugu jira ku caarood nafta khatar gelin kara (life-threatening allergic reactions) waxa gurmad degdeg ah daawo ugu bixin karaa shaqaalaha dugsiga. Kaalisadu waxay mas'uul ka tahay tababarka iyo kormeerka dadka dhan ee daawo bixin kara.
3. Ardayda qaarkood iyagaa daawada isa siin kara, sida daawada kuwa neefta qaba ee la nuugo. Si taas loo ogolaado waa in waalidku la xiriiraa kaalisada dugsiga si loo diyaariyo Qorshaha Daawo Isa-Siinta (Self-Medication Plan).

Si ay u siiso kaalisadu dawada, waa inay amar qoraal ah ka haysataa dhakhtar iyo saxeexa waalidka. Daawooyinka aan dhakhtarku qorin (waa kuwa farmashiga toos looga iibsado) sida Tylenol ama Motrin waa la siin karaa iyadaan amar dhakhtar la haysan laakin waxa loo baahan yahay fasax waalid. Weydiiso kaalisada dugsiga ilmahaaga arjiga fasaxa lagu saxeexo. Waalidku waa inuu keenaa dawooyinka ilmaha, iyagoo ku jira weelkii asal ahaan farmashigu ku bixiyey. Had iyo goor u sheeg kaalisada hadii dhakhtarku bedelo nooca dawada ama inta laga siinayo.

## Caymiska Caafimaadka

Caymiska caafimaadka waa heli karaa ilmo kasta oo Massachusetts deggani. Hadaad warar dheeraad ha rabto ee caymiska caafimaadka, la xiriir Khadka Caafimaadka Duqa Magaalada ee 617-534-5050.

## Wadciyada Gaadiidka Gaarka ah

Fiiri boga 37, ee «Wadciyada Gaadiidka Gaarka ah,» xagga xogta adeegyada gaadiidka ardayda naafada ah ama leh caafimaad xumada jidhka, taasoo awgeed ayan awoodin inay baska ama meesha baska laga raaco u lugeeyaan.

## Gurmadka Caafimaadka Degdega ah

Hadii arday xanuunsado ama dhaawac ku gaadho dugsiga, dugsigaa wax kasta samaynaya si loo wargeliyo waalidkaama qofka gurmadka degdega ugu qoran falka ilmaha ka yaal xafiiska. Maamulaha iyo kaalisada ayaana ka wada tashanaya wixi laga qaban laha. Jirooyinka badankooda iyo dhaawacyada ka dhaca dugsiga maalintii waa sahlan yihiin waxana daaweyn karta kaalisa. Hadii xaalka ilmuhu xunyahay, maamulaha ama shaqaalaha kale dugsiga ayaa wacaya ambalaans. Shaqaalaha dugsiga qof ka mid ah ayaa ardayga kula joogaya ambalanska iyo cusbitaalka sida ugu fiican ilaa waalidka/koriyuhu ka yimaado. Hase ahaatee, hadii waalidku imaanwaayo waqti macquul ah, qolka gurmadka degdega ah ee cisbatalka baa la wareegaya mas'uuliyada ardayga. Waxa aad muhim u ah inay cusboonaysiiyaan kaararka gurmadka degdega ah si aan dhaqso ula xiriirno.

## Xarumada Caafimaadka Dugsiyada

Hogaanka Caafimaadka Dadweynaha Boston (Boston Public Health Commission), oy iskaashanayaan Dugsiyada Dadweynaha Boston, Xarunta Caafimaadka Boston, iyo qaar ka mid xarmudada caafimaadka beelaha, waxay maamulaan xarumada caafimaadka ee DDB. Waxay ku jiraan liiska boga 30.

Ardayda dugsiyadaas tagaa waxa lagu dhiiriyaa inay «toos u galaan» xarunta caafimaadka ee adeegyadaas iyo kuwa kale ee rugta dugsiyada:

- adeegyada baaritaanka;
- daaweynta dhaawaca;
- talabixinta nafaqaynta;
- talabixinta xaafimaadka maskaxda;
- baaritaanka ilkaha;
- baadhista jidhka iyo jirdhiska isboortiga;
- gelitaanka caymiska caafimaadka; iyo
- wararka caafimaadka

Xarumada caafimaadku waxay leeyihiin aqoonyahan caafimaad caafimaad (gacanyare dhakhtar ama kaaliso), lataliye caafimaadka

# Adeegyada Ardayda: Adeegyada Caafimaad (waa socotaa)

## Xarumada Caafimaadka Dugsiyada

**Boston Community Leadership Academy ***
617-534-2020
bclacademy@bphc.org

**Boston Latin Academy ***
617-534-9930
latinacademyhs@bphc.org

**Brighton High School ***
617-635-9880
brightonhs@bphc.org

**Burke High School ***
617-534-9943
jeremiahburkehs@bphc.org

**Charlestown High School ***
617-534-7699
charlestownhs@bphc.org

**English High School**
Brookside Health Center
617-522-4700

**Dorchester Education Complex**
Codman Square Health Center
617-825-9660

**Hyde Park Education Complex**
Mattapan Health Center
617-296-0061

**Madison Park Technical Vocational High School ***
617-534-9965
madisonparkhs@bphc.org

**O'Bryant High School ***
617-534-9509
johnobryanths@bphc.org

**Snowden International School ***
617-534-9514
snowdenhs@bphc.org

* Xarumada Caafimaadka Dugsiyada waxa maamula Hogaanka Caafimaadka Dadweynaha Boston (Boston Public Health Commission). Wixi warar dheeraad ah, la xiriir:

Barnaamijka Xarunta Caafimaadka Dugsi ku Salaysan, 617-534-5198

E-mail: schoolhealth@bphc.org

www.bphc.org/programs/default.asp, garaac « School Health»

## Fariinta Waalidka iyo Koriyeyaalka Ardayda Fasalka 5 Xaga Fasalada Waxbarashada Isdhalida

Waxbarida dhalinyarada siday u fayoqabi lahaayeen waa himilo waxbarasho oo lagama maarmaan ah. Si taas loo gaaro, Dugsiyada Dadweynaha Boston, waxay dhisayaan barnaamij caafimaad buuxa ee caruurta si loo xoojiyo awooda camalfalkooda dugsi iyo inay helaan nolol leh fayoqab iyo waxsoosaar. Dadaalkan waxa ku jira u fidinta waxbarida fayoqabka min xanaano ilaa fasalka 12 ee baraya caruurta qaababka jirkooda kuna taageeraya horumarinta dabeecadaha caafimaad qabka iyo dhismaha xirfadaha fayoqabka iyo joogtaynta caafimaad fiican.

Ujeedada warqadani waa in laguu sheego qaybta caruurtaada lagu barayo korimaada isugalmood caafimaad qaba, in looga waramo cudurka "HIV" iyo sida loo faafiyo, lana baro diidmada, iska adkaanta, iyo xirfadaha kale ee warbixinta ee ku caawinaysa inay diidaan ka qaybgalka falalka khatarta keenaya. Duruusta waxa ku jira wararka sida laysugu galmoodo. Su'aalaha ardayda oo idil si xaqiiq ah baa jawaabo looga bixinayaa. Ilmo kasta qiimihiisa sir ahaan iyo shaqsi ahaanba waa la dhawrayaa.

Himilada barnaamijkani waa in arday kasta la baro siduu u horumariyo caadooyin fayoqab micno leh oo noloshiisa oo dhan la socda iyo inay dhabarka u ritaan mas'uuliyada caafimaadkooda wiil iyo gabarba. Waa muhim in la baro ilmaha wararkan goor hore ee noloshiisa waayo waxay seeska u dhigaysaa horumarinta caadooyin nololeed ee fayoqab ku salaysan.

Mawduucyadan soo socda baa ku jiraya duruusta:

- Koriimada iyo horumarka barbaanimada, ay ku jirto isbedelka marka la baaluqo
- Sida cudurada faafa (ay ku jiraan HIV/AIDS) loo faafiyo iyo sida looga hortago inay faafaan;
- Dabeecadaha horseeda waxa keena fayoqab fiican;
- Go'aan qaadashada mas'uuliyadeed;
- Iskacaabinta cadaadiska delegan ee kuwa laysku faca yahay;
- Diidma, iska adkaanta, iyo xirfadaha warbixinta (waa siyaabaha aad ku oranayso "maya" xaga faalalka khatarta leh);
- Ixtiraamida xuquuqda shaqsiyeed ee naftaada iyo dadka kaleba;
- Xadaynta jacaylka jirka.

Waalidku waxay ku yeelan karaan ayna tahay inay ku yeeshaa tusaale xoogan go'aanada caafimaadka ilmahooda. Waaxada Adeegyada Taageerka Ardayga ee Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay waalidka u qabtaan seminaaro kugu caawin kara inaad kala hadasho ilmahaaga arimaha xasaasiga ah ee xaga caafimaadka. Fadalan la xiriir dugsiga ilmahaaga ama xafiiska HIV/ Waxbarashada Isugalmoodka ee (617-635-8030) hadaad warar dheeraad ah rabto.

Saldhig ahaan, waxa la isticmaalayaa laba manhaj: Dukaanka Weyn ee Jirka iyo Dibudhigida Kaqaybgalka Isugalmoodka ee Tobanjirada Kahor (The Great Body Shop and Postponing Sexual Involvement for Preteens). Waxan jecel nahay inaad fiirsato alaabta iyo manhajyada. Waxad taas lagaaga diyaarin karaa dugsiga ilmahaaga. Hadaad go'aansato INAADAN rabin ilmahaagu inuu ka qayb galo waxbarashadan, fadlan qoraal u dir maamulaha dugsiga ilmahaaga siduu u ogaado/siday u ogaato go'aankaaga. Hadii loo baahdo, arjiyo ka cafineed baa laga helaa dugsiga sidaad u saxeexdo. Ardayda laga cafiyo laguma ciqaabayo tacliin ahaan. Go'aankaaga waa la qadarinayaa.

## Xarumada Caafimaadka Dugsiyada (waa socotaa)

maskaxda, iyo isuduwe caafimaad. Waxa la helaa waqtiga maalin dugsiyeedka si ardayda u baahan adeegyada caafimaad waqtiga ugu gaaban ay kaga maqnaan karaan fasalada.

## Fasalada Waxbarashada Isugalmoodka (Sexuality Education Classes)

Dugsiyada waxa sharciga gobolku dhigayaa in waalidka la ogeysiiyo fasalada waxbarashada isugalmoodka iyo arrimaha isutagga labka iyo dheddiga. Ogeysiintu waa inay dhigtaa sida waalidku u fiirsan lahaa waxyaabaha fasaladaas loogu tala galay qoraal iyo qalabba. Ogeysiinahani waxay ku yaaliin bogan iyo boga 31.

In kastaan waalidka looga baahnayn inay fasax bixiyaan in ilmahoodu galaan fasalada waxbarashada isugalmoodka, waxse uu xaq u leeyahay inuu ilmihiisa u diido fasaladaas. Siduu taas loo sameeyona, warqad u soo qor maamulaha ama madaxa dugsiga ado sheegaya inaadan rabin in ilmahaagu ka qayb galo fasalada isugalmoodka.

## Golaha Caafimaadka Dugsiga (School Health Council)

Golaha caafimaadka dugsigu wuxu ka tirsan yahay xubnaha beesha, waalidka, ardayda, iyo shaqaalaha dugsigga ee wada shaqeeya sidii loo dhiiri geliyo cunto caafimaad leh iyo dhaqmaati haboon. Goluhu wuxu kulmaa shan good sanad dugsiyeedka. Sfirarku cid walba waa u furan yihiin. Wixi warar dheeraad ah ee waqtiyada kulanada iyo sidaad uga qayb gasho, kala xiriir Adeegyada Caafimaadka DDB ee 617-635-6788.

## Fariinta Waalidka iyo Koriyeyaalka Ardayda Fasalka 6–12 Xaga Fasalada Waxbarashada Isugalmoodka

Barnaamijka waxbarashada isugalmoodka bani'aadanka ee Dugsiyada Dadweynaha Boston, ay ku jiraan «HIV/AIDS (Acquired Immune Deficiency Syndrome)» iyo cudurada kale ee isugalmoodka ku faafa, waa la sii wadayaa sanadkan sidi horeba loo waday. Cudurka «Human Immunodeficiency Virus (HIV)», ee sababa AIDS, waa cudur inta badan ku dhaca dhalinyarada rag iyo haweenba markay noloshooda caafimaad ee ugu saraysa ku jiraan. Dhaliyaro badan baa khatar aad u saraysa ugu jira inay qaadaan cudurka HIV iyo cudurada kale ee faafa. Sida darteed, ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan dhaqamada u keenaya khatarta dheeraadka ah.

Dugsiyadu way difaacayaa caafimaadka caruurtaada iyadoo loo fidinayo ardayda fasalada 6–12 wararka asalka ah xaga dabeecada cudurka HIV, sida uu u fido, iyo sida looga hortago inuu ku dhaco. Barnaamijkayagu wuxu ku nuuxnuuxsadaa in ka fogaanta isugalmoodka iyo camafal xumada daroogada laysku mudo ay yihiin sida keliya ee xaqiiqo ahaan lagaga badbaadi karo cudurkan. Waxbarashadu waa sida ugu wacan ee lagu caawin karo joojinta faafida cudurkan. Barnaamijkayagu wuxu barayaa siyaabaha idil ee kahortaga cudurka. Waxa intaas raacda, waxan danaynaynaa inaan barno kahortaga uurasiga barbaarta. Waqtiga waxbarashadan, su'aalaha dhan ee ardayda waxa looga jawaabayaa sida runtu ku jirto.

Waxa lagugu dhiiri gelinayaa inaad ilmahaaga barto isugalmood fayoqab leh. Xogtan waxa ku jira cudurada «HIV/AIDS», cudurada isugalmoodka ku faafa, iyo kahortaga uuraysiga. Sidi horeba u jirtay, waxan sii wadaynaa inaan waalidka seminaaro u fidino. Waxad la xiriiri kartaa dugsiga ilmahaaga sidaad uga qayb gasho seminaaro gaar ahaan loo habeeyey xaga arimaha muhimka ah ee caafimaadka dhalinyarada. Waxa kalee lagugu soo dhoweynayaa laguguna dhiiri gelinayaa inaad fiiriso qoraalada idil ee lagu isticmaalo waxbarashada barnaamijka. La xiriir maamulaha/madaxa dugsiga ilmahaaga sidaad u fiirsato qalabkaas.

Dugsiyada dhexe iyo sare qaarkood, waxan weydiinaa ardayda inay sahamin cilmiyeed buuxiyaan xaga dhaqankooda khatareed iyo mawduucyada la xiriira wax nagu caawin kara ogaanshaha baahida iyo sida wax looga qaban karo barnaamijka waxbarashada fayoqabka. Waxan u baahan nahay ogaanshaha waxan barnaa inuu wax ka bedelayo dhaqamada ardayda. Hadaan wax su'aalo ah qabto xaga sahaminada, waxad xog dheeraad ah kala xiriiri kartaa maamulaha/madaxa dugsiga ilmaahaaga.

Waxan rumaysan nahay in kaqaybgalka barnaamijkani yahay mid aad u muhim ah. Hase ahaatee, HADAADAN rabin in inankaagu/inantaadu ka qayb qaadan barnaamijyada kahortaga isugalmoodka bani'aadanka iyo cudurada HIV/AIDS ama tirakoobyada la xiriira, fadlan u qor mamulaha dugsiga ilmahaaga siduu u ogaado/siday u ogaato go'aankaaga. Hadii loo baahdo, arjiyo kacafineed baa jira sidaad ugu saxeexdo dugsiga ilmahaaga. Ardayda laga cafiyo looma ciqaabayo tacliin ahaan. Go'aankaaga waa la qadarinayaa.

Waxad ku mahadsan tahay iskaashiga aad noo fidisay xaga barnaamijkan waxbarasho ee muhimka ah. Waxan filasho weyn ka qabnaa inaan kula shaqayno si loo xaqiijiyo sii socodsiinta, baahinta dadaalada waxbarashada isugalmoodka iyo cudurka AIDS-ka ee ka socda dugsiyadeena. Waqtigii ka hortaga faafinta cudurada HIV/AIDS ee dhalinyarada magaaladeenu waa IMINKA.

# Adeegyada Ardayda:
## Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada

Dugsiyada Dadweynaha Boston(DDB) waxay siiyaan quraac iyo qado nafaqaysan ardayda oo dhan ee fasallada K-12 iyo kuwa barnaamijyada Kale. Sida uu dhigayo Sharciga Umadda ee Nafaqayntu, waxanu bixinaa cuntooyin lacag jaban ama lacag la'aan ah sida hadba dakhliga qoysku yahay. Dugsiga kadib cunto fudud ayaanu bixinaa hadii ardaygu na weydiisto. Bilaha xagaaga, marka dugsiyadau xiran yihiin, waxanu ka bixinaa quraac iyo qado meelaha waxabarashada ee magaalada oo idil.Arjiyada codsashada

Cuntada waxa lagu fidiyaa dugsiyada oo idil Sebtembar kasta. Qoyska walba waa inuu buuxiyaa oo soo ceshaa arjiga codsiga cuntada. Fadlan sidan samee si degdeg ah!

Qoysaska qaarkood si toos ah ayaa Waaxda Kaalmada Kumeel Gaarka ahi (DTA) ugu sharciyaysaa inay helaan faa'iidada cuntooyin bilaash ah. DDB ayaa boosta ku dira afar goor sanadkii waaraqaha ku war gelinaya waalidka faa'iidooyinkan. Ardayda toos loo sharciyeeyey looma baahna inay buuxiyaan arjiga cuntada bilaashka ah.

Markaan kala safayno codsashooyinka waraaq baan reer kasta u dirnaa, nagoo dugsiga sii marinayna, taasoo ardayga u sheegaysa inuu u qalmo cunto lacag la'aan ah, mid lacag dhiman iyo mid lacag buuxda ah. 30 casho ee ugu horaysa dugsiga waxa ardayga loo tix geliyaa tii sanadkii hore waxlagu siin jirey. 30 casho kadib codsashada cusub baa loo tix geliyaa. Hadii waalidku diidan yahay go'aanka cunta siinta, waxa jira hab doodiisa lagu xalliyo. Talaabooyinkaasi waxay ku qoran yihiin arjiga codsiga.



### Nidaamka Cuntada Fudud iyo Sharaabka



Iyadoo laga jawaabayo welwelka laga qabo buurnaanta xun ee ilmayowga, iyo cuduro kaloo la xiriira cuntada, Guddiga Dugsiyada Boston waxay go´aamiyeen nidaam ku saabsan cuntooyinka fudud iyo iyo cabitaanada dugsiyada. Nidaamkani wuxu koobayaa dhamaan (a la carte) waxyaabaha lagu gado maqaaxiyaha dugsiyada, dukaanada, meelaha kale ee dugsiyada ka tirsan ay ku jiraan makiinada cuntada laga iibsado.

Guud ahaan, waxa kaliya oo laga helayaa meelahaas cuntooyinka iyo sharaabka baruurta iyo sonkortu ku yar yihiin. Waxyaaba sida keega iyo biskitka iyo macmacaanka waa lagu yaraynayaa. Dugsiyada ma gadayaan cabitaanka fudud, casiirka, ee aan nafaqada lahayn iyo kuwa isboortiga loogutala galay.

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay ku boorinayaan waalidka inay dib u fiirshaan talooyinka cuntada caafimaadka leh ee dugsiyada ilmahooda.

**Halkan waa sabab kaloo fiican In la buuxiyo arjiga:** Ka qaybgalka dheeraadka ah ee barnaamijka cuntada jaban ama bilaashka ah waxay Magaalada Boston u sharciyaysaa Inay lacag dheeraad ah helaan si ay u sii hagaajiyaan kombiyuutarada dugsiyada iyo maktabadaha!

**Maxa jira haddii ilmuhu cuntada ilaawo?** Nidaamka DDB wuxu dhigayaa «Inaan ilmana gaajoon». Cuntooyin kale ayaa u diyaar ah ilmaha lacagta buuxda bixiya iyagaan waxba laga qaadin iyo kuwa xakamaynta gaarka ku jiraba, sida kuwa cunta ku jirada, ku cadanyooda, ama diintu u diido. Talagal ayaa dugsiga looga sameeyaa kuwaas, haday dalbadaan. Fadlan wac Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada sidaad u codsatid adeegan.

Noocyada qadada iyo quraacda dugsiyada waxa lagu faafiyaa Webka DDB. www.bostonpublicschools.org ku dhufo «Schools», kadibna «School Meals».

**Waxbarashada Nafaqada** waa qayb muhim ah xaga adeegyadayada cuntada. Macalimiinta nafaqayntu waxay heer walba ee ardayda baraan xagadhaqamada cunto caafimaad qabta. Waxay kalee u fidiyaan seminaaro maamulayaasha, macalimiinta, waalidka, iyo shaqaalaha adeega cuntada.

### Wixi warar dheeraad ah xagga Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada

- Adeegyada Nafaqada iyo Cuntada 617-635-9144

# Dugsiyada Dadweynaha Boston
# Heshiiska Waalidka & Ardayga
# 2009–2010

# WAA MUHIM!

**Fadlan si tartiiba u akhri bogagga 34–36 ee soo socda. ARJIYADA XOG SIIDAYNTA iyo arjiyada kale ee bogaggan ku qorani waa XAANSHIYO SHARCIYA (LEGAL DOCUMENTS).**

**Waalidka iyo ardaydu waa inay qayb kasta saxeexaan.**

**ARDAYDA DUGSIYADA SARE: Hadaadan rabin in magacaaga loo gudbiyo militariga iyo/ama kuwa wax ka qorta kuliyadaha, waa inaad saxdaa calaamada kor kaga taala boga 36. Loogama baahnaa in waalidku qaybtan saxeexo.**

**Tartiib uga saar warqadan buuga kuna soo celi dugsi ilaa iyo JIMCAHA, SEBTEMBAR 25, 2009.**

**Mahadsanidin!**

# Dugsiyada Dadweynaha Boston Heshiiska Waalidka & Ardayga

Fadlan si fiican u akhri sadexda bogagga 34–36. Buuxi wararka loo baahan yahay oo idil. Saxeex meesha la rabo ee meelaha hadhaysan ee bogagga idil, si tartiibana bogagga buuga uga bixi. Fadlan ku soo celi Heshiiskan dugsiga inta ka horaysa ama SEBTEMBAR 25, 2009. Saxeexaaga qayb kastaa wuxu cadaynayaa inaad qaybta idil aqbashay. Hadaadan meel gaar ah aqbalsanayn ee Heshiiskan, fadlan ka tirtir. Hadaad wax su aalo ah qabto ama u baahan tahay fahamka Heshiiska, wac maamulaha ama madaxa dugsiga.

**Magaca Ardayga (FADLAN DAABAC)** ____________________

**Lambarka Ardayga ee DDB (hadii la ogyahay)** _____ _____ _____ _____ _____ _____

**Magaca Waalidka (FADLAN DAABAC)** ____________________

**Dugsiga**____________________**Fasalka**__________**Qola Fasaleeddka**__________

1. Waxan helnay nuqulka Buugga Siyaasadda Dugsiga Dadweynaha Boston ee Waalidka & Ardayda iyo Sharci-Dugsiyeedka dugsiga ilmahaygu dhigto.
2. Waxannu ognahay in Buugga Siyaasadda ay ku jiraan warar muhim ah kuna saabsan Siyaasadda Gudbinta, ka Maqnaanshaha Dugsiyada, Xeerka Anshaxa, Siyaasadda Isticmaalka Internet-ka ee ardayga, Qawaaniinta Takoorka, rikoorrada ardayda, daryeelka iyo soo celinta buugagta dusiga iyo maktabadaha, iyo sharciyada iyo nidaamyada kale.
3. Waxannu fahamnay in Sharci-Dugsiyeeeka ayansixiyeen Golaha Rugta Dugsiyada, ardayda jebisana ay waayi karaan maamuusyada qaarkood
4. Waxannu oggol nahay inaan la shaqayno shaqaalaha dugsiga si aan u xaqiijinno in ilmahaygu dugsiga tago maalin walba (markuu cudur daarka haysto maahane) iyo inuu dhamays tiro shaqada guriga loogu diro.
5. Waan akhrinay Xeerka Anshaxa iyo Sharciga Dugsiyada sida kooban ugu qoran bogagga 39 -41 ee Hagahan. Waanu ka wada hadalnay Xeerka Anshaxa iyo Sharci-Dugsiyeedka. Waa oggol nahay inaan shaqaalaha dugsiga la shaqayno si aan u xaqiijinno in ilmahaygu adeeco sharciyada dugsiga.

**Saxeexa Waalidka** ____________________ **Tariikhda** __________

**Saxeexa Ardayga** ____________________ **Tariikhda** __________

# Bayaanka Degenaanshaha Boston

Anigoo ah waalidka ama koriyaha sharciga ee ardayga kor ku xusan, waxan cadaynayaa in ardaygu sharciyan degen yahay magaalada Boston. Waxan ogolahay inaan Dugsiyada Dadweynaha Boston soo ogeysiiyo wixi isbedel ah ee degenaanshaha\ ku yimaada sanad dugsiyeedka gudihiisa.

**Saxeexa Waalidka** ____________________ **Taariikhda** __________

ARDAYGA DA:DIISU TAHAY 18 AMA KA WEYN: Waxan cadaynayaa inaan sharciyan degenahay magaalada Boston. Waxan ogolahay inaan Dugsiyada Dadweynaha Boston soo ogeysiiyo wixi isbedel ah ee degenaanshahayga ku yimaada sanad dugsiyeedka gudihiisa.

**Saxeexa Ardayga (18 jir ah ama ka weyn)** ____________________ **Tariikhda** __________

## Muuqaalada Warbaahinta

Waxan fasax u siiyey Dugsiyada Dadweynaha Boston inay karaan duubid, filim , sawir, waraysi, iyo/ama inuu madal soo joojiyo, daabaco, ama fidiyo magaca, sawirka, hadalka ama qoraalka inankayga/inantayda sanad dugsiyeedka 2009–2010, ama ha sameeyeen shaqaalaha dugsigu, ardaydu, ama cid kale oo dugsiga ka baxsani sida hay, adaha warbaahinta. Waxan ogolahay, in Dugsiyada Dadweynaha Boston isticmaali karaan, ama dad kale u ogolaadaan Inay isticmaalaan hawlahaas bilaa xad ama lacag bixin. Waxan ka saamaxay dugsiga Ilmahayga iyo shaqaalaha DDB wixi qaansheeg ah si kastaba ha noqdee ee ku saabsan inankayga/inantayda ka soo-bixitaanka ama ka qaybgalka hawlahaas.

**Saxeexa Waalidka** ______________________________ **Taariikhda** ________________

**Saxeexa ardayga (18 jir ah ama ka weyn)** ____________________ **Tariikhda** ________________

## Nidaamka Isticmaalka Habboon ee Shebekadaha, Sida «Internet»-ka

Waa nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Boston in ardayda iyo shaqaalaha dugsiyadu isticmaalaan qalabka teknolojiga oo dhan si ay u isticmaalaan si xilkasnimo, sharci iyo anshax hufan ah shebekadaha eletroonka («kombiyuutarrada»), ay ka mid yihiin «Internetka» iyo «e-mail»-ka. Haddii taasi biiqato natiijadu waa in qofka isticmaalayaa waayo maamuuska isticmaalka shebekadaha, lalana tiigsado Xeerka Anshaxa, ama lagu dacweeyo qaanuunka fedraaliga ama kan gobolka.

Waan akhriyey waana fahmey Nidaamka Isticmaalka Habboon ee «Internet»-ka Dugsiyada Dadweynaha Boston ee ku yaal bogga 44 -aad ee Buuggan. Waxan fahamay isticmaalka «Internetka»-ka iyo «e-mail»-ka ee dugsigu yahay maamuus ee wax xaq loo leeyahay ahayn. Waxana khaas ahaan loogu talagalay ujedooyinka waxbarashada. Waxan kaloo fahamay in inkastoo DDB tallaabooyin qaadayaan lagu xakamaynayo helitaanka maadooyinka foosha xun, hase ahaatee maadaama hab kastoo shaandha ahi ahayn mid ceeb ka saliin ah, waxa dhici karta in ilmahaygu heli karo tusmo aan fiicnayn. Waxan ogolahay inaanan DDB dusha ka saarayn wixi maadooyin fool xumo ah ee ilmahaygu «internetka» iskii uga helo.

Saxeexaygan hoos ku xusan, waxan tusayaa inaan fiiriyey ilmahaayga Nidaamka Isticmaalka Haboon ee Dugsiyada Dadaweynaha Boston waxana u fasaxayaa ilmahaygu inuu adeegsan karo «Internetka» isticmaali karona «e-mailka» dugsiga waxbarasho awgeed. Waxan faham sanahay haddanan warqaddan saxeexin, inaan ilmahayga loo ogolaanayn isticmaalka «Internetka» iyo «e-mailka» dugsiga.

**Saxeexa Waalidka** ______________________________ **Taariikhda:** ________________

ARDAYDU WAA INAY SAXEEXAAN WEEDHA HOOSE EE ISTICMAALKA «INTERNET»-KA:
Waan fahmay waana oggolaaday inaan u hogaansamo dhaqamada ku qoran Siyaasadda Isticmalka Habboon ee Dugsiyada Ddadweynaha Boston ee ku yaal bogga 44 ee Buugga Siyaasadda Waalidka & Ardayda. Waan fahmay in ku xad gudubka siyasaddan ay natiijadu noqon karto waayida maamuuska Internet-ka iyo e-mail-ka, iyo/ama tallaabo anshaxeed iyo/ama ashkato la xiriirta sharciyada fedraaliga ama gobolka.

Waan fahmay hadaanan saxeexin heshiiskan, layma ogolaanayo isticmaalka Inbternet-ka iyo e-mail-ka dugsiga.

**Saxeexa Ardayga (5 jir ah ama ka weyn):** ____________________ **Taariikhda:** ________________

## Siidaynta Xogta Ardayga

Dugsiyada Dadweynaha Boston waa sii daynayaan xogtan soo socota iyadaan waalidku fasaxin: magaca ardayga, xaafada guriga, fasalka iyo derejada, maalmaha dugsiga uu tegey, kaqaybgalka hawlaha rasmiga ah, xubinnimada kooxaha isboortiga, shahaadadaha, sharifaada iyo abaalgudyada, iyo qorshaha dugsiga sare kadib. Hadaad rabto inaan xogtan la sii dayn adigaan fasaxin, sax ku dhig sanduuqa hoose oo saxeex:

☐ HA SII DAYNIN xogta kor ku xusan anigaan ogolaan.

**Saxeexa Waalidka** ______________________________ **Taariikhda:** ________________

**Saxeexa Ardayga (18 jir ah ama ka weyn)** ____________________ **Taariikhda:** ________________

## Ardayda Dugsiga Sare: U Siidaynta Xogta Qorteyaalka Ciidamada iyo Tacliinta Sare

Sharciga fedraaliga ee "No Child Left Behind» wuxu dhigayaa, inay degmooyinka dugsiyada dadweynuhu u sii daayaan magacyada, cinwaanada, iyo telefannada ardayda dugsiyada sare kuwa u soo jiida dadka milateriga Maraykanka iyo tacliinta sare. Ardayga ama waalidku xaq buu u leeyahayinuu qoraal ku codsado inaan BIXIN xogtaas. Hadaadan rabin in xogtan la sii daayo, fadlan sax ku dhig labada sanduuq ee hoose oo saxeex

- ☐ HA U SII DAYN xogta KUWA MILATERIGA WAX U QORA.
- ☐ HA U SII DAYN xogta KUWA TACLIINTA SARE WAX U QORA.

**Saxeexa Ardayga AMA Waalidka** ________________________________ **Tariikhda** ______________________

## War Caafimaad ee Muhim ah

Waan akhriyey bogagga 28-29 ee Buuggan waana fahmay habka dugsigu raacayo hadii ilmahaygu xanaano caafimaad u baahdo iyo/am daawo ku qaato dugsiga gudihiisa. Waan fahmay inay aad muhim u tahay in dugsigu awood u yeesho la xiriirkayga hadii gurmad caafimaad oo degdeg ahi jiro.

Telefanka degdegga ah: (1) ________________________________ (2) ________________________________

Ilmahagu wuxu qabaa mushkiladaha caafimaad ee soo socda iyo/ama ku caaroodka ay tahay in dugsigu ogaado:

Mushkiladaha caafimaad: ________________________________________________

________________________________________________

Caaroodka (allergies): ________________________________________________

________________________________________________

Xog dheeraad ah ee xagga caafimaadka ilmahayga eay tahay in dugsigu ogaado: ________________________

________________________________________________

________________________________________________

________________________________________________

________________________________________________

Waxan u ansixiyey u sheegida wararka kor ku xusan shaqaalaha kale ee dugsiga si lausugu dubba rido adeegyada ilmahayga.

**Saxeexa Waalidka:** ________________________________________ **Taariikhda:** ______________________

# Adeegyada Ardayda:

## Gaadiidka

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin gaadiid geeya oo ka soo cesha dugsiga hadday ku nool yihiin meel u jirta:

- 1 mayl dugsiga xannaanada ama dugsiga hoose
- 1.5 mayl dugsiga dhexe iyo dugsiga K-8
- 2 mayl dugsiga sare

Markaannu kuu soo sheegno meesha ilmahaaga lagu qoray, waxannu isla markaas kuu soo sheegaynaa inuu u qalmo gaadiid iyo in kale. Bisha Agost aakhirkeeda, haddii ilmuhu u qalmo gaadiid, waxannu kuu soo sheegaynaa meesha iyo waqtiga laga qaadi doono, iyo lambarka baska.

Ardayda xannanada iyo dugsiyada hoose ee raaca basaska jaallada ah waxa laga qaadaa laguna dejiyaa kela goys gurigooda u dhow. Ardayda dugsiga dhexe amd sare ee u qalma waxa lagu qaadi karaa baska dugsiga ee jaallada ah, Gaadiidka MBTA-ga, ama labadoo isku dhafan. Kaararka lacag la'aanta ee MBTA-ga yaa la siiyaa ardayda u qalanta bishiiba oo dugsiga ay ku jiraan laga siiyaa.

Fadlan ogow, dareewalladu ardayda waxay ku dejiyaan, lagu daro kuwa xannaanada, meesha loogu tala galay xataa haddaan waalidkii meeshaas joogin.

### Wadciyada Gaadiidka Gaarka ah

Waxan u fidinaa adeega gaadiidka ardaydaardayda naafada ah sida ku xusan Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ama Qorshaha Qaybta 504. Ardada qaarkood waxa la siiyaa gaadiid albaab-ilaa-albaab ah. Arday kale oonaafa ah waxa la dhigaa lagana qaadaa koone gurigooda u dhow, ama MBTA baa la saaraa ama waaba lugeeyaan.

Ardayda qaarkood waxa dhici karta in xaaladooda jidhka am caafimaad awgiis ayan dugsiga ama meelaha baska laga raaco u lugayn karin. Mararkaas dhifka ah, DDB waxay bixin karaan adeega cafimaadka gaadiidka baska ee albaab-ilaab ilmahaas ka qaada. Si loogu tix geliyo ilmaha adeegaas waa in khakhtarkiisu soo buuxiyaa Qorshaha Caafimaadka Iskaashiga Gaarka ah (Individualized Collaborative Health Plan). Waxad ka heli kartaa arjiga kaalisada dugsiga. Fadlan ku soo celi arjiga kaalisada iyadaana go'aamin karta in ilmahaaga xaaladiisu arrintaas u qalanto sida ku cad talabixinta Agaasimaha Caafimadka DDB. Hadii ilmahaagu sida talooyinkaasi dhigayaan kaalisada dugsiga ayaa kula soo xiriiri doonta.

### Adeegyada Gaadiidka Khaaska ah

Reeraha qaarkood ayaa ilmahooda u qabta gaadiid khaas ah ama qof. Nabadgelyada awgeed, dugsigu ilmaha gacanta kama saarayo qof kale haduusan ka haysan waalidka ama ilaaliyaha fasax qoraal ah. Haddaad doontid inaad u qabsato ilmahaaga gaadiid khaas ah, xaqiiji inaad saxeexdo arji aad kaga tanaasulayso gaadiidka dugsiga. Waxad arjiga ka heli kartaa dugsiga ama website-ka DDB. www.bostonpublicschools.org/node/190. Wuxu ku yaal Wareegtada Agaasimaha Guud SAF-8. Arjigani wuxu DDB ka furanayaa wax alla hadii mas'uuliyadda iyo dhibaatada ka imaan karta adeega khaaska ah.

### Akhlaaqda Baska Gudihiisa

Waxannu u haysanna baska gudihiisa «fasalka dugsiga oo la fidiyey». Taas macnaheedu waa isku mid heerka sare ee akhlaaqda baska (ama MBTA-ga marka lagu socdo ama laga yimaado dugsiga) iyo sida marka dugsiga la joogo. Matalan, ardaydu waa inayan ka kicin kuraasta ay ku fadhiyaan; waa inayan daaqadaha madaxa ka ridin; la dagaalamain ama riixin ardayda kale, wax tuurtuurin ama isku deyin inay dareewalka jeediyaan.

Ardayda jebisa Sharci-dugsiyeedka ama Xeerka Anshaxa markay baska saaran yihiin waa la ciqaabi karaa, ama waxa loo gudbin karaa Barnaaamijka Nabadgelyada Baska ee Xarunta Latalinta & Kahortaga DDB, iyo/ama waxa loo diidi karaa gaadiidka. Waxa laga yaabaa in basaska dugsiyada qaarkood kamira fidiyoo leeyihiin. Waxa sawirrada fidiyooga loo isticmaali karaa markhaati xagga ciqaabta ardayda ku xad gudubta akhlaaqda basaska. (Fiiri boga 42 , ee «U Diidmada Gaadiidka»).

### Gaadiidka Ka Duwan

Waalidku waxay dalbi karaan joogsi bas ee u dhow meesha ilmahoodu tago dugsiga kahor ama kadib ee ah meel xanaano maalmeed, lakin shuruudaa ku xiran:

1. Meesha baska la dalbaday istaagayo waa inay noqotaa meelaha caadiga ee basaska dugsigu maraan.
2. Waana in kursi madhan loo helaa.

Waalidku ha ogaado inaan DDB arrintan ballan qaadi karin in loo helo. Codsiyada joogsiga baska ee ka duwan waxa looga shaqeeyaa siday u soo kala horeeyaan. Fadlan ogow codsiyada la qabto bisha Agost aakhirkeeda iyo Sebtembar waxay qaadan karaa dhawr usbuuc si loo farsameeyo. Markaad codsigaaga mar hore sii samaysaba, fursada ogolaanshuhu way sii wacnaanaysaa.

Waxad si toos ah codsigaaga u siin kartaa Waaxda Gaadiidka ama maamulaha dugsiga Ilmahaaga oo u gudbinaya Waaxda Gaadiidka. Waqtiga kulaylaha, fadlan u soo gudbi codsigaaga:

Xafiiska Gaadiidka
Dugsiyada Dadweynaha Boston
26 Court Street, 4th floor
Boston, MA 02108

**Wixi warar dheeraad ah iyo arjiga codsiga:**

- Wac maamulaha dugsiga
- Booqo: www.bostonpublicschools.org/transportation
- Wac Waaxda Gaadiidka, 617-635-9520.

# Su'aalo & Jawaabaha Gaadiidka

**Hadaan guuro waqtiga sanad dugsiyeedka, sidee u bedelaa joogsiga baska ilmahayga?**

Marka hore tag Xarumada Waxtarmada Waalidka (FRC) midkood oo buuxi arjiga «bedelka cinwaanka». Waaxda Gaadiidka DDB ma bedeli karto cinwaanka Ilmahaaga. Kadib markaad Xarunta FRC aa ku bedesho cinwaankaaga, ayaa Waaxda Gaadiidku ilmahaaga ku qoraysaa joogsiga bas cusub haduu u qalmo/haday u qalanto gaadiid. Hadaad ka guurto aagaaga, ilmahaagu weli waa ku jiri karaa isla dugsiga – laakin uma qalmayo/qalmayso adeegyada gaadiidka.

**Ilmahayga waxa loo bedelay dugsi kale. Sidee u bedelaa joogsiga baska?**

DDB ayaa isla markiiba ku qoraysa joogsi bas cusub hadaii ilmuhu u qalamo gaadiid.

**Hadii basku daaho ilmahayga ma waxaa la qorayaa mid daahay?**

Maya. Ardayda looma qoro «daahid» hadii baska dugsiga ka daaho.

**Basasku ma leeyihiin raadiye ama fooniye dareewalka lagala hadli karo ama lagu wacan karo taageero?**

Haa. Basaska idil waxay leeyihiin phooniyaha labada docood. Waxay kalee wataan qalabka Qaabka Barkutaasha Caalamka (Global Positioning System - GPS) ee ku caawiya Waaxda Gaadiidka DDB meesha basasku marayaan hadii gurmad degdeg ahi dhaco.

**Ilmahayga waxa lagu qoray bas, waxanse rabaa inaan dugsiga gaari ku geeyo maalin kasta. Ma inaan qof ogeysiiyaa?**

Fadlan Waaxda Gaadiidka qoraal ku ogeysii. Waxad waraaqda u dhiibi kartaa maamulaha ama boostaad u diri kartaa:

Waaxda Gaadiika
Dugsiyada Dadweynaha Boston
26 Court Street
Boston, MA 02108

Hadaad isbedesho aad rabto in ilmahaagu bas raaco, sida caadiga ah waan bilaabi karnaa adeega ilaa hal usbuuc.

**Yaan wacaa hadii ilmahaygu dhibaato ka qabo dareewalka ama arday kaloo baska la socda?**

Weligaa maamulaha ugu horayn u sheeg. Hadii maamuluhu mushkiladda xal u waayo, la xiriir Xafiiska Gaadiidka, 617-635-9520.

**Haddaan u haysto in joogsiga baska ilmahaygu nabad la'yahay ama uu aad uga fog yahay gurigayga. Maxaan samayn karaa?**

Marka hore, la xiriir dugsiga Ilmahaaga sidaad u hubisid in cinwaanka Ilmahaaga u yaal dugsigu sax yahay. Marka la samaynayo joogsi bas, Waaxda Gaadiidku way ka fekertaa nabadgelyda ilmaha iyo farsamaynta dariiqyada ugu fiican ee basasku marayaan ee suurtogal ah. Inta badan, joogsiyada basasku waxay u jiraan guriga ilmaha ilaa ¼ mayl. Hadday kula nqoto in DDB qalad sameeyeen xagga joogsiga Ilmahaaga, la xiriir Waaxda Gaadiidka. Iyagaa markaas dib u fiirinya joogsiga lagana yaabee inay wax ka bedelaan. Laakin fadlan ogow in arday badan aan bas fuulini dugsiga u socdaan ilaa hal mayl.

**Basaska dugsiydu ma leeyihiin ilaaliyeyaal?**

Maadaama miisaaniyadu kooban tahay, basaska badankoodu ma laha ilaaliyeyaal. Hase ahaatee, maamuleyaashu waa codsan karaan in laga bixiyo lacagta alfeyaal duruufo gaar awgood.

**Waa maxay mas'uuliyadaha dareewaalka baska markuu caruurta wado?**

Dareewalku wuxu mas'uul ka yahay inuu ardayda dugsiga geeyo uagana soo cesho iyagoo nabad ah oon daahin. Mas'uuliyadaha waxa ka mid a: baabuur wadida, kormeerka fuulida iyo ka degida, kormeerka ardayda intay la socdaan baskau sheegida maamulaha wixi la xiriira nabadda iyo akhlaaqda; iyo (haday haboon tahay) hubinta xidhashada suumanka, qalabka ilmaha celiya, ama xakamaynta kuraasta naafada.

**Ma loo ogol yahay in dareewalku caruurta yaryar kaga tago joogsiga baska hadii qof weyni uusan joogin oo la kulmin cunugga?**

Haa. Waalidku iyagaa ka mas'uul ah inay hubiyaan in qof ilmaha la kulmo maalin kasta. Hadii arday muujiyo baqdin ama diido in lagaga tago meesha joogsiga, dareewalku wadaduu qaadi karaa oo ilmuhuu ku hayn karaa baska ilaa qof weyn lala xiriiro. Waalidku waa inay hubiyaan in ilmahoodu xaafada joogsiga baska yaqaano, oo garto wadada ugu nabad wacan ee tegitaanka guriga hadii cidi la kulmi weydo.

**Waa meeqa ardayda loo ogol yahay baska inay raacaan?**

Taasi waxay ku xiran tahay inta basku le'eg yahay. Basaska waaweyni waxay qaaddi karaan ilaa 71 ardayda dugsiyada hoose. Lama oggola qof taagan.

**Kuraasta basasku ma leeyihiin suuman?**

Basaskka waaweyni uma baahna suumanka kuraasta. Basaska DDB oo idili waxay u hogaansan yihiin sharciyada fedraaliga iyo kuwa goboleed xagga cabirrada nabadgelyada.

**Wixi warar dheeraad ah kala xiriir Adeegyada Gaadiidka**

- Waaxda Gaadiidka 617-635-9520
- www.bostonpublicschools.org/transportation

# Nidaamyada DDB:
## Nabadgelyada Ardayga iyo Gurmadka Degdegga ah

Wax nooga muhimsani ma jiro in ardayadu nabad gasho. Halkan wax ku qoran siyaasadahayaga qaarkood si loo badbaadiyo ilmihiina.

### Ilmaha luma ama la waayo

Waxa aad u dhif ah, in ilmo ka yimid gurigoodii dugsiga imaan waayo, ama intuu dugsiga ka tago gurigoodii laga waayo. Haddii ilmahaagu lumo ama la waayo, marka hore dugsiga soo wac. Hadday goor dambe tahay oo telefanka lagaa qaban waayo, waxad wacdaa Adeegyada Nabadgelyada Dugsiyada ee 617-635-8000. Nabadgelyada Dugsiyadu waxay la shaqeeyaan Adeegyada Gaadiidka Dugsiyada iyo Boliiska Boston, iyagaana ku war gelinaya ilaa ilmahaagii laga helo.

### Gurmadka caafimaadka degdega ah

Eeg bogga 29 ee nidaamka DDB kuna saabsan gurmadka caafimaadka degdegga ee ka dhaca dugsiga ama hawlaha dugsiga la xiriira.

### U Dhiibka ilmaha qof aan waalidkood ahayn

Dugsiyadu ma oggola inay ilmaha ku wareejiyaan qof aan ahayn waalidkooda/ilaaliyahooda oo ka kaxeeya dugsiga. Haddaad doonaysid in qof qaraaba ah ama saaxiib ama qof kale wax taraa ilmaha dugsiga ka soo kaxeeyo, waa inaad bixisaa fasax qoraal ah ama telefan soo dirtaa. Telefanka maamulahaa hubin kara inuu waalidkii ama ilaaliyihii yahay. Qofkuna waa inuu dugsiga aqoonsi tusaa intaan ilmaha lagu wareejin.

Hadaad doontid gaadiid khaas ah inuu ilmaha geeyo oo ka soo qaado dugsiga, waa inaad buuxisaa oo saxeexdaa arjiga, «Fasaxa Waalidka Inuu ku Xawilo Ardayda Dad kale oo Idman». Kaas waxad ka heli kartaa xafiiska dugsiga ama website-ka DDB. DDB kama mas'uul kama aha shilalka ama dhaawacyada ardayda isticmaalaa gaadiidka DDB.

### Hadii ilmaha dugsiga laga qaadi waayo

Maamulaha dugsigu waa og yahay ilmaha basaska raaca, kuwa lugeeya, iyo kuwaa joogto ahaan waalidkood ama dad kale soo doonaan.

Maamulaha dugsiga ayaa ka mas'uul ah hubinta in arday oo idil guryahoodii nabad tagaan. Haddii ilmo laga qaadi waayo dugsiga, maamuluhu wuxu isku dayaa inuu la xidhiidho waalidkii ama dadkii kale ee xiriir degdeg ah ugu qornaa. Haddii maamuluhu heli kari waayo qof qoyska ah ama qof kaloo mas'uul ah ilaa 5 Galabnimo, DDB waxay ilmaha geynayaan Dugsiga Lyon K-8 ee Brighton ku yaal, oo goor dambe habeenkii furan. Saacadda 5 Galab. Kadib, shaqaalaha DDB waxay la xiriiri karaan Waaxda Adeegyada Dhaqanka ee Massachusetts (DSS) oo ilmaha gacanta ku qaban kara.

Haddii ilmaha marar badan laga qaadi waayo dugsiga, wuxu maamuluhu oogi karaa dacwada galka 51A (fiiri «Dayaca iyo Faraxumaynta Ilmaha» ee bogan ku yaal).

### Bedelaada Nabadgelyo

Marmar waa lagama maarmaan in meelaynta ardayga la bedelo si loo hubiyo inuu ardaygaas helo jawi waxbarasho oo nabad iyo xasilooni leh. Sharciga Fedraaliga ee «No Child Left Behind» (NCLB) wuxu dhigayaa:

- Ardayda dhibaato ka soo gaadho weerar si foolxun wax u yeela jidh ahaan, dareen ahaan iyo/ama weerar koronto lagu qabtay, ama dhibaaneyaalka denbifal lagu sameeyey iyagoo jooga hanti dugsigu leeyahay ama bas dugsi ku jooga, ama hawl qabadyo dugsigu maamulayo, waxay u qalmaan in la siiyo bedelaad nabadgelyo ee dugsi kale.
- Ardayda ku jira dugsi ay ku magacawday Waaxda Waxbarashada MassachusettsDugsiyada Hoose & Sare «nabad laawe ama mid leh khatar joogto ah» waa looga bedelan karaa dugsi nabdoon (Fiiri boga 60). Waqtigii Hagahan la daabacay ma jirin dugsi magacaas legu tilmaamay.

Si loo dalbo bedelaad nebedgelyo, waa in waalidku/koriyuhu buuxiyaa oo saxeexaa «Arjiga Codsiga Bedelaad Nebadgelyo» oo u gudbiyaa maamulaha, madaxa dugsiga, ama agaasimaha barnaamijka si dibufiirin iyo talabaixin loogu sameeyo. Wixi xog dheeraad ah kala xiriir maamulaha ama madaxa dugsiga.

### Dayaca iyo Faraxumaynta Ilmaha

Hadii shaqaalaha dugsigu tuhmo in ilmaha la dilo ama dayac haysto, waxa Sharcigu dhigayaa (M.G.L. Qod.119 Qaybta 51A) ee nidaamka DDB dhigayaa la ogeysiiyo Waaxda Caruurta & Qoysaska (DCF). Warbixinada idili waa qarsoodi adag. DSS waxay 24 saac laga helaa khaadka: 1800-792-5200.

Wuxu kalee nidaamka DDB bixiyaa hanaanka sida dugsiyadu uga jawaabi lahaayeen warbixinada ilmaha la dayaco ama la fara xumeeyo, iyadoo lala kaashanayo baadhitaanka DSS.

Nidaamka DDB ee Dayaca iyo Faraxumaynta Ilmaha waxa laga helaa website-ka DDB.

▶ **Akhri Wareegtooyinka Agaasimaha Guud Sidaad U Baratid Wax Dheeraad Ah**

www.bostonpublicschools.org/node/190

SAF-8 Fasax Waalidu Usii Daynayan Ardayda Mas'uuliinta Ansaxan

SSS-17 Xumaynta iyo Dayaca Ilmaha

# Nidaamyada DDB:

## Nabadgelyada Ardayga iyo Gurmadka Degdegga ah (waa socotaa)

### Gurmadka Degdega ah ee Dugsiga Dhan ama Bulshada

Dugsiyada Dadweynaha Boston mid walba wuxu leeyahay qorshe farsamo xaga shaqaaqo ama gurmad degdeg ah ee bulshada. Qorshada isudiyaarinta gurmadka degdega ah ee dugsiga waxa lagu habeeyey qaabaka dugsigaas laf ahaan.

Waxa muhim u ah waalidka iyo koriyeyaalka inay dareen ka qabaan jiritaank qorshaha dugsiyada ilmahooda, siiba qorshaha isukeenida waalidka iyo waalidka hadii dugsigu galo xasilin ama laga qaxo.

### Xasilinta Dugsiga

Marmarka qaarkood iyadoo la kaashanayo Waaxda Boliska Boston, waxan dugsiyada weydiinaa inay kordhiyaan heerka dareenkood nabadgelyo hadii laga baqo shaqaaqo xaafada ka dhacda. Talaalabadan tayada leh waxa la dhahaa **Xasilinta** (containment).

Marka sidani dhacdo, micnaheedu waa inaan loo ogolaan dadka booyanaya inay dhismaha soo galaan, ardayda iyo shaqaalaha lama ogola inay baxaan, waxana la xoojiyaa talaabooyinka nabadgelyo ee dhigan. Waxabarida iyo barashadu waa ka soconaysaa qolfasalada iyadaan carqalad la gelin markaanu fulinayno talaabooyinkan xoojinta nabadgelyada. Waxan rabnaa inaan ku qancino qoysaska DDB in daryeelka nabadgelyada ardaydeena iyo shaqaaluhu tixgelin saraysa nagu leeyihiin mar kastaba. Sida darteed waa in qof kastaa waa inuu arrintan la socdaa, waxanuna ka samaynaa tababaradan xasilinta dugsi kasta.

Hadaad wax su'aalo ah qabto xaga hanaanka fulinta arrimahan, fadlan la xiriir maamulaha ama madaxa dugsiga ilmahaaga.

### Hadii arrin degdeg ahi jirto:

Wac **911** ama mid ka mid ah lambaradan DDB:

- Nabadgelyada Dugsiyada 617-635-8000
- Gaadiidka 617-635-9520

## Xogta Degdega ah ee ilmahaaga la Soco oo Cusboonaysii

**Hubi in Dugsiga Ilmahaagu XogtiisA UGU DAMBAYSA Hayo!**

- ☑ **Telefoonada waalidka/ilaaliyaha ee guriga, shaqada, iyo kan gacanta**
- ☑ **Cinwaanka markaas jira**
- ☑ **Qof kale oo gurmadka degdega loo waco oo telefan iyo cinwaan leh (haddii waalidka la waayo)**
- ☑ **Xogta caymiska caafimaadka**

**Wac dusiga isla markiiba hadii isbedel dhaco!**

# Nidaamka DDB:
## Takoor La'aanta iyo Xuquuqda Madaniga

Fursadaha loo siman yahay ee waxbarashada iyo qawaaniinta takoor la'aantu waxay nabad geliyaan xuquuqda ardayda si ay uga qayb galaan hawlaha ku saabsan waxbarashadooda. Qaanuunka Massachusetts wuxu dhigayaa:

> *Qofna lagama celin karo lagamana takoori karo gelitaanka dugsiyada dadweynaha ee magaalo kastaba, ama helitaanka faa'iidooyinka, iyo maamuusyada duruusta tacliimeed ee dugsiyada dadweynaha iyadoo la adeegsanayo jinsiyad, midab, lab iyo dheddignimo, diin, asalka ummadeed, ama dhaqanka kala geddisan.*

Hoos waxa si kooban ugu yaal siyaasadaha ka soo horjeeda takoorka ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Haddii aad nuqul buuxa siyaasadahaas u baahan tahay:

- WAC madaxa ama maamulaha dugsiga; ama
- Wac xafiiska Sinnaanta ee DDB (BPS Office of Equity), Telefoon 617-635-9650; ama
- Booqo barta Web-ka DDB

Waxad kalee la xiriiri kartaa Xafiiskaas Siannaanta (Office of Equity) haddaad tuhunto in ilmahaaga lagu takooray Dugsiyada Dadweynaha Boston gudahooda.

▶ **Akhri Wareegtooyinka Agaasimaha Guud Sidaad U Baratid Wax Dheeraad Ah**

www.bostonpublicschools.org/node/190

Lambarka Wareegtada Agaasimaha Guud wuxu gadaal kaga yaalaa koobida nidaam kasta

▶ **Ardayda iyo shaqaalaha ku xad gudba mid ahaan nidamyadan waxa lala tiigsanayaa sharciga ku haboon ee gaadhsiisan in la eryo (ardayda) ama shaqada laga saaro (shaqaalaha).**

### Nidaamka Takoor-La'aanta iyo U-Dulqaadasho La'aantiisa

Siyaasadani waxay sheegaysaa in DDB ay heegan u yihiin ilaalinta deegaan waxbarasho oo aan lahayn munaafaqnimo iyo jidh-diid, sida takoorka ku dhisan jinsiyad, midab, asalka ummadeed, lab iyo dheddig, dhaqanka geddisan, caqaa'idka diimeed, naafanimada ama da'da; waana meel aan laga oggolayn haba yaraatee wax kastoo haddidaad iyo is-khasab wax yeelaya sharafta dadka kale oo abuuraysa baqdin gelin, hanjabaad, ama jawi waxbarasho oo fool xun. ▶**EQT-04**

### Nidaamka Midab ama Jinsi Takoorka/Hadidaada Ardayda

Nidaamkani wuxu joojinayaa takoorka iyo haddidaada ardayda, ay weheliso ula dhaqanka ardayda si kala duwan, isticmaalka afxumo iyo edebdarro ficileed oo abuuraysa cabsigelin, ama jawi waxbarasho oo fool xun, ama u diidaya arday kqaybgalka haawl kasta ee ku dhisan jinsiyad, midab, ama asalka umadeed ▶ **LGL-05**

### Nidaamka Weerarka Kufsashada

Nidaamkani wuxu sheegayaa inaan kufsasho la oggolayn ha noqoto shaqaalaha, ardayda, ama dad kaleba; ka aar gudashadana lama yeellayo qofkii waxas oo kale soo sheega ama denbi baadhista gacan siiya. Nidaamkani wuxu kalee qeexaysaa sida ardaydu falxumadaas oo kale u soo sheeegaan. ▶**LGL-13**

### Nidaamka Shukaansiga Hadidaada leh ee Ardayda (Ay Ku Jirto Hadidaada Isku-Faca).

Nidaamkani wuxu dhigayaa inaan la ogolayn shukaansi xoog-xoog ah nooc kasta ha noqdee dugsiga dhexdiisa, ama hawlo kale oo dugsigu ku lug leeyahay, ama marka dugsiga lagu socdo ama laga tegayo. Waxa kalee ku jira qeexidda iyo tilmaanta looga jeedo shukaansig xooga ah iyo hanaanka looga dacwoon karo, iyo waxyaabo kale. ▶**EQT-06**

### Nidaamka Kacelinta Ardayda Takoorka Ku Salaysan Balwada Shakhsi

Nidaamkani wuxu ka jawaabayaa dadaalka Waaxda Dugsiyada si loo xaqqijiyo sinaansho iyo lin la badbaadiyo ardayda idil, ay weheliyaan ardayda ah «gay-lesbian», labeebka, nimo-naaga, in lagu sameeyo jidhdil, hadidaad, iyo takoorid. * ▶**LGL-11**

### Nidaamka Takoor La'aanta Ardayda Naafada ah

Nidaamkani wuxu diidayaa takoorka dadka naafada ah ee shaqo u qalma, sida sharci darrada loogu diido inay ka qayb galaan barnaamijyada iyo hawlaha dugsiga cashaan waa naafo, taasoo la socota qanuunka Dibudejinta Section 504 of Rehabilitation Act 1973, sida lagu beddelay «Americans with Disabilities Act (ADA)» ee 1990, iyo Sharciga Massachusetts ee Takoor-La'aanta (MGL 151B). Ardayda naafada ah waa inaan loo diidin, ama laga reebin manaafacaadka, ama loo diidin gelitaanka barnaamij kasta ama hawlo ku salaysan oo keliya naafonimada.

### Nidaamka Soo-Xerogelinta Khasabka ah «Hazing»

Nidaamkani wuxu ka hadlayaa denbiga soo xero-gelinta khasabka ah («hazing»), kaa soo ah wixi fal ah ee ku saabsan sida loogu boorriyo looguna muquuniyo arday inuu galo urur ardayeed oo si kas ah khatar u geliya cafimaadka maskaxda ama jighka ardayga ama qof kaleba. Waxay ka hadlaysaa mas'uuliyadda sharciga ku dhisan ee qofku ugu soo sheegi karo hay'adaha nabad gelyada hadduu ogaado qof denbigaas lagu sameeyey ama uu joogay meel lagu hayey. * ▶**LGL-01**

### Hanaanka Cabashooyinka Ardayga ee Takoorka

Nidaamkani wuxu dhigayaa sida looga ashkatoodu waxyaaba la tirsado ee saameeya takoorka ku salaysan jinsiyad, midab, qolo asliyeed, lab/dhedig, diin, da', dhaqan kaduwan, iyo naafonimo. * ▶**EQT-03**

### Wixi Warar Dheeraad ah ee Arrimha Takoorka la xiriir

▶ Sarkaalka Sare ee Sinaanta (Office of Equity) 617-635-9650

# Nidaamka DDB:
## Xeerka Anshaxa

Ardaydu waxay u baahan yihiin nabadgelyo iyo jawi haboon oy wax ku bartaan. Si taas loo hubiyo, dugsiyadeena oo dhammi waxay ku dhaqmaan **Xeerka Anshaxa** ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Dugsi kasta, macallimiinta iyo walidku waxay sii kobciyaan lana socodaan **Sharci-Dugsiyeedka** u dhigan. Waxa hoos lagu soo gaabiyey waxyaabaha ku jira Xeerka Anshaxa. Nuqulka Sharci-Dugsiyeedka dugsiga ilmahaagu dhigto waa in lagu lifaaqaa buugyarahan. Aad bay muhim u yihiin.

### Shaci Dugsiyeedka

Dugsi kastaa wuxu iska leeyahay sharciyo u dhigan – loona yaqaan Sharci-Dugsiyeedka – ardadiisana laga rabo inay la socdaan. Dugsiyada dhexe mid ka mid ah, matalan, waxa laga rabaa ardayda inay fasalkooda iyagoo aamusan saf ku galaan xisadda labaad; dugsi kale, waxa ardayda loo oggolaan karaa inay iygoo kooxkoox ah fasalka galaan.

Haddii arday sharciyada dugsiga jebiyo waa la ciqaabi karaa. Madaxa dugsigu wuxu samayn karaa inuu ardayga ka saxeexo «heshiis' uu dabeecaddiisa ku beddelayo, ama wuxu ku ganaaxi karaa inuu dugsiga maalintaas sii joogo.

Sharci-dugsiyeedkka waxa dejiya guddi ka mid ah maamulka, macallimiinta, iyo waalidka ku shuqul leh dugsi kasta waxana dib loo eegaa gu' kasta Golaha Rugta Dugsiga. Dugsiyaga dhexe iyo kuwa sare ardayda ku jirtaa waa ka mid guddigaas. Sharci-dugsiyeedka waxa lagu dhejiyaa fasal kasta waxa loo diraana waalidka bisha Sebtembar.

### Xeerka Anshaxa DDB

Sharci-dugsiyeedka ka sokow dugsi kastaa waa inuu la socdaa Xeerka Anshaxa ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Xeerku wuxu taxayaa sharciyo ardayda oo dhammi la rabo inay u hoggaansamaan.

Ardayna ma keeni karo dugsiga hub, matalan, mana ku iibin karo daroogo. Ardaygii jebiya Xeerka Anshaxa dugsiga waa laga joojinayaa ama waa laga eryeyaa.

Sharci-Dugsiyeedka iyo Xeerka Anshax labaduba waxay ku shuqul leeyihiin dhaqanka ardayda markay dugsiyada joogaan, markay wax dugsiga la xidhiidha ka shaqaynayaan, iyo markay dugsiyada ku socdaan ama ka yimaadaan (markay baska la socdaa, baska meeshiisa taagan yihiin ama MBT-ga la socdaan, iwm).

### Ha Ku Cayaarin Maamuusyada Dugsiga!

Ardaydu waxay fursad u haystaa ka qaybgalka hawlo iyo dhacdooyin badan oo gaar ah ee dugsiga, sida safarrada dibadeed, xaflado, riwaayado, maalmaha fasalka, iyo xafladaha qalinjebinta, iyo kuwa kaleba. Ka qaybgalka hawlahasi waa maamuus la shaqaysto – maah waxad «xaq» leedahay. Ku xadgudubka sharciyada dugsiga ama Xeerka Anshaxa, ama samaynta falal sharci darro ah ama hawlo aan sharci ahayn ee dugsiga ka baxsan waxa ardaygu ku waayi karaa maamuusyadaas. Maamulaha ama madaxa dugsiga ayaa awood u leh xadaynta ama ka joojinta ardayg ka qaybgalka hawlahaas iyo dhacdooyinkaas gaarka ah.

### Udiidmada Gaadiidka

Haddii arday naftiisa ama dadka kale khatar geliyo isagoo la socda baska ama basyareha, madaxda dugsigu waxay ardaygaas u diidi karaan gaadiidka dugsiga. Diidmadaasi waxay socon kartaa ila saddex casho iyadoo aan wax dacwa la qaadin. Basaska qaarkood waxay leeyihiin aaladaha sawirka fidiyooga. Maamulaha ama madaxa dugsigu wuxu marag u isticmaali karaa sawirrada fidiyooga si loo cadeeyo edeb darrada ardayga. Waxa gaadiidka laga joojin karaa ilaa saddex casho iyadaan dacwo la qaadin. Haddii diidmadaasi socoto afar casho ama in ka badan oo isku xigta, ama lix casho oo hal teeram ah waxa la qaadi karaa dacwo. Ardaygu waa inuu dugsiga yimaaddaa maalmahaas gaadiidka laga joojiyey haddaan isla markaas dugsiga loo diidin.

### Min Hordhaca Ilaa Anshaxa Dugsiyada Dadweynaha Boston

Waxa Dugsiyada Dadweynaha Boston aaminsanyihiin in anshaxa cuddoon ee dugsigu sare u qaado fursadaha loo siman yahay ee waxbarasho iyo jawi nabadgelyo oo wax ku-ool ah ee waxbarasho...

Dugsi kastaa waa inuu sameeyaa jawi waxbarasho ee dhiiri gelinaysa tacliin heer sare ah, isdhaafsiga fikrado xor ah, iyo kobcinta ugu saraysa ee shakhsiga. Markay dugsiga ku jiraan, ardaydu waa leeyihiin xuquuqdooda dastuurka: Matalan, xuquuqda cadaaladeed, xornimada hadalka, kulamada haboon, qofnimada sirteeda, iyo kaxorowga takoorka. Ardaydu waxay kale saran mas'uuliyada inayan khalal gelin hanaanka waxbarasho, ama ayan cidhiidhi ku qaban, khtar gelin, ama ayan dadka kale ka qaadin xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada.

Waa nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Boston inay layku dayo in lagu xallilo mushkiladaha anshaxeed siyaabaha ugu haboon ay ka reeban tahay erigu. Hanaanyo cadaaladeed oo caqligal ah ayaa la raacayaa si loo hubiyo ardayda xuquuqdooda...

Xagga kale, waa in ardaydu aqoonsadaan in, si loo sii wado jawi ku haboon waxbarasho, waxa lagama maarmaan ah in shaqaaalaha dugsigu ay isticmaalaan xukun macquul ah.

Guddiga Dugsiyada Boston iyo maamulku waxay filayaa in dadka la xiriira dugsiyada idil inay ixtiraamaan xuquuqda dadka kale; waxayna kale filayaa kuwa ku hawwlan waxbarida.

# Xeerka Anshaxa (waa socotaa)

## Kajoojinta Dugsiga

**Kajoojinta dugsigu** maaha in ardayga loo diido inuu dugsiga tago maalmo kooban. Ardayga 15-ka ah ama ka yar, waxay noqon kartaa ka joojintu ilaa lix dugsi-maalmeed. Ardayga 16 jirka ah ama ka weyn, joojintu waxay noqon kartaa ilaa toban dugsi-maalmeed.

**Hanaanka Kajoojinta Dugsiga.** Intaan madaxa dugsigu arday ka joojin dugsiga waa in dacwo la qaadaa oo loo yeedhaa ardayga waalidkii/ilaaliyihiis. Dacwadaas madaxa dugsigu waa inuu dhegeystaa oo go'aan ka gaadhaa in ardaygaas laga joojiyo dugsiga iyo in kale. Haddii madaxa dugsiga iyo waalidku dacwada go'aankeeda ku heshiin waayaan, waa inay racfaan u dirsadaan Xafiiska Dacwooyinka, Racfaanka iyo Maqnaanshaha muddo toban casho gudaheed.

Mararka qaarkood, ardayga dugsiga waa laga joojin karaa kahor intaan dacwada la qaadin. Joojintaas degdega ah waxa la samayn karaa marka ardaygu shaqaaqo keeno kaddib iyadoo dhibaato dhacday waana isla maalintaas oo keliya. Intaan joojin degdegga la samayn, waa in madaxa dugsigu ogeysiiyaa waalidka/ilaaliyaha; waana in mar dambe fadhi dacwo qabtaan.

## Ka-eriga Dugsiga

**Erigu maaha inaan dugsiga** ardaygaas loo oggolaan ugu yaraan kow iyo toban casho oo dugsi-maalmeed ugu badnaanna hal sano oo buuxda. Maamulaha ama madaxa dugsigu wuxu keliya ee ku talin karaa in arday dugsiga laga eryo mararka arrintu aad u xun tahay.

Ardayda laga soo eryey dugsiyada degmooyin kale iyagoo lagu qabtay haysasha hub halis ah, daroogo mamnuuc ah, waxyeellada shaqaalaha dugsi, ama maxkamad denbi ku xukuntay ma geli karaan Dugsiyada Dadweynaha Boston. Haddii DDB ogaadaan in arday laga soo eryey dugsigiisii/dugsigeedii hore sababahaas midkood, ardaygaas waa laga eryeyaa DDB.

### Hanaanka Eriga, Talaabo Talaabo

1. Mararka qaarkood, marka arday denbi galo dugsiga lagaga eryi karo, maamulaha ma madaxa dugsigu wuxu qaadi karaa talaabo degdeg ah oo ardayga dugsiga lagaga joojinayo nabadgelyo daraadeed.
2. Waxa taas ku xigta, inta badan, maamulaha ama madaxa dugsiga ama sarkaal kale ayaa dacwada kajoojinta dugsiga dhegeysanaya markaasna ardayga dugsiga ka joojinaya. Ujeedada kajoojintu waa in ardayga dugsiga laga saaraa inta maamulaha/madaxa dugsigu diyaarinayo qaadida dacwada. Sida darteed, looma baahna qaadida dacwo kajoojin hadii ardayga dugsiga laga eryey sababao sharci ama nabadeed awgeed.
3. Waqtiga kajoojinta dugsiga, maamulha/madaxa dugsigu wuxu bilaabaya taalaabo rasmi ah ee qaadida dacwada eriga. Wuxuna ama waxay qaadaysaa in ardayga lagu qoro Xarunta Talabixinta iyo Kahortagga (waxa lagu sharxay bogga soo socda). Waa in waalidka lagu siiya ogeysiinta

## Denbiyada Ardayda Lagaga Joojin karo ama Lagaga Eryi karo Dugsiyada

**Xeerka Anshaxu wuxu dhigayaa in ardayga laga eryayo dugsiga falal xumadan awgood:**

- Haysashada hubka dhaca.
- Isticmaalka hub ama qalab khatar ah aan sabab micna leh loo haysan karin si hanjabaad ah
- Kula dagaallanka iyo waxyeelka dugsiga dhexdiisa shaqaalaha dugsiga oo ku dhaawacma. Yahay dhaawaca ama isku dayga dhaawaca qof kale hub iyo hub la'aanba ama nabar khatar ah
- Kufsashada
- Gadidda, fidinta ama haysashada daroogo mamnuuc ah uu kuna tala galay gadidaeeda ama qaybinteeda
- Haysashada hub ama qalab mar labaad kadib markuu galay Xarunta Ka-hortagga & Talabixinta DDB
- Tegid la'aanta Xarunta Ka-hortagga & Talabixinta sababo macquula la'aantood; ama jebinta Qodobka 7 ee Xeerka Anshaxa isagoo ku jira Xaruntaas.

**Xeerka Anshaxu wuxu dhigayaa in ardayga dugsiga laga joojin karo ama eryo falal dembiyeedada xun awgood sida:**

- Weerarka ama dilka shaqaalaha dugsiga ama qof kaleba – taasoo micnaheedu yahay waxyeelka, isku dayga waxyeelka, ama ku hanjabida waxyeelka qof kale, isagoo haysta ama an haysan hub ama qalab khatar ah.
- Haysashada daroogada
- Keenidda dugsiga hub
- Ku cabsiinta qof kale hub-u-yaal ama wax khatar ah
- Kicinta ama isku dayga kicinta dab
- Waxyeelka ama xadidda hantida dugsiga ama mid gaar ahaaneed (ama haddidaadda falkaas ku kiciisa)
- Ku hadidaada bombo ama samaynta ama warbixin beenaadka dab aan jirin
- Ku xadgudubka xuquuqda bulshada
- Shukaansiga foosha xun ee qof aan raalli ka ahayn
- Jinsiyad cayga iyo isticmaalka afxumadda iyo cayda lafa jebiska ah
- Jebinta xeerarka ku camalfalka wacan ee "e-mail"-ka ama Internetka
- Khalkhalidda hawlaha fasalka iyo dugsiga
- Joogitaanka meelo dugsiga oo ardayda ka caagan
- U diidmada dad kale ka bixida ama gelitaanka dugsiga
- Diidmada inuu ama inay is-sheego/sheegto
- Faragelinta faylalka dugsiga
- Ka tegidda dugsiga fasax la'aan ama u goynta faraha badan ee fasalka.

Duruufaha Qaarkood, ardayga waa laga joojin karaa ama waa laga eryi kara muddo aan sugnayn falal aan dugsiga ku lgu lahayn awgood, sida haddii lagu dacweeyo ama loo xiro fal danbiyeed oo markaas maamulaha dugsigu go'aansado in joogitaankiisu dugsiga khalkhal gelinayo.

**FIIRO:** Intani waa uun Tusaale ahaan. Fadlan eeg Xeerka Anshaxa ee liiska ciqaabta ee si buuxda lagu sharxay.

# Xeerka Anshaxa (waa socotaa)

qaadida dacwada eriga iyadoo afka guriga lagaga hadlo. Hadii waalidku imaan karin dacwada wuxu dalban karaa hal mar in dib loo dhigo.

4. Marka dacwada eriga la qaadayo, maamula ama madaxa dugsigu wuxu dhegeysanayaa markhaatiyaal wuxuna fiirinaya cadaynta hor taal. Ardayga ama waalidka/ilaaliyahu wuxu qabsan karaa qareen maalinta dacwada. Dugsiga laftiisu wuxu ugu deeqayaa turjumaan waalidka afka Igiriisigu ku yar yahay. Waa in dugsigu mulaax ku duubaa dacwada, waana in nuqul laga siiyaa ardayga ama waalidka hadday dalbadaan.
5. Dacwada kaddib, maamulaha/madaxa dugsigu talabixin qoraal ah ayuu u dirayaa Hogaamiyaha Hawleed ee ku shuqul leh si arrinta loo derso hanaanka qaadida dacwada. Hadii maamulaha ama madaxa dugsigu go'aamiyo eriga ardayga, waa in ardayga iyo waalidka qoraal lagu ogeysiiyaa. Inta badannaa, qof ka mid ah qaybta Nabadgelyada Dugsiga ayaa ogeysiinta geynaya guriga dugsiga.

**Racfaanka Ka-eriga Dugsiga.** Haddii ardayga iyo waalidku/ilaaliyuhu ka soo hor jeedaan eriga, waxay racfaan u qaadan karaa Agaasimaha Guud ee dugsiyada ama qof uu magacaabay, toban maalmo-dugsiyeed gudahood. Waxay kale ee Agaasimaha Guud weydiisan karaan dib u fiirinta kiiska sagaashan dugsi-maalmeed kadib.

**Eriga Kadib.** Marka ardayga waqtigii la eryey dhamaado, ardagu waa inuu aadaa Xarumaha Xogta Waalidka mid ka mid ah oo mar labaad isa soo qoraa Dugsiyada Dadweynaha Boston. Ardayga laguma celin karo dugsigii laga eryey haddaan maamuluhu ama madax dugsigu arrintaas ku talin eriga kadib.

## Bedelaada Anshaxeed

Maamulaha dugsigu waa ku talin karaa in arday ku jira dugsiga hoose oo dhib badan dugsi kale loo beddelo.

Ardayda ku jirta dugsiga dhexe ama dugsiga sare ee shaqaaqada badan waxa keliya oo laga diiwaan gelin karaa barnaamijyada kale ee loogu tala galay ardaydaas. Diiwaan gelintani waxay hirgelaysaa inta sanad-dugsiyeedka ka dhimman. Ka bacdi, maamulaha, waalidka, iyo agaasimaha barnaamijyadaas kale ayaa go'aamin kara haddii ardayga (1) lagu celinayo dugsigii hore, (2) haddii loo bedelayo dugsi kale, ama (3) haddii loo deynayo barnaamijkaas isaga ah.

## Xarunta Latalinta & Kahortagga

Xaruntan waxa loogu tala galay ardayda dugsiyada la yimaada hub ama kuwa sugaya dacwo qaadid.

Xarunta Kahortagga iyo Latalintu waxay adkeeyaan waxbaridda aan dagaalka lahayn iyo muhimmada in loo hoggaansamo sharciyada. Ardayga waxa Xaruntaas loo diraa dhawr maalmood. Kuwa tegi waaya Xaruntaas toos baa loo eryaa.

## Ciqaabta Jidh-dilka

Sida u degsan Sharciga Gobolka iyo Nidaamka Guddiga Dugsiga, waa inaan shaqaalaha dugsigu ku ciqaabin arday inay dilaan, riixaan, ama wixi jidh-dil ah oo dhan. Shaqaalaha dugsigu waxay isticmaali karaan xoog caqligal ah si ay arday u xakameeyaan oo keliya hadii (1) qabasho aan xoog ahayni waxba tari weydo ama ahayd natiijo la'aan, iyo/ama (2) Haday is dhahaan falalka ardaygu waxay keeni kartaa dhaawac ku dhaca ardayga ama dad kale. Qof kasta oo shaqaale dugsi ah ee isticmaal xoog aan macquul ahayn waxa lala tiigsanayaa sharciga.

## Ardayda Naafada ah

Xeerka Anshaxa ardayda oo dhan waa u siman yihiin. Waxase jira habab khaas ah, oo loo edbiyo ardayda caawinaada khaaska ah u baahan ee naafada ah. Waxad hanaankaa ska helaysaa rugta «website»-ka DDB, www.bostonpublic schools.org/dept/bps_memo.asp, click»USS-15». Kan waxa laga soo degsan karaa oo laga daabacan karaa. Hadaad rabto, dugsiga ilmahaaga ayaa ku siinaya nuqul xaanshida ah hadaad codsato. Hanaankani wuxu kalee ku jiraa Buuga Xuquuqda Waalidka ee la socda barnaamija ilmahaaga ee « Individual Education Program (IEP)».

Arday nafo ah lagama joojin karo dugsiga in ka badan 10 casho ee isku jirka maalmo-dugsiyedka ee sanad-dugsiyeedka sida ku taal sharciyada iyo xeerarka fedraaliga ah.

## Sidee baa Waalidiintu u Caawin Karaan

Waalidku wuxu ilmihiisa tari karaa inuu ku boorriyo sida loogu hogaansamo sharciyada iyo sida dugsigu u noqdo meel nabadgelyo oo wax lagu barto. Xeerka Anshaxu wuxu leyahay waalidku waxay mas'uu; ka yihiin inay:

- Wax ka qaybsadaan mas'uuliyada dabeecada ilmahooda ee dugsiga, hawlaha dugsigu abaabulo, iyo marka dugsiga lagu socdo ama laga yimaado.
- U diyaarinyaan ilmaha inay mas'uul ka noqdaan tegitaanka dugsiga, iyo dabeecadiisa/dabeecadeeda.
- Ku beeraan ilmaha ujeedooyinka wacan xagga naftiisa/nafteeda, dadka kale, dugsiga, iyo bulshada.
- Kala xiriiraan shaqaalaha dugsiga ilmahooda.
- Tagaan shirarka guud ama kuwa gaarka ah.
- Ictiraafaan in shaqaalaha dugsigu xaq u leeyahay fulinta nidaamka, sharciyada, iyo xeerarka Dugsiyada Dadweynaha Boston.
- U dhaqmaan si edeb leh aan khalkhal ku jirin markay dugsiga soo booqdaan.
- Xaqiijiyaan in ilmahoodu dugsiga la tago oo keliya alaabta ku haboon waxbarashada.

## Nuqulka Xeerka Anshaxa iyo Sharci Dugsiyedka

- ▶ Weydiiso madaxa dugsiga nuqul ka mid labadaas buugba. Isaga ama iyadaa kaaga jawaabi doona wixi su'aal ah ee aad qabto. Waa in buug-yarahan uu la socdaa Sharci-Dugsiyeedku.
- ▶ Waxad kalee ka heli kartaa nuqulka Xeerka Anshaxa rugta «Website»-k DDB, ama xafiissyada Xarumada Waxtarmada Waalidka (eeg boga 5), ama Xafiiska Agaasimaha Guud, 617-635-9050.

# Nidaamyada DDB:
## Isticmaalka «Internet»-ka ee Dugsiyada

Dugsiyada Dadweynaha Boston dhamaan waxay nasiib wacan u haystaan inay la xidhiidhaan «Internet»-ka taasoo ardayda iyo shaqaluhu aduunka idil farah ugu jiro si ay u taageeraan waxbarida iyo waxbarashada.

Isticmaalk Internetku wxux wataa xilkasnimo si loo xaqiijiyo Inaan ku dhaqno dabeecado nabad iyo akhlaaq leh Inagoo ka mid ah bulshada caalamka xisaabta kombiyuutareed. Iyadoo laga helayo agabyo iyo aqoon gudaha Webka oo idil waxa kalee jira rugaha iyo maqaalo aan ku haboonayn ardayda aanna wax qiime waxbarasho lahayn. Waa mas'uuliyadda dadka isticmaalaya oo idil – shaqaale iyo ardayba – inay hubiyaan war walba Intay joogan dugsi dadweynaha Boston, in teknolojiga oo dhan ay ku jiraan kuna koobnayn kombiyuutarada, qaalabka la sito, e-maailka, iyo Internetka, loo Isticmaali waxbarashada oo keliya. waxbarasho ahayn loo isticmaali karin Internet-ka waqti kastay dugsiyada joogaan.



DDB waxay adeegsadaan habka shaandhaynta ee dabagal iyo kormeer ku haya kombiyuurada idil iyo isticmaalka Internetka shebekadaha DDB. Habka waxa loo hindisey in laga joojiyo gacan ku-dhigga rugaha aan ku haboonayn waxbarashada. Macallimiinta DDB waxay codsan karaan in Xafiiska Adeega OIIT xiraan ama ama la soo daayo rug gaar ah. Go'aanadaas waxa iska leh waaxda DDB ee tekonlojiga oo ay la socdaan madaxada dugsiyadu.

Waa muhim in la ogaado inaan hab sshaanshayn oo kastaa xal buxaa noqonayn. Marka la eego dabeecadda Waa mas'uuliyad ardayga saaran inuu u soo sheego macallinka rugtii xun uu la kulmo markaasna dib ugu noqdo mawduucii waxbarasho ee loo diray.

**Nidaamka Isticmaalka Haboon** (**AUP**) ee bogan waxa farsameeyey gudi Isugu jira macalimiin, maamulayaal, waalid, boliiska dugsiga, iyo Xafiiska Lataliyaha Sharciyaysan ee si loo hubi nabadda kuwa isticmaala Internetka oo idil ee shebekada DDB. Idinkoo ah waalidka /koriyeyaalka, fadlan si tifaftiran dibufiirin ugu sameeya idinka iyoilmihuuna kahor intaanay isticmaalin Internetka dugsigooda. Waa muhiim in adiga iyo ilmahaagu fahmtaan in ku xadgudubka Nidaamkan «AUP» uu keenayo in la waayo maamuuska Internet-ka ama taalabo sharci ah la qaado. Waxaanu kaa codsaneynaa inaad ilmahaaga kala shaqeyso sidii loo fulin lahaa dabeecadaha habdhaqanka Internetaka ee AUP iyo heshiiska ardayga ee ku qoran bogga 35 -aad ee Buuggan Hoggaha ah.

**Wax Dheeraad Ah Ka Sii Baro Nabadgelyada Internetak DDB**

- DDB nabadgelyada Internetka Website-ka: www.bpscybersafety.org
- DDB nabagelyada Internetka bloga: bpsinternetsafety.blogspot.com

### Nidaamka Isticmaalka Haboon ee Shebekadaha, uu ku Jiro «Internet»-ku

Nidaamka Dugsiyada Dadweeynaha Boston (DDB) wuxu dhigayaa In teknolojiga dhan ee lagu Isticmaalo gelitaanka shebekada DDB, ay ku jirto laakin ku koobnayn Internetka, e-maailka DDB shabakadaha faylalka, xisaabaha, iyo qalabyada teknolojiga Idil ee shebekada ku xiran, waa in loo isticmaalaa si xilkasnimo, sharci, iyo asluubi ku jirto. Hadii taas la waayo waxaa dhacaysa in qofka isticmaalaya laga joojiyo maamuuskaas la siiyey ee shabakadaha iyo/ama ficil kaloo anshaxeed.

Qof kasta oo isticmaala shabakada – arday iyo qof weynba – isaga laftiisaa ka masuula sida uu u isticmaalo. Isticmaalka shabakadahu waa mid lagu taageerayo waxbarashada iyo cilmi baarista waana inuu la socdaa hawlaha tacliinta DDB. Isticmaalka waxa kormeeraya shaqaalaha DDB. Isticmaalka shabakadaha iyo Kombuyuutarada hay'adaha kale waa in la waafajiyaa sharciyada haboon ee shabakadahaas. Marna lama ogola in loo inticmaalo shabakadaha si sharci daro ah ama howlaha ganacsiga ah.

**Qofka mas'uulka ah ee isticmaala shebekadaha waa inuu:**

- Isticmaalaa af loo qaadan karo mid hagaagsan
- Asluub mid leh yahay
- Diraa warar aan dadka kale ee isticmalaa waxyeela ama ayan qoonsan
- U hogaansamaa sharciyada hal - abuurka waana inuu had iyo goor aqoonsi u xusaa qoraaga wuxu isticmaalo.
- Waligii xog ka sheegin naftiisa ama qof kale ka sheegin warar shaqsi ah sida cinwaanka, taleefanka, lanbarrada kaararka deynta, lambarka social security-ga (caymis dhaqameedka), iwm; iyo
- Waa inuusan fara gelin habka shabakada waana inuusan beddelin, masaxin ama baabi'in faylasha iyo xogaha qof kale.
- La wadaagin magacaaga iyo boaaqaaga dad aadan mas'aal ka noqn karin waxayaabaha ay sameeyaan intaad xisaabtan isticmaalayso.

**Qofka xilkaska ah ee isticmaala shebekada waa inuu:**

- Isticmaalka shabakaduhu waa **maamus**, ee ma aha **xaq**.
- Shebekadaha DDB waxa loo isticmaali karaa oo keliya waxbarasho.
- E-mailka laguma ballan qaadi karo inuu wax kuu gaara noqdo.
- Waa muhim inaad xirto kombiyuutarka markaad danahaaga ka dhamaysatoba, si aan qof kale u isticmaalin furaha eray-sireedkaaga (Password).
- Carrifaada sawirarad iyo magaca hore iyo kan dambe ee ardayda waa inaan lagu isticmaalin website-ka, ay ku jiraan aanse ku koobnayn "blogs"-ka, "wikis"-ka iyo doodadaha guud, iwm.
- Ku xad gudubka siyaasaddani waxay keeni kartaa in la waayo maamuusyada Internetka ama, meeshii habboon, lagula tiigsado sharciga Xeerka Anshaxa, ama lagugu qaado sharciga fedraaliga ah ama kan goboleed.
- Dadkii xisaab shebekadeed helaa iyagaa mar walba isticmaalkeeda ka mas'uul ah.

# Nidaamyada DDB:
## Shuruudaha Degenaanshaha Ardayda

Si aad dhigatid Dugsiyada Dadweynaha Boston, waa in ardaygu degen yahay Magaalada Boston. Degenaanshaha ardayga ka yar 18 sano waa degenaanshaha sharciga ah ee waalidka ama koriyaha ee laf ahaan ka mas'uul ah ilmaha. Ardayga ah 18 ama ka da' weyn wuxu degi karaa guri aan ahayn kan waalidka ama koriyaha si uu dugsiga u dhigto.

«Degenaanshuhu» waa meesha qof ku nool yahay si joogto ah. Degenaanshaha ku meel gaadhka ah ee Magaalada Boston, ee sababta keliyihi tahay dhigashada dugsi dadweyne ee Boston, looma haysto inuu yahay «degenaansho».

Nidaamkan degenaanshuhu ma saameeyo ardayda hoyga la'. Su'aalaha ku saabsan ardayda hoyga la' waa in loo diraa Xafiiska Lataliyaha Sharciga, ee 617-635-9320.

### Cadaynta Degenaanshaha Magaalada Boston

Intaan ardayna la qorin ama loo ogolaan inuu dhigto mid ahaan Dugsiyada Dadweynaha Boston, waa ardayga waalidkiisu ama kriyuhu keenaa sadex cadaymood ee xaqiijinaya degenaanshaha Boston. Warqaduhu waa inay yihiin kuwo la daabacay oo ay ku qoran yihiin magaca iyo cinwaanka waalidka ama kiriyaha ardayga, waana in shaqsi ahaan lakeenaa Xarunta Waxtarmada Qoyska (FRC) waqtiga diiwaangelinta. Cadaymaha iidil ee degenaanshuhu waa inay tusaan cinwaan isku wada mid ah. Fadlan ogow korinta sharciyaysani waxay u baahan tahay warqado dheeraad ah ee laga keenay maxkamad ama hay'ad.

Warqadahaasi waxay kalee loo baahan yahay marka cinwaanka la bedelayo.

**Marka dugsi la qorayo, codsadeyaalka idil waa inay keenaan QOF AHAAN ugu yaraan hal warqad oo ka socota qayb kasta: Qaybta A, Qaybta B, iyo Qaybta C. Waa inay gidi wada muujiyaan cinwaan hadda jira.**

| QAYBTA A | QAYBTA B | QAYBTA C |
|---|---|---|
| Waa in la keenaa LABA nuqul oo wada socda<br>■ 2 xaanshi: Nuquklka lahaansho IYO qoraal bixinta haftadii ugu dabaysey<br>AMA<br>■ 2 xaanshi: heshiis Kiro (ay ka mid yihiin kuwa " BHA" iyo "HUD") IYO qoraal bixinta kiradii ugu dambaysey<br>AMA<br>■ 2 xaanshi: Xaanshi sharciyaysan ee hantiilaha guriga xaqiijinaya kirayntiisa IYO qoraal kiro bixinta ugu dambaysey<br>AMA<br>■ Heshiiska "Section 8" | Biilka sahayfududaynta guriga (utility) ee ila 60 casho,<br>■ Biilka gaasta<br>■ Biilka shidaalka kululaynta<br>■ Biilka korontada<br>■ Biilka telefanka guriga (biilka telefanka gacanta LAMA aqbalo)<br>■ Biilka keebalka telefishanka<br>Ma aqbalno biilasha fooniyaha gacanta iyo biilasha biyaha.<br>Hadii qoys cid kale guri la wadaago ayayse bixin kirada, qoysku wuxu keeni karaa biil koronto ama wax la mid ah (utility) ee ku qoran magaca qofka leh ama kiraystay guriga. | ■ Ruqsad dareewalnimo sharci ah<br>■ Diiwangelin baabuur ee hadda<br>■ Aqoonsi sawir leh ee Massachusetts<br>■ Baasaboor sharci ah<br>Taariikhaysan ilaa sanadkii hore:<br>■ Arjiga W-2 ee cashuurta<br>■ Biilka cashuurta baabuurka<br>■ Biilka cashuurta hantida<br>Taariikhaysan ilaa 60 casho:<br>■ Warqad ka timid hay'ad dawleed ee jirta<br>■ Dacalka dambe ee mushaharka<br>■ Xisaabcelinta banki ama "credit card" |
| Shuruudaha dheeraadka ah ee diiwaangelinta: | (1) Talaalo dhan; fadlan fiiri boga 28 wixi tafaasiil ah<br>(2)Shahado dhalasho xanaanada iyo ardayda faslaka 1 | |

### Degenaanshaha Codsadeyaalka Dugsiyada Imtixaanka

Waxa jira sharciyo degenaansho ee u gaar ah ardayda doonaya inay galan sadexda dugsiyada imtixaanka ee magaalada – Boston Latin School, Boston Latin Academy, iyo John D. O'Bryant School ee Xisaabta iyo Sayniska – fadlan fiiri bogga 26.

### Bayaanka Degenaanshaha Boston

Waalidka iyo koriyeyaalka sharciyaysan ee ardayda Dugsiyada Dadweynaha Boston, iyo ardayda da'doodu tahay 18 ama ka weyn, waa inay saxeexaan weedh sheegaysa inay yihiinb dad sharci ahaan degan Magaalada Boston. Waa inay kale ogeysiiyaan DDB haday meel kale u guuraan sanad dugsiga gudihiisa. Weedhani waxay ku qoran tahay bogga 34 ee Hagahan. Ha ilaawin inaad saxeexdo soona celiso bogagga 34–36 !

### Hadii arday ka guuro Boston waqtiga sanad dugsiyeedka

▶ Ardayda dugsiga sare way ku sii jiri karaan dugsigooda hada ee DDB haday guuraan kadib marka ay bilaabaan fasalka 12.

▶ Ardayda xanaanada-fasalka 11 ee ka guura Boston bisha Abril 30 ama Inta ka horaysa waa In Isla markiiba dugsiga laga saaraa.

▶ Ardayda xanaanada-fasalka 11 ee ka guura Boston bisha Abril 30 kadib waa ku dhamaysan karaan sanad dugsiyeedka dugsigooda. Waxa laga saarayaa DDB marka sanad dugsiyeedku dhamaado.

▶ DDB uma fidinayaan gaadiid ardayda ku nool Boston dibadeeda.

# Shuruudaha Degenaanshaha Ardayda (waa socotaa)

## Dhaqangelinta Degenaanshaha Boston

Marka waaxda dugsiyadu tuhunto in qoyska arday ku jira DDB uu ku nool yahay meel ka baxsan Boston, waxa la samaynayaa baadhis. DDB way tuhmayaan inuusan arday ku noolayn Boston, hadii, matalan, boostu waraaqaha soo celiso cashaan waa cinwaan khaldan, ama cadaymaha cinwaanadaa waalidku keenay ayan hagaagsanayn ama shaki ku jiro, ama la helaay tibaax laga helay maamulaha/madaxa dugsiga ama qof aan is sheegin.



**KHADKA FARIINTA DEGENAANSHAHA**

**617-635-6775**

**Wac oo ka tag fariimo aadan is magacaabin xaga ardayda dhigta Dugsiyada Dadweynaha Boston ee aan ku noolayn magaalada Boston.**

Waxa raacda baadhista lagu samanayo qoysaska lagu tuhmayo inayan degenayn Boston, baadhaha degenaanshuhu wuxu samayn karaan inuu hubin ku sameeyo tiro qoysas kala duwan ee kuwa dugsiyada imtixaanka iyo kuwa kaleba. Baadhaha degenaanshuhu wuxu kale la shaqaynayaa hay'ada MBTA oo samaynaysa hubin qafladeed ee tareenada ay soo raacaan ardayda aan ku noolayn ilaa dugsiyada Boston.

### Maxaa ku dhacaya ardayda jebiya nidaamka degenaanshaha?

Habka Nidaaamka Degenaanshaha isla markiiba waa laga eryeyaa Dugsiyada Dadweynaha Boston.

Waalidka/koriyada ardaygaas loo eryey isagoon degenayn Boston wuxu qaadan karaa racfaan. Waa loo ogolaan karaa ardayga inuu sii dhigto dugsiga inta racfaanku socdo. Fiiri bogga 9, ee «U Qareemida Ilmahaaga» (Advocating for Your Child.)

Waxa eriga dugsiga raaci kara, in Dugsiyada Dadweynaha Boston khasiraado kale saarto qoyska, sida iyagoo maxkamad la tiigsada, la khasiro lacagtii waxbarashada ilmaha ku baxday, iyo iyadoo laga joojiyo abaalgudyada tacliimeed qaarkood.

# Diiwaangelinta Dugsiga – Goor Hore Bilaw Sidaad u Heshid Xulashadaada!

Magalaweynta Boston waxay leedahay in ka badan 138 dugsi dadweyne oo gidi bixiya waxyaabo kala gaar ah. Xaga nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Bosto (DDB) ee meelaynta, qoysasku waxay helaan xulashooyinka dugsiyada – laakin dugsina laguma «balan qaadayo». Ardayda waxa lagu meeleeyaa habka bakhti yaa-nasiibka (lottery) oo siiya mudnaan ardayda walaaluhu ku jiraan dugsiyada iyo ardayda ku nool «aaga lugaynta» dugsiyada.

Ardayda badankoodu waxay u baahan yihiin inay codsadaan dugsi waqtiga «fasalada kala guurka»: waa xanaanada, fasalka 6 (loo gudbayo dugsiga dhexe), iyo fasalka 9 (ee bilawga dugsiga sare). Codsashada diiwaangelinta iyo bedelaadaha sanad dugsiyeedka 2010-2011 waxay u bilaabmayaan Janaayo 4, 2010 fasalada kalawareega iyo Febraayo 10, 2010 fasalada kaloo idil. Fursada ugu wacan ee helitaanka dugsigaad rabto, waa inaad codsiga samaysaa xilliga diiwaangelinta kowaad ee fasalka ilmahaaga.

Haduu ilmahaagu bilaabayo xanaanada sanadka soo socda, ama uu hadda ku jiro fasalak ugu sareeya ee dugsigiisa, waxan ku talinaynaa inaad isla dayrtan bilawdo ogaanshaha doorashada dugsiyada.

## Oktoobar:

- **Soo hel dugsiyada aad codsan karto,** ee ku jira amd ka baxsan aagaaga ku meelaynta.
- **Ka feker waxad dugsiga ka rabto,** sida meeshuu ku yaal, barnaamijyo gaar ah, hanashada ardayga, dhismaha heerarka fasalada (K0-fasalka 1, K-5, K-8, iwm.), iyo inta baaxadiisu tahay.
- **Tag Carwada Dugsiyada ee DDB (BPS Showcase)** Oktoobar 24, ee lagu dhigayo Xarunta Reggie Lewis ee Tartanka & Atletikada Roxbury. Carwadu waxay soo bandhigtaa tusaalooyin badan oo laysugu keeno qolweyn oo keliya, waxadna la hadli kartaa maamuleyaal iyo macalimiin badan.

## Nofambar ilaa Janaayo:

- **Booqo dugsiyada** Waqtiga Sahaminta Dugsiyada (fiiri boga 48). Tani waa sida ugu wanaagsan aad ku heli karto dareenka "jawiga" dugsi iyo filashooyinka ardayda.
- **Dugsi kasta wax dheeraad ah ka baro.** Haaysku halayn oo keliya waxad ka maqasho saaxiibadaa iyo xubnaha qoyska. Dugsi walbaa waa gooni, dugsiyaduna waa Isbedeli karaan waqti kasta. Buuga Isbarashada Dugsiyada Dadwynaha Boston wuxu xog ka hayaa dugsi kasta ee DDB iyo habka diiwaangelinta dugsiyeed. Waxa afaf badan lagaga helaa dugsiyada idil Janaayo, Xarumada Waxtarmada Qoyska, maktabadaha , iyo wabsite-ka DDB. Warbixinada Kaararka Dugsiga (fiiri boga 56) waxa ku yaal tafaasiil badan ee dugsi walba. Waxa laga helaa Xarumada Waxtarmada Qoyska iyo www.bostonpublicschools.org/schools.
- **Codso qof ahaan xilliga diiwaangelinta kowaad fasalka ilmahaagu gelayo.** Waxad u baahan tahay inaad keensato cadaymaha degenaanshaha (fiiri boga 46), diiwaanka talaalada buuxa ee ardayga iyo, xaga ardayda la qorayo xanaanada iyo fasalka 1, waarqada dhalashada ardayga ama dhaafiyaha. Xogta buuxda ee diiwaangelinta dugsi, booqo www.bostonpublicschools.org/register, wac miduun Xarumada Waxtarmada Qoyska (fiiri boga 5), ama soo qaado nuqulka «Introducing the Boston Public Schools» (Isbarashada Dugsiyada Dadweynaha Boston).

# Diiwaangelinta Dugsiga (waa socotaa)

## «Waqtiga Sahaminta Dugsiyada»

Waqtiga Sahaminta Dugsiyada (School Preview Time -SPT) waa Nofambar 2, 2009 ilaa Janaayo 22, 2010, kahor xiliga diiwaangelinta kowaad. Xiliyadan dugsiyadu waxay u furan yihiin booqashada waalidka waxayna leeyihiin xaflado gaar ah si waalidka loogu caaawiyo siday u samayn lahaayeen xulasho cilmi ku dhisan xagga ilmahooda dugsiga ay geli doonaan. Fiirso website-ka DDB xaga liiska saacadaha booqashada Waqtiga Dibufiirinta Dugsiyada ee dugsi kasta.

Magaalada Boston, iyo kuwo kaloo sii badanaya ee ah shirkadaha shaqaaleeya dadka reer Boston waxay shaqaalahooda joogtada ah ee ah waalid ama koriyeyaal leh caruur waqti dugsiyeed soo gaadhay waxay shaqada ka qaadan karaan ilaa afar saac Waqtiga Dibufiirinta Dugsiyada siday u soo booqdaan dugsiyada. Si aad ugu qalanto faa'iidadan, waa in shaqaaluhu leeyahay ilmo markii ugu horasey la qorayo DDB, ama arday hada ku jira DDB oo codsanaya dugsi kalaguur cusub (waa xanaano iyo fasalada 6 iyo 9). Waqtigan waa «xilli fasax lacag leh» lagana jari mayo fasaxa, maalinta shakhsi, ama waqti jirro.

Guud ahaan waa inay isticmaalaan fasax u yaal, maalmaha shaqsiyeed ama waqti «deyn» ay leeyihiin («comp» time). Wixi warar dheeraad ah, fiiri Wareegtada Agaasimaga Guud ee DDB Circular SUP-3, ee «Booqashooyinka Waalid ee Dugiga», kuna yall website-ka DDB. Shaqaalaha u qalma waa inay la xiriiraan xafiiskooda Shaqaalaha kahor intaanay isticmaalin faa'iidooyinkan.

### Bedelaada iyo Wadciyada Kale

**Codsiga Bedelaada Madaxbanaan.** Waalidka ama arday ah ama ka weyn 18 sano wuxu codsan karaa in loo bedelo dugsi kale. Bedeladaha madax banaani – waa kuwaan la xiriirin cinwaanka oo la bedeley, nabadgelyo awgeed, barnaamijka, ama asbaabaha anshaxa – waxa laagu codsan karaa sidatan:

- **Dugsiyada hoose:** hal bedelaad sannad -dugsiyeedka.
- **Dugsiyada dhexe:** hal bedelaad oo keliya sanooyinka dugsiga dhexe (6–8).
- **Dugsiyada sare:** hal beddelaad sanooyinka dugsiyada sare

Si aad u dalbatid beddelka madax bannaan waxad tagtaa mid ka mid ah Xarummada Xogta Waalidka. **Hawshan waxa lagaa rabaa aqoonsi cadaan ah.** Intaadan buuxinarjiga waxad hubisaa in dugsiga aad doorotay kursi ka bannaan yahay.

**Ka bedelka dugsiyada qaba tilmaanta Ubaahan Siihagaajin.** Waaxda Waxbarashada Massachusetts ee Dugsiyada Hoose iyo Sare waxay dhigtaa liis ku saabsan dugsiyada ka baaqda Horukaca Haboon Sanadkiiba (Adequate Yearly Progress – AYP) ee ku salaysan tirooyinka lagu keeno imtixaanka MCAS, iyo tusaalooyin kale (cabirka ka qaybgalka imtixaanka, xaadiraada, ama qalinjebinta). Sharciga fedraaliga ah ee No Child Left Behind (NCLB) ama « Ardayna Dib Loogama Tegayo» wuxu dhigayaa in ardayda dhigta dugsiyada keeni waaya AYP laba sano oo isku xigta waxay xaq u leeyihiin inay u bedeshaan dugsi kale. (Fadlan fiiri boga 55 ).

**Bedelaada Nabadgelyo.** Marmar waxa haboon in arday loo bedelo dugsi kale si loo xaqiijiyo jawi waxbarasho oo nabad ah. (Fiiri boga 39, Nabadgelyada Ardayda & Gurmadka Degdega ah, NCLB Khiyaarka Xulashada Dugsi Nabad La,' boga 61.)

**Ardayda Rabshada Badan.** DDB waxay u bedeli karaan ardayda dugsiga hoose dugsi kale anshax xumo awgeeed. Hase ahaatee, ardayda dugsiyada dhexe ama sare ee rabshoolaha ah waxa lagu meelaynayaa oo keliya barnaamijyada ka duwan (alternative). (Fadlan fiiri boga 44 , «Bedelaada Anshax Xumada)

**Bedelaada marka Cinwaanka la bedelo.** Inta badan ardayda u guurta xaafad aag dugsiyeedkii hore ahayn ee magaalada Boston waa in lagu qoraa dugsi aagaas cusub ku yaal. Hase ahaatee, ardaygu waa dhigan karaa dugsigii hore ee qaybtuu ka soo guuray ilaa fasalka dugsigaas ugu sareeya haddii waalidku qoraal ku bixiyo inuu gaadiidka qaabilayo dugsiga geeya.

**Ardayda Hoylaawe.** Ardayda reerkoodu noqdo kuwa hoylaaweah waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsigoodii ugu dambeeyey, ama ay dugsi ka dhigtaan meesha ku meel-gaadhka ah ay deggan yihiin. Wixi warar dheeraad ah, kala xiriir Unugga Ardayda Hoylaawe ah ee 617-635-8037.

**Ardayda Waaweyn.** Ardayda da'doodu tahay 20-22 waxa lagu qorayaa Akademiyada Farsamada Dadka Waaweyn ee Boston (Boston Adult Technical Academy) kuna taal Rugta Madison Park. Hase ahaatee ardayda hadda ku jira dugsi sare ee raba inay ku sii jiraan dugsigaas waxay racfaan u qaadan karaan madaxa dugsiga. Wixi su'aalo ah ee ku saabsan beddelka, waxad kala xidhiidhaa Xarummada Xogta Waalidka, ee ku qoran jeldiga ugu dambeeya. Wixi caawimaad ah wac Xafiiska Adeegyada Meelaynta, 617-635-9516.

### Kahor Intaadan Dugsi Booqan

Dugsiyadu waa soo dhoweyaan dadka booqda maalmaha dugsiyada intooda badan. Waxa wacan inaan dugsiga wacdo intaadan tegin si aad u hubiso in qof kuu diyaar yahay inuu ku wadwado oo su'aalaha kaaga jawaabo. Soo ogow inay jiraan waqtiyo gaar ah oo loogu tala galay in dadka dugsiga la marmariyo oo lala kulansiiyo maamulaha.

**Waxad Fiirsan Karto Ama Warsan Karto Markaad Dugsi Booqato**

- ☑ Dugsigu ma soo dhoweeyaa oo ma ixtiraamaa yar iyo weynba?
- ☑ Meel habaysan matahay, oo gidaarada ugu dhegsan yihiin shaqooyinka ardayda ee tayada sare?
- ☑ Maw eg yihiin maamulaha, macalimiinta, iyo shaqaaluhu kuwo danaynaya dadka oo aqoon leh?
- ☑ Ardaydu waqtigooda inta badan maku mashquulsan yihiin maadooyinka tacliinta—akhriga, qoraalka, xisaabta, sayniska, iyo duruusta dhaqanka?
- ☑ rdaydu ma daneeyaan oo ma ku foogan yihiin waxbarashada?
- ☑ Ma jiraan fursado muusiko, fanka, iyo jimicsiga jidh dhiska?
- ☑ Dugsigu maa leeyahay barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib? Waa maxay saacadaha iyo kharashku? Waa maxay hawlaha la qabtaa? Sidee loo kormeeraa?
- ☑ Dugsigu maa leeyahay magic wacan xagga nabadgelyada?
- ☑ Waqtigee ugu horeeya ee ilmaha dugsiga la geyn karaa? Waqtigee ugu dambeeya ee laga soo qaadi karaa?

**Wixi Warar Dheeraad Ah**

- ☑ La xiriir Xarumada Waxtarmada Qoyska ee DDB, ee ku qoran boga 5
- ☑ Wixi su'aalo dheeraad ah xaga ardayda fasalada idil, tag www.countdowntokindergarten.org/checklist.htm

# Nidaamyada DDB:

## Rikoorada Ardayda (Records)

«Rikoorada Ardaydu» waa wax alla wixi xog ah ee DDB arday kasta ka hayaan ee ku saabsan magaca ama sidii kale ardayga loo tilmaami lahaa.

Diiwaanka tirooyinka imtixaanada la keeno (transcripts), ama Diiwaanka Joogtada ah, waxa ku jira magaca ardayga, maalinta dhalashada, cinwaanka, sanadaha iyo heerarka uu dhameeyey, iyo duruusta iyo derejooyinkuu qaatay. Diiwaanka Joogtada ah waxa la haynayaa 60 sano kadib marka ardaygu ka baxo habka dugsiyada.

Diiwaanada kaloo dhan ee ardayga waa Ku Meel Gaadh waxana la tirtiraa todoba sano kadib marka ardaygu ka baxo habka dugsiyada. Waxay codsan karaan nuqul iyagoo la xiriiraya maaamulaha sarta dugsiga uu ugu dambayn ku jiray.

Waalidka arday kasta ama ardayga galay dugsiga sare ama ugu yaraan ah 14 sano, wuxu xaq u leeyahay inuu arki karo rekoorkiisa marku codsi keensado. Waalidka ama ardaygu waa inuu laba casho ku helaa rekoorka markuu codsaday laga bilaabo, wuxuna dalban karaa in loo tarjumo ama madaxa dugsigu wax ka beddelo. Dugsiga la hadal hadaad rabto inaad aragto rekoorka ilmahaaga.

Wixi warar dheeraad ah ee diiwaanka ardayda, tag: www.doe.mass.edu/lawsregs/603cm23/

### Diiwaanada Cafimaadka Ardayda

Sharciyada Diiwaanka Ardayda ee gobolku waxay dhigayaan, in diiwaanka caafimaadka ardaygu badbaadinta qarsoodiga gaaarka ah. In kastoo diiwaanka caafimaadka ardaygu ka mid yahay diiwaanada ku meel gaadhka ah, hadana ma laha helitaanka fudud sida kuwa diiwaanada tirooyinka imtixaanka ama kuwa kale ku meel gaadhka ah. Guud ahaan dugsiga oo keliya ayaa si buuxda u heli kara diiwaanka caafimaadka ardayga ee ku jira diiwaanka ku meel gaadhka ah.

### Helitaanka Rikoorada Ardayda DDB ee Hore

- Hadii dugsigii ugu dambeeyey weli furan yahay, la xiriir dugsiga.
- Hadii dugsigii ugu dambeeyey la xiray, ama hadaan dugsigu hayn diwaaka, wac Agaasinka Diiwanada DDB, ee 617-635-8030 (Guidance Services).
- Waxa lagaa rabi karaa Inaad codsi qoraal ah keento Iyo/ama aqoonsi sidaad u hesho rekooradaada.

### Rikoorada Ardayga ka Taga Dugsiyada Dadweynaha Boston

Marka arday ka tago Dugsiyada Dadweynaha Boston si uu u galo dugsi aan ka mid ahayn DDB, waa in DDB toos ugu diraan dugsiga cusub. Xusuusnow in marka arday u bedesho dugsi cusub waqtiga kulaylaha, waxay qaadan kartaa dhawr casho ama usbuuc siduu walidku uga heli lahaa diiwaanka dugsiga. Shaqaaluhu waxay joogaan oo keliya saraha dugsiga waqti yar bilaha Julay iyo Agost.

### Siidaynta Xogta Ardayga

Sida caadiga ah, sharciga gobolku wuxu dhigayaa inaan qofna ama hay'adna la siin karin diiwaanka arday haddaan fasax qoraal ah laga helin waalidka ama ardayga u qalma. Waxase jirta dhaw arrin oo taas ka reeban oo dugsiga u oggolaanaya bixinta wawarka ardayga iyadaan fasax laga qaadan waalidka:

- Sharciga gobolku wuxu dhigayaa, marka arday dugsi kale ku wareego, diwaanka ardayga (u wehesho diiwaanka waxbarashada gaarka ah) waxa lagu wareejin karaa dugsiga cusub iyadaan waalidka fasax weydiisan, hadii waalidka sanad kasta la ogeysiiyo sharcigaas.
- Siidaynta xogtu waa mid loo baahan yahay hadii lagu badbaadinayo caafimaadka ama nabadgelyada qofka, ama haday codsadaan Waaxda Adeegyada Dhaqanka Massachusetts (DSS), Waaxda Adeegyada Dhalinyarada (DYS), ama sarkaal kormeere maxkamadeed (probation officer) iyo kuwa kaloo la mid ah.
- Sharciga fedraaliga ah ee No Child Left Behind, degmooyinka dugsiyada dadweynuh waa inay u sii dayaann magaca, cinwaanka iyo lamabarada telefanka ee ardayda, kuwa dadka u qora milateriga Maraykanka ama tacliinta sare. Hase ahaatee, waalidka ama ardaygu wuxu qoraal ku codsan karaa INAAN xogtaas la sii dayn. Laba siyood baa loo dalbi karaa codsiga:
  - Buuxi qaybta "U Siidaynta Xogta Milateriga iyo Tacliinta Sare" ee boga 34 ee Hagahan. Sax ku dhufo mid ama labada sanduuq. Waalidka ama ardayga baa saxeexi kara qaybtan.
  - Qoraal ugu gudbi maamulaha ama madaxa dugsiga codsiga. Maa daama kuwa dadka u qora militeriga ama tacliinta sare ay badanaaba codsadaan xogta sanad dugsiyeedka horaantiisa, waa inaad codsigaaga dhiibtaa ilaa Sebtembar 30, si aad uga baxsatid in lagu baryo.
- Dugsiyada Dadweynaha Boston waa bixiyaan xogtan soo socota iyagaan waalidka fasax ka qaadan magaca ardayga, taariikhda dhalashada, xaafada cinwaanka, fasalka ama sanada dugsiga, maalmaha dugsiga uu ka xaadiray, ka qaybgalka hawlaha rasmiga ah, xubinnimada kooxaha atletikada,

**Garyaqaanka latalinta ardayda Boston wuxu leeyahay...**

DDB waxa xil ka saaran yahay Inay xaqiijiyaanin ardayda iyo waalidku ogyihiin xaqa ay u leeyhihiin inay diidaan barnaamijka. Waxad goosan kartaa, kadib markaad ke fekertao waxad kala dooranayso, in geltaanka ciidamada milaterigu kugu haboon yahay. Waana Inaad dareen u yeelataa Ifafaalaha kuwa xayasiiyaa isticmaalaan kana digtoonow xog ku wareerisa ama aan dhmays tirnayn. Waxan xaq u leenahay doorashada mustaqbal-keena, laakin waxan kalee xaq u leenahay ogaanta waxa aanu gelayno.

# Nidaamyada DDB:

## Rikoorada Ardayda (Records) (waa socotaa)

abaalguyada shahaada sharafta, iyo qorshayaasha dugsiga sare kaddib. Haddaad rabtid wararkan inaan fasaxaaga la'aantiis lagu bixin, waa inaad madaxa dugsiga u soo sheegtaa ilaa sodon casho markaad Buugan heshid. Fiiri bogga 35 .

Sharciga Massachusetts ee 1998 ayaa sharxaya sida dugsiyada dadweynuhu diiwaanka wararka ardayda u siin karaan waalidka ayan la noolayn ardaydu.

Nuqullada iyo nidaamyada DDB ee rekoorrada ardayda iyo xuquuqda waalidka iyo ardayda waxa laga heelaa dugsi kasta. Waalid ama arday dacwad wuu geysan karaa Xafiiska aqbalka Nidaamka Qoyska eeWasaarada Waxbarashada Maraykanka xagga ku xadgudubka Sharciga Shakhsinimada iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska (Family Educational Rights and Privacy – FERPA) iyo qodobada u dhigan.

## Xafladaha Qalinjebinta

Ka qalinjebinta dugsiga sare waa xilli aad u muhim ah oo gaar ah. Gidi DDB way sharifaan ardadooda ka qalin jebiya dugsiga sare waxayna u dhigaan xaflado rasmi ah iyagoo markaas u qaybiya shahaadado, mudnaanta tacliin sare iyo aqoonsi kaloo badan. Ardayda keliya ee ka soo baxay dhamaan shuruudaha gudbinta ee DDB iyo shuruudaha Go'aaminta Kartiyeed ee gobolka xaga ELA, xisaabta, taariikhda/duruusta dhaqanka, iyo saynis/teknoloji/injineernimada imtixaanada baa ka qayb geli kara xafladaha qalinjebinta dugsiga sare lana siiyaa dibloome. *Ardayda aan buuxin shuruudaha qalinjebinta «ma marayaan masraxa» waxayna helayaan warqad maran meeshii ay dibloome ka qaadan lahaayeen.*

Sadex wax oo keliya baa ka reeban nidaamkan:

1. Ardayda laba sano dhameeyey barnaamijka waxbarashada farsamo (technical-vocational) ee Dugsiga Sare ee Madison Park oo ku aflaxa helitaanka **Shahaado Kartiyeed** (Certificate of Competence) waa ka qayb geli kara xafladahaas qalinjebinta.
2. Ardayda waxbarashada gaarka ah ee naafooyin xun la xiriirto ee gaadhay 22 sano ee ka baxaya dugsiga sare taasoo oo ku salaysan da'dooda ee hantay himiladii «IEP»-da iyana waxa la siiyaa **Shahaado Xaadiraad ah** (Certificate of Attendance) waxana loo ogolaanayaa inay xaflada ka qayb qaataan
3. Ardayda kalee naafada ah ee ka soo baxa shuruudahan waxay dooran karaan kaqaybgalka:
   - Ardaygu ma laha in ka badan 9 maqnaansho aan cudur daar lahayn sanad dugsiyeedkii hore.
   - Ardayda qaatay Imtixaanka Fasalka 10 ee MCAS ugu yaraan 3 goor maado kasta ee ku aflixi waayey, ama soo ban dhigayugu yaraan 2 fayl ee "qiimayn kaduwan".
   - Ardayga dhaneeyey fasalka 12 si heer wanaagsan ah sida ku xusan IEP-ga ee ka soo baxay cabirada dhan ee dugsiga iyo kuwa DDB aan tacliinta ku xirnayn.

Dugsiyo badan waxay qabtaan xaflado marka dugsigu dhamaado siday u aqoonsadaan ardayda ka gudba xanaanada, fasalka 5 iyo fasalka 8. Hase ahaatee, xafladahaasi maaha kuwii qalinjebinta; dugsiyadana lama jecla inay bixiyaan «dibloome» ardayduna gahsadaan jilbaabo iyo koofiyado.

Ardayda idil ayan ku jirin kuwa dugsiga sare ka qalin jebinaya waxa laga filayaa inay dugsiga tagaan ilaa maalinta ugu dambaysa ee 180-aad – xataa hadii xafladda sanadka dhamaadkiisa la qabtay kahor maalinta dugsiga ugu dambaysa – waxana lagu qorayaa «maqnaansho» haday tegi waayaan dugsiga.

## Shaqaguriga

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay aaminsan yihiin in waqtiga ardaygu ku dadaalo shaqa-guriyeedka micna lihi, in horukacoodu mid la taaban karo noqonayo. Shaqa-guriyeedku wuxu kaabaa duruusta lagu qaato fasalka wuxuna dhiiri geliyaa xakamaynta nafta iyo xilkasnimada shaqsiyeed. Waana arrin muhim u ahsare u qaadka iskaashiga guriga iyo dugsiga.Arday kasta ee DDB waa in la siiyaa shaqa-guriyeedka maalin kasta ee dugsiga la dhigto. Fiiri boga 18 (dugsiga hoose), boga 20 (dugsiga dhexe), iyo boga 22 (dugsiga sare) xagga tusaalooyinka shaqaguriga.Macalimiintaa ka mas'uul ah inay bixiyaan shaqaguriga.

Hadaad su'aalo ka qabto shaqaguriga, ama hadii adiga ama ilmahaagu weelwel kaga jiro xaga qiimaha ama baaxada shaqaguriga loo diro, marka hore macalinka la xiriir, kadibna maamulaha ama madaxa dugsiga.

Gu'gii 2008, Gudiga Dugsiyada Boston waxay bilaabeen inay dibufiirin ku sameeyaan nidaamka shaqaguriga si looga tashado isbedela ay soo jeediyaan Golaha Latalinta Ardayda Boston iyo Kooxda Fulinta ee Agaasimaha Guud ( Boston Student Advisory Council –BSAC) iyo Kooxda Fulinta ee Agaasimaha Guud. Wixi isbedelo ah xaga nidaamka waxa lagu soo saarayaa " Web site"-ka degmada waxana laga helayaa dugsiyada.

## Daahidda

Ardayda oo dhan waxa laga filayaa inay ka xaadiraan dugsiga maalin kasta waqtiga loogu talagalay. Ardayda yimaada kadib marka dugsiga maalintii la galo waa soo daaheen. Waa inay markaas hanaanaka u dhigan dugsiga kadaahiisa soo maraan. Dugsiyada sare waxay u tixgelin karaan daahida badan sidi maqnaansho. (Wixi warar dheeraad ah ka fiiri boga 14). Waa nidaamka Guddiga Dugsiyada in ardayda soo daaha loo ogolaado inay dugsiga soo galaan. Madaxada iyo maamulayaasha dugsiyadu waa inay (a) dibufiirin ku sameeyaan nidaamka hadda ay dhigeen

### Garyaqaanka latalinta ArdaydaBoston wuxu leeyahay…

Nidaamka daahiddu wuxu ku lu leeyahay Ixtiraamka ardayda iyo waxbarashadooda. Maamulka DDB waxay arkeen inay qalad tahay in ardayda daahda lagu ciqaabo in dugsiga loo diido. Dugsiyadu waa inay sii wadaan horumarinta dhiirigelin micna leh ee ardaydadagelinaysa inay RABAAN tegida dugsiga; metelan iyadoo la sii wanaajinayo hiddaha dugsiga iyo xoojinta in la caawiyo ardayda soo daahda oo aan la xxirin ama ciqaabin. Ardayduna waxay u baahan yihiin inay muujiyaan sida waxbarashadu muhim ugu tahayóiyagoo imanaya waqtiga haboon.

daahidda iyagoo la kaashanaya Golayaasha Waalidka ee Rugaha Dugsiyada, (b) qorsheeyeen talaabooyin macquul ah si loo xallilo daahidda ardayda iyagoo dhiirigelinno dhigaya ardayda ay ku yimadaan waqti haboon, iyo (c) si foojigan dabagal ugu sameeyaan nidaamka ay u dhigeen.

## Kabadhada Ardayda

Ardayda dugsiyada dhexe iyo kuwa sare waxa la siiyaa kabadho ay xiran karaan oo ku ritaan qalabka dugsiyada iyo hantidooda gaarka ahba. Dugsigu wuxu bixiyaa qafillo iyo furayaal. Ardaydu waa inayan isticmaalin qafillo ay leeyihiin.

Waxa muhim ah in waalidka iyo ardaydu fahmaan in qafilladu yihiin hantida Dugsiyada Dadweynaha Boston inta ardaydu isticmaalayso. Shaqaalaha dugsigu waxay sharci u leeyihiin inay badhaan kabadhada iyo wixi gaar ah ee ku jiraba (sida jeebabka koorarka).

Shaqaalaha dugsiyadau ugu yaraan hal mar ayay baaraan kabadhada nadafad guudawgeed. Waxay kalee baaran hadii tufuhun kagalo xagga nabadgelyada iyo badbaadada. Wixi shaci-darro ah, ama mamnuuc ah ama khatar ahba ama alaab denbi dhacay ku lug leh mar la baarayo kabadh waxa loo gudbinayaa waaxaha ku shaqo leh.

Wixi faafin dheeraad ah ka hubi Sharci-Dugsiyeedka la xiriira kabadhada.

## Telefanada Gacanta

Nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Boston xagga teleaonada gacanta (cellular) waxa loogu talagalay in la xaqiijiyo inaan isticmaalka telefanada «cell»-ku carqaladayn baridda iyo waxbarashada maalin dugsiyeedka. Waxa arrinta lagala kaashaday Golaha Latalinta Ardayda Boston, ee ka wakiil ah dugsiyada sare ee DDB oo idil. Nidaamkani wuxu saameeyaa ardaydaa dhan ee dhigta DDB heer kastaba, ay ku jiraan kuwa tijaabada ah (pilot) iyo Dugsiyada Horace Mann Charter Schools.

> **Garyaqaanka Latalinta Ardayda Boston wuxu leeyahay. . .**
>
> Telefanada gacantu waxay u yihiin arday badan oo u baahan Inay la xiriiraan rerkooda ama shaqo ay qabtaan dugsi kadib. Waa u baahanahayólaakin ma rabno inay carqalad geliyaan waxbarashada qofna. Nidaamka telefanada gacanta ee DDB waxa habeeyey loona habeeyey ardayda si loo sameeyo hab si cadaalad ah isugu dheeli tiran xaga ixtiraamida jawigayaga waxbarasho iyo xuquuqda ardayda.

1. Waxa loo ogol yahay ardayda isticmaalka telefanada "cell"-ka mararka soo socda oo keliya:
   - saacadaha dugsiga kahor iyo kadib meel dugsiga ka baxsan ama gudihiisaba;
   - hawlaha dugsi kadib ama isboortiga, waa hadii uu ogolaado oo keliya tababaraha, macalinka mama agaasimaha barnaamijku;
   - hawlaha fiidadkii ama maalmaha fasaxa dugsiga gudihiisa.
2. Isticmaalka telefanka "cell"-ka sabab kasta ka ahaatee – sida telefan ku soo dhacay, fariin laguu duubay ama hawl kaleba, lama ogola waqti kale kastaba dugsiga gudihiisa.
3. Waa inayan muuqan telefanada gacantu maalin dugsiyeedka.
4. Waa in talafanada gacanta si buuxda loo xiraa (maaha inay gariiraan ama ayan qaylin) maalin dugsiyeedka.

Ciqaabta ardayda nidaamka jebiyaa waa sidatan:

- **Denbiga kowaad:** telefanka gacanta waa layska qaadayaa waxana la soo celinayaa marka malin dugiyeedku dhamaado.
- **Denbiga labaad iyo kuwa ku xiga:** telefanka gacanta waa layska qaadayaa waxan lagu celinayaa oo keliya waalidka ama koriyaha.
- **Jebinta nidaamkan si isdabajoog ah:** aradayda waxa la saaraayaa ciqaabo dheeraad ah ee anshax, sida uu dhigayo Xeerka Anshaxu.

## Hantida Qofka

Aad bay ula xun tahay ardayda iyo shaqalaha dugsigaba marka hanti gaar ah sida dahabka, boobalaha, ama qalabka elektarooniga ay ka lumaan ama laga xado. Waxa si xoog leh ugula talinaynaa waalidka inay hubiyaan inaan ilmahoodu hanti qaali ah dugsiga keenin.

Haddii arrintaasi dugsiga rabshad u keento, sharci-dugsiyeedku wuxu dhigayaa in ardayga laga qaado alaabtaas intuu dugsiga joogo. Sharci-duigsiyeedku wuxu kalee dhigaa inaan alaabta qaarkeed dugsigaba la keenin marka horeba.

Waxan aad ugu dadaalnaa inaan ku soo celino hantida ardayga ama waalidka. Hase ahaatee, mas'uul kama noqon karno inaan soo bedno hantida lunta ama la xado ama aan lacag ahaan ugu celino qiimaheedii qoyskii lahaa.

## Kaararka Warbixinta

Kaararka warbixinta waxa la bixiyaa waqtiga wax la saxo ka bacdi. Dugsiyada hoose oo dhan iyo kuwa K-5 ee ku jira dugsiyada K-8 waxay leeyihiin sadex xilli sixitaan (marking periods). Dugsiyada dhexe, iyo fasalada 6-8 ee ku jira dugsiyada K-8, iyo dugsiyada sare aan ahayn kuwa imtixaanka, waxa laeeyihiin afar xilli sixitaan. Dugsiyada imtixaanku waxay leeyihiin shan xilli sixitaan. Waxad ka helaysaa xilliyada sixitaanka ee 2009–2010 gudaha jeldiga dambe ee Hagahan. Golaha Rugta Dugsiga waxay codsan karaan kaltan ka duwan kan xafiiska dhexe dhigay.Sida caadiga ah, ardaydu kaararka warbixintooda waxay u geeyaan waalidka ama ilaaliyaha si loo soo saxeexo.

Kaddib, ardaydu waxay ku soo ceshaan macallinka. Dugsiyo kalena waxay warbixinnada dhiibaan maalinta «Open House»-ka ama waqtiga shirarka waalidka/ilaaliyaasha. Waqtiyada imtixaanada la qaado gudahooda waxa dugsiyada laga filayaa inay digniino u diraan waalidka ardayda laga baqayo inay saaqidaan.

Si aad u ogaatid horukaca ilmahaaga, la hadal dugsiga si loo qabto shir waalid/macallin. Golaha Waalidka ee Magaalaweynta iyo Xarummada Xogta Waalidka ayaa kaala talin kara si aad kulan ula yeelato hagaagsan macallinka ilmahaaga. Telefannadoodu

## Kaararka Warbixinta (waa socotaa)

waxay ku qoran yihiin bogga dambe gudihiisa. Waxay ku qoran yihiin boga 5. Waxad kelee fiirisaa boga 10, «Isudiyaarinta Shir Wax Ku-ool ah ee Waalidka-Macalimiinta».

## Xiritaanka Dugsiyada

Mararka qaarkood, dugsiyada (DDB) waa loo baahdaa in la xiro sabtoo ah markay hawadu xumaato ama xaalad kaloo degdega awgeed. Waxan ku wargelinaa xiritaanka dugsiya siyaabahan:Habka "Connect-ED" oo telefanada u dira guryaha

- Saldhigyada waaweyn ee raadiyaha iyo telefishanka laga bilaabo 5:30 aroorti.
- Xarunta Dhexe ee Duufaanta 617-635-3050
- Xafiiska Dhexe ee DDB 617-635-9000
- Website-ka DDB: www.bostonpublicschools.org
- Website-ka Magaalada Boston: www.cityofboston.gov/snow★
  - ★ Waa inaad isqortaa si laguugu sheego xaaladaha degdegga ah ee barafka, joojinta meelaha baabuurta la dhigto, iyo xiritaanka dugsiyada telefoon ahaan ama e-mail.

Wax kastoo go'aankayaga furitaanka dugsigu noqdo, waalidku waa inuu go'aanka ugu dambeeya leeyahay hadii ilmuhu nabadgelyo ku tegi karo dugsiya iyo in kale. Hadii waalidku ku go'aansado inuu ilmaha guriga ku hayo isagoo ka cabsi qaba nabadgelyadiisa, maqnaanshahaasi waa saamax marka waalidku warqad qoran soo diro. (fiiri bogga 14, «Nidaamka Gudbinta; Xaadiraada».)

- **Hadii dugsiyada la xiro**: Maalintaas waxa la soo bedeyaa marka sanad dugsigu dhamaado.
- **Hadii hawo xumi timaado maalin dugsiyeedka:** Waxa laga baxayaa dugsiga waqtigii caadiga ahaa.
- **Barnaamijyada dugsi kadib:** Marka dugsi la xiro, barnaamijyadii dugsi kadib oo idil ee DDB, iyo hawlihii isboortiga ee DDB, iyo fasaladii fiidka waa la joojinayaa.

Sharciga gobolku wuxu dhigayaa, sanad dugsiyeedka ardaydu waa 180 casho, maalinta dugsiga ugu dambaysaana waa inayan ka dambayn Juun 30. Hadii loo baahdo, kalendarka DDB ayaa wax laga bedelayaa si arrintaas loo fuliyo. Waxa war kaa siinaya dugsiga ilmahaaga.

## Hawlgelinta iyo Xukuumada Ardayda

Dugsi sare walba ee kuwa dadweynaha B (ay ku jiraan dugsiyada demada, dugsiyada imtixaanka iyo kuwa kaduwan ama tijaabada ah) waa inay yeeshaan qoraal ahaan nidaamka hawlgelinta ardayydaa ee qeexaya fursadaha ardayda ku qabsanayaan doorka hogaaminta qolfasalada gudahooda iyo bulshada weyn ee dugsiyada.

Qayb ahaan nidaamkan, waa in dugsi kastaaba yeeshaa xukuumad ardayadeed oo shaysa. Madaxda habkan waxay noqonayaan lataliyeyaal, cilmi baadhisyo, iyo kuwa ka qayb gala qaabka go'aaminta ee heerka dugsiyeed iyo degmoba. Madaxa dugsi walba wuxu mas'uul ka yahay xaqiijinta in xukuumada ardaydu la dhiso ugu dambayn ilaa Oktoobar 15.

Dugsiyada dhexe iyo hoose waxay iyana dhisan karaan xukuumado ardayeed. Hase ahaatee shardi maaha ku xiran.

**Golaha Latalinta Ardayda Boston** (Boston Student Advisory Council -BSAC) waa urur hogaamineed ee ardayda magalaweynta oo wakiil ka ah dugsiyadooda kala duwan. BSAC wuxu u adeegaa codka ardayda xaga Gudiga Dugsiyada Dadweynaha Boston. Wakiilada BSAC waxaybixiyaan aragtiyo run ah xaga dadaalada wax lagaaga bedelayo dugsiyada sare waxayna u shaagaan dugsiyada ay metelaan arrimaha khuseeya dugsiyada magaalaweyn ahaan. Waxay kalee ka jawaabaan arrimaha dugsiyada iyagoo dhisaya nidaamyo degmoweynta. Dugsi sare kasta ee DDB waxa laga rabaa inuu yeesho ugu yaraan hal iyo, hadii loo baahdo, laba BSAC wakiil.

## Lebiska Dugsiyada

Dugsiyada Dadweynaha Bostobn ma laha lebiska dugsi ee magalaweyntu ka siman tahay. Hase ahaatee, waxay leeyihiin Nidaamka Lebiska Dugsi. Golaha Rugta Dugsiga ee dugsi walba waa inay doortaa sadex wax mid ahaan:

- Lebis dugsigu ma yeelanayo;
- Lebis khiyaari ah ama lebis hab ku dhisan;
- Lebis (shardi ah) khasab ah ama lebis hab ku dhisan.

Haddii xataa ilmahaaga laga rabo dirays khasab ah, xaq baad u leedahay inaadan ka qayb gelin. Haddaad sidas goosato warqad u dir madaxa dugsiga adoo sharxaya sabta aad ku diidan tahay. Macallimiintu ardayda aan gashanayn dirayska waa inay dugsiga u oggoladaan.

## Daryeelka Buugagta & Qalabka Kale

Dugsiyadeenu waxay ardayda siiyaan buugagta wax laga barto iyo alaabta kale ee ay dugsiga uga baahan yihiin, iyagoo lacag la'aan ah. Buugagta dugsiyada waxa laga barto iyo buugagta maktabadaha waxa iska leh DDB.

Buugagta wax laga barto hadda badankoodu waxay jiraan in ka yar shan sano weyna wacan yihiin. Waxana laga filayaa in ardaydu iyagoo bed qaba la soo cesho. Buugagta ardaydu guryaha u qaadato waa in jeldi la geliyaa.

Hadii arday buug ama hantida kale ee dugsiga wax yeelo ama lumiyo waa in ardayga ama waalidku magdhabaan ama soo iibiyaa. Qoysasku waa inay ogaadaan in buugagta dugsiyada aad qaali u yihiin.

## Nidaamka Fayoqabka

Dawladda fedraaligu waxay rabtaa in dugsiyada idil ee deeqaha laga siiyo barnaamijyada cuntaada umadeed inay ka fuliyaan nidaamka la dhaho fayoqabka dugsi kasta ee degmada. Dugsiyada idil waa inay fidiyaan waxbarashada cuntada nafaqada leh, waxbarashada jirdhiska iyo hawlaha jidh socodka, iyo cuntooyinka fayoqabka leh. Waxan ku dhiiri gelianaa waalidka inay bartaan oo ka qayb galaan hawlaha fayoqabka ee dugsiga ilmahooda. Weydii maamulaha dugsiga ama Golaha Rugta Waalidka sida dugsigu u maareeyo nidaamka fayoqabka.

## Nidaamka Sigaarcab La'aanta

Sigaarka in lagu cabo rogta Saraha Dugsiyada Dadweynaha Boston ama meel kale ee ah hantida dugsiga, lama oggola. Taasi waxay saamaysaa shaqaalaha, ardayda iyo kuwa soo booqda.



# Agabyo Dheeraad ah ee Qoysaska


Ardayna Dib Lagagama Tegayo (NCLB) 54

- NCLB iyo Horukac Haboon Sanadkiiba 54
- NCLB Xulashada Dugsi 55
- NCLB iyo Adeegyada Waxbarasho Dheeraad ah 56
- Kaararka Warbixinta Dugsiyada iyo Degmooyinka 56
- NCLB iyo Tayada Macalinka 57
- NCLB iyo Ka Qaybgalka Waalidka 58
- NCLB iyo Iskaashiga Dugsi-Waalidka 59
- Qorshaha Wanaajinta Dugsiga Idil 59
- NCLB iyo Barteyaalka Af Ingiriisiga (ELL) 60
- NCLB iyo Khiyaarka Xulasho Dugsi Nabadla' 60

Hay'adaha BixiyaTababarka Waalidka iyo Horumarka Xirfadeed 61

Diiwaanka Telefanada Dugsiyada Dadweynaha Boston 64

Kaltanka Kaadhka Warbixinta, 2009–2010 Gudaha Jeldiga dambe

# «Ilmana Dib Lagagama Tegayo»



Sharciga Waxbaarashada Hoose iyo Sare, ee loo yaqaan No Child Left Behind (NCLB) ama «Ilmana Dib Lagagama Tegayo», waa barnaamijka Fedraaliga ah ee ugu weyn maalgelinta waxbarashada dugsiyada hoose iyo sare ee dalkan Marakanka. Sharciga NCLB wuxu isbedelo muhim ah u keenay sida dugsiyadu u shaqeeyaan. Matalana, NCLB:

- wuxu ku nuuxnuuxsanayaa ka filashada cabirro heer sare ah ardayda idi;
- dugsiyada baa ka mas'uul ah natiijooyinka;
- wuxu dhiiri geliyaa tabaha waxbaridda ee la cadeeyey inay shaqeeyaan;
- wuxu waalidka siiyaa kala xulashooyin badan; iyo
- wuxu leeyahay qawaaniin badan ee ku caawiya waalidka inay door weyn ka qaataan waxbarashada ilmahooda.

Waxa jira toban barnaamij waxabarasho, ama «madax-magacyo» (titles), oo NCLB ka kooban yahay. Kan ugu weyni waa "Title I". Barnaamijka Title I wuxu lacag siiyaa dugsiyada ay dhigtaan ardayda dakhliga hoose si loogu caawiyo waxbarashada ugu wacan ardaydaas. Sanadka 2009-2010, dugsiyada dadweynaha Boston oo dhami waxay helayaan lacagayawga Title I marka laga reebo Dugsiga Boston Latin iyo Dugsiga Hoose Manning.

Waxa xagooda dugsiyada laga rabaa, inay ka soo baxaan himilooyinka ardaydoo idil ku hanan lahaayeen cabirrada waxbarashada gobolku ka rabo iyo inay dadaal dheeraad ah sameeyaan si waalidku uga qayb qaato waxabarashada ilmahooda. Run ahaantii, sharciga NCLB wuxu dhigayaa in waalidku yahay furaha iskaashiga lagu caawin karo in ardaydu ku aflaxaan dugsiyada iyo sida dugsiyada loogu caawiyo hagaajintooda.

Qaybtan Hagaha Dugsiyada Dadweynaha Boston wuxu sharxayaa qaybaha kala duwan ee sharciga NCLB wuxuna qeexayaa xuquuqdaada waalid ahaan. Wuxu ka hadlayaa maadooyinkan soo socda:

- Horukaca Haboon Sanadkiiba (AYP);
- Xulashada Dugsi ;
- Adeegyada Taageerka Waxbarashada (SES);
- Kaararka Warbixinta Degmada iyo Dugsiyada ;
- Heerka Tacliinta Macalimiinta ;
- Nidaamka Kaqaybgalka Waalidka ;
- Heshiiska Dugsiga iyo Hoyga ;
- Qorshaha Buuxa ee Hagaajinta Dugsiga Idil ;
- Barteyaalka Af Ingiriisiga (ELL); iyo
- Khiyaarka Xulashada Dugsi Nabadla'.

## Sharciga NCLB iyo Horukaca Haboon Sanadkiiba

Horukaca Haboon Sanadkiiba (AYP) waa intuu le'eg yahay horukaca tacliimeed ee laga rabo sanad walba inay sameeyaan dugsiyada, degmooyinka iyo gobolku si loo hanto himilo sharciga NCLB u dhigay. Himiladuna waxay tahay in ardayda idil ay karti ku yeeshaan fananka af Ingiriisiga iyo xisaabta ilaa sanadka 2014. Erayga «karti» (Proficient) micnihiisu waa in ardaygu ku keenay xirfado iyo aqoon la taaban karo maadadada tacliinta khusaysa. Gobolka Massachusetts, keenida tiro karti muujinaysa ee imtixaanka MCAS micnaheedu waa in ardaygu leeyahay aqoon adage e xagga maadada laga rabo uuna xallili karaa mushkilado balaaran oo kala duwan.

### Sidee loo cabiraa AYP?

AYP wuxu ku salaysan yahay sadexda isir ee soo socda. Bartilmaameeda (targets) mid kastaana waa sidatan:

**A.** K**aqaybgal** (**Participation**): 95% waa in ardaydu qaataan imtixaanka MCAS.

**B. Kartida** (**Performance**): Tirooyinka la keeno imtixaanka MCAS waa inay daboolaan ama ka bataan bartilmaameedyada gobolku ka rabo.

**C. Sii fiicnaansho** (**Improvement**): Tirooyinka imtixaanka MCAS waa inay horukac sameeyaan sida qiyaasaha gobolku dhigayo ee xaqiijinaya in ardayda idil ay heer kertiyeed gaadheen ilaa 2014.

**D. Isir Dheeraad ah** (**Additional Factor**):

*Fasalada 1-8:* Qiyaasta xaadiraadu (attendance rate) waa inay ahaataa 92% ama ka badan tahay ama waa inay 1% sare uga kacdaa sanadkii tegey.

*Dugsiyada sare:* Qiyaasta qalinjebin dhan 65% ama ka sare; AMA 5-san qiyaasta qalinjebin 65% ama ka badan; AMA 5-sano qiyaas qalinjebineed ee ah 70% (haday ansixiso Waaxdka Waxbarashada Maraykan sanadka 2009–2010); AMA 2% dhibcood sare uga kacda sanadkii hore xaga qiyaasta 4-sano.

Maado kasta, dugsiyadau waa samayn karaan AYP iyagoo helaya A + B+ D ama A + C + D. Ugu yaraan dugsiyada DDB idil, waxa lagu cabiraa AYP qiyaasaha A + C + D.

Waa in dugsiyadu daboolaan himilooyinkooda AYP ee fanaka af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta sanad walba. Laakin kuma filna dugsiga dhamaantiis inuu sameeyo horukac hadii kooxaha qaarkood gadaal lagaga tago. Sida darted si dugsigu (ama degmadu) u hesho derejeda AYP, waa in koox kastaaba sameeyaan hanashada derejada AYP:

- Ardayda kartida kooban u leh af Ingiriisiga
- Ardayda waxbarashada gaarka ah
- Ardayda la siiyo qado lacag la'aan ama qiimo hoose;
- Ardayda madow ee Afrikaanka Maraykan;
- Ardayda Aasiya ama Jasiiradaha Badweynta Deggan
- Ardayda Isbanishka;
- Ardayda Maraykanka dhaladka ah; iyo
- Ardayda cadaanka ah.

**Xusuusnow:** Amarka la barbar dhigo tirooyinka imtixaanka la helo, AYP waa cabir horukaceed ama siihagaajinta. Dugsi la keenay tirooyin hoose imtixaanka MCAS ayaa misna gaari kara derejada AYP hadii qiyaastiisa siihagaajintu gaarto ama ka badato bartilmaameedka. Dugsi tirooyin sare la keenaya MCAS (laakin misna ka hooseeya bartilmaameedka goboleed) ayaan heli karin derejada AYP hadii qiyaasta siihagaajintiisu ka hooseeyo bartilmaameedka laga rabo.

## Sharciga NCLB iyo Horukaca Haboon Sanadkiiba (waa socotaa)

### Maxaa dhacaya hadii dugsi keeni waayo derejada AYP?

AYP sanad walba waa sameeyaa. Hadii dugsi keeni waayoAYP laba sano oo isku xiga, the dugsigaa waxa lagu tilmaamaa mid u baahan horukac. Waa in dugsigu qaadaa ficil lagu caawinayo inay ardaydu keento waxbarasho ka sii fiican. Qorshaha dugsiga ee horukacu waa inay ku jiraan siyaabaha waalidku ula shaqayn karo maamulaha iyo macalimiinta si dugsiga loo hagaajiyo. Laba ama sadex sano kadib marka dugsigu keeni waayo AYP, waa in dugsigu u fidiyaa waalidka khiyaaro cusub. (Wixi warar dheeraad ka fiiri qaybaha «Xulashada Dugsiga» iyo «Adeegyada Taageeka Waxbarashada» ama SES).

### Sidee u ogaan karaa in dugsiga ilmahaygu sameeyey AYP?

1. Sanad walba, digsigaagu wuxu kuu soo dirayaa Kaarka Warbixinta Dugsiga (School Report Card) oo war kaa siinaya sida dugsigu u socdo. Kaarku wuxu sheegayaa inuu dugsigu sameeyey AYP (Fiiri boga 52 ee « Kaararka Warbixnta», wixi warar dheeraad ah.)
2. Hadaan dugsiga ilmahaagu samayn AYP, waa in degmadu ilmaha warqad guriga ugu soo dhiibtaa oo ku sheegaya arrintaas.
3. Hadaadan warqad helin, waxad weydiisan kartaa maamulaha dugsiga ilmahaagu dhigto ama waxad ka raadisaa «website»-ka www.bostonpublicschools.org/nclb/.

## NCLB iyo Xulashada Dugsi

Nidaamka meelaynta ardayda Boston wuxu dhigayaa, in waalidku xaq u leeyihiin inay dalbaan oo kala dooran karaan dugsiyada aaga gurigooda. Laakin NCLB wuxu dhigayaa in waaalidku ka bedelan karo ilmaha dugsiga aan samayn AYP labao sano oo isku xigta, hadii kursi ka banaan yahay.

### Dugsiyadee baan u bedelan karaa ilmahayga xaga NCLB?

Waxa loo bedeli karaa dugsi kasta aan lagu magacaabin «u baahan haajin ama horukac» (in need of improvement) eek u yaal aaga guriga ama dugsiyada kale magaalaweynta (citywide), *hadii kursi looga helo.* Bedelaada NCLB kama qaalibsana bedelaada kale, ardayna looma bedelayo dugsi buuxa.

### Waqtigee baan ilmahayga u bedeli karaa dugsi kale?

Bedelaada ku salaysan NCLB waxa la dalbi karaa laba sanad dugsi dhexdood ama sanadka badhtankiisa, waqtiga bedelaada caadiga ah ee ardayda idil u furan.

### Hadaan dugsiga ilmahaygu samayn AYP, ma inaan u bedelaa dugsi kale?

Taasi waajib maaha. AYP waa isir ka mid arrimo badan oo aad tixgelin karto markaad ilmahaaga dugsi u dirayso. Qiyaasta AYP «maleh» micnaheedu maaha waa «dugsi xun». Markaad dooranayso dugsi, waxyaabo badan fiirso aan ahayn keliya tirooyinka la keenay imtixaanka.

Tan ugu muhimsani side baa ilmahaagu ku yahay dugsigiisa/dugsigeeda hadda. Kala hadal macalinka horukaca tacliinta ilmaha. Guud ahaan, bedelaada dugsi waxay khaalal gelin kartaa ilmaha ilmayowgana waa ku adag tahay. Waxyaabaha kalaad fiirin karto waxa ka mid:

- isku celcelinta tirooyinka imtixaanada dugsiga la keeno;
- tirooyinka imtixaanka ay koox gaar ah aad danaysaa keenaan;
- manhajka dugsiga;
- saacada dugsiga iyo meeshuu ku yaal;
- barnaamijyada gaarka ah ee dugsigu bixiyo;
- macalimiinta dugsiga;
- shucuurtaad dugsiga ka qabto;
- waxa ilmahaagu jecel yahay; iyo
- waxa ilmahaagu u baahan yahay.

Xaqiiji inaad dhawr dugsi booqato oo aad la hadasho macalimiinta iyo maamulayaasha intaadan go'aan gaarin.

### Sidee ilmahayga ugu bedelaa dugsi kale?

Soo booqo Xarumada Waxtarmada Qoyska midkood (Family Resource Center -FRC) sidaad wax dheraad ah uga ogaatid xulashada dugsi iyo/ama u dalabtid dugsi. Fiiri boga 5 sidaad wararka «FRCs»-ka.



# NCLB iyo Adeegyada Taagerka Waxbarashada (SES)

Adeegyada Taageerka Waxbarashada (Supplementary Education Service - SES) waa adeegyo umeerin bilaash ah ee ka baxsan waqtiga dugsiga.

Adeegyada waxa loogu talagalay caawinaada ardayda tacliin ahaan halis ku jira. Dugsiyada waa inay fidiyaan adeegyada SES kadib sanadka labaad haday keeni waayaan Horukaca Haboon Sanadkiiba (AYP). Dugsigaa kuu sheegaya hadii dugsigu bixinayo adeega SES. Waxad kalee toos ula xiriiri kartaa dugsiga sidaad u ogaatid.

### Yaa u qalma adeegyada SES?

Ardaygii dhigta dugsi aan helin AYP sadex sano oo isku xigta ayaa u qalmi kara SES hadii:

- hadii ardaygu dalbaday qado bilaash ah ama qiime jaban oo laga yeelay; iyo
- waxbarasho ahaan liita, sida ku cad tirooyinka uu keenay imtixaanada MCAS ama siyaabo kaleba.

Ardayda waxbarashada caadiga ah, tan gaarka ah, iyo barnaamijyada laba-luqadlaha way u qalmi karaan adeegyada SES. **Maadaama maalgelinyu kooban tahay, waxa dhici karta inaan barnaaamijka SES ee dugsigu dabooli Karin baahida ardayda u qalanta. Marka taasi dhacdo, waxa tixgelinta kowaad iska leh ardayda dakhliga hoose iyo kuwa tacliinta ku liita.**

### Ma u bedeli karaa ilmahayga dugsi kale hadana ma helli karaa SES?

Sida sharciga NCLB dhigayo, waxad dooran kartaa inaad dalabto bedelaad AMA inaad dugsiga ku jirto oo aad dalabto adeegyada SES, laakin maya labadaba

Hase ahaateer, waxad dalbi kartaa bedelaad ku salaysan nidaamka bedelaad caadi ah ee DDB (aan ahayn NCLB). Hadaad doorato dugsi bixiya adeegyada SES, waxad ka dalbi kartaa SES dugsigaas cusub.

### Yaa bixiya kharashka SES?

Barnaamijyada SES waxa bixiya hay'ado gaar loo leeyahay iyo kuwa dadweynaha oo laga ansixiyey dawlad goboleedka. Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay ku jiraan kuwaas la ansixiyey. Liiska ha'adahaas waxad ka heli kartaa dugsigaaga, ama «website»-ka Waaxda Waxbarashada Massachusetts ee: www.doe.mass.edu/ses/search.asp. Dugsiga ilmahaagu waa kuu soo diri karaa liiska iyo warar kooban ee hay'ad kasta ku saabsan, iyo wargelin in ilmahaagu u qalmo barnaamijka SES.

### Yaa u dooran kara ilmahayga adeegyada SES?

Adiga! Markaad go'aanka samaynayso, ka feker waxa hay'ad kastaa bixiso iyo meeshay ku taal. Hadaad u baahato in lagaa caawiyo doorashada hay'ad, ka codso macalinka ilmahaaga ama maamulaha. Xusuusnow, DDB ma bixiyaan gaadiid lagu tagao meesha hay'ada SES tahay.

### Sidee ugu saxeexi karaa ilmahaga adeegyada SES?

1. Buuxi arjiga ilmahaa dugsiga laga soo siiyo iyo warqada kuu sharxaysa khiyaarada aad kala dooran karto. Hadaadan helin arji iyo warqad, dugsigu ma bixiyo adeegyada yaa laga yaabaa. La xiriir dugsiga ilmahaaga sidaad arrinta u ogaatid oo ka soo hel arjiyada.
2. Calaamadi hay'ada aad rabto kuna celi dugsiga ilmahaaga arjiga. Nuqulna kala hadh.
3. La kulan hay'ada kana buuxi heshiis qoraal ah ee adeegyada ilmahaagu ka heli karo.
4. Heshiiska u gee hay'ada bixisa adeegyada SES.
5. Hay'ada bixisa adeegyada SES baa diri doona heshiiska Xafiiska DDB ee Barnaamijyada Fedraaliga & Gobolka si loo ansixiyo. Qandaraas baa lala gelayaa hay'ada, markaas baa adeegyadu bilaabmi karaan.

# Kaararka Warbixinada Dugsiyada iyo Degmooyinka

Sanad kasta, gobolada idil iyo degmooyinka dugsiyadu waa inay u kala diraan kaararka warbixinada dugsiyada. Kaararkan warbixinadu waa ka duwan yihiin kuwa kaaga warama sida ilmahaagu dugsiga tacliintiisa ku yahay.

### Maxaa ku yaal kaaraka warbixinta?

Sida sharciga NCLB dhigayo, waa in **Kaarka Warbixinta Dugsigu** kuu sheegaa:

- Tirada macalimiinta tacliin sare leh (ee ah inay tababar qaateen, rukhsadna haystaan) siday u dhigaan maadooyinka ay dhigaan;
- Sida wacan ama kaleeto ee ardayda dugsigu uga baxday imtixaanadaii ugu dambeeyey ee MCAS ee afka Ingiriisiga iyo xisaabta
- sida kooxaha kala duwani uga baxeen MCAS:
    - labka iyo dheddiga
    - ardayda kooxaha jinsiyada iyo dhladka ay kala yihiin;
    - ardayda u qalma qado bilaash ah ama qiimo jaban
    - ardayda kartida kooban ee af Ingiriisiga (LEP);
    - ardayda fasalada waxbarashada gaarka ah
    - ardayda soo galootinka ah.
- boqolkiiba ardayda kooxhoosaadyada ka gala imtixaanada MCAS
- sida dugsiyada degmo kasta iyo gobolkuba uga soo baxeen guud ahaan imtixaanadii MCAS
- qiyaasaha tegitaanka dugsiyada
- ardayda ka qalin jebiya dugsiyada sare
- haduu dugsiga ilmahaagu helay AYP
- hadii dugsiga ilmahaaga lagu tilmaamay mid u baahan hagaajin, ficil dibuhagaajin, ama dibudhis waayo wuxu ka soo bixiwaayey cabirrada Massachusetts ee AYP.

**Kaarka Warbixinta Degmada** waa inay weheliyaan wararka ku saabsan:

- sida kooxaha kala duwan oo idil ee ardaydu uga soo baxeen imtixaanada MCAS marka loo eego isku celcelinta ardayda dhan ee gobolka; iyo
- tirade iyo boqolkiba dugsiyada lagu tilmaamay kuwo u baahan siihagaajin iyo waqtiga ay dugsiyadaasi ku jireen derejada u baahan siihagaajin.
- Natiijooyinka gobolka iyo qimaynaha akhriga iyo xisaabta ee NAEP.

## Kaararka Warbixinada Dugsiyada iyo Degmooyinka (waa socotaa)

- Qiyaasaha ka qaybgalka NAEP ee ardayda naafada ah iyo ardayda kartida af Ingiriisigu liidato.

### Maxay u yihiin muhim kaararka warbixinada dugsiga iyo degmadu?

Kaararkan warbixinadu waxay waalidka siiyaan warar ku caawinaya waalidku inay go'aansadaan waxbarashada ilmahooda kahor sanad dugsiyeedka soo socda. Waxay ku caawiyaan waalidka in goosto dugsiga ay ilmahooda u diri donaan. Waxay kale waalidka taraan inay ogaadaan inay u qalmaan Adeegyada Taageerka Waxbarashada (SES). (Wixi warar dheeraad ah, fiiri qaybta «Adeegyada Taageerka Waxbarashada», eeg boga 56 .)

### Sidee ama waqtigaa u heli karaa kaararka warbixinta dugsiga iyo degmada ilmahayga?

Dugsiyadu waa inay waalidka u diraan kaararka warbixinada; iyagoo marinaya boostada ama u dhiibaya ardayda siday guriga u geeyaan. Ardaydu waa inay waalidka siiyaan kaararka warbixinada dugsiyada iyo degmooyinka haday weydiistaan. Dugsiyadu waxay kaararka warbixinada dugsiyada diraan bisha Janaayo. Waxa kalee laga helaa Xarumada Waxtarmada Waalidka ama «website»-ka DDB.

### Xagaan ka heli karaa cid ugu caawisa akhriga kaararka warbixinta dugsida iyo degmada?

Kaararka warbixintu waa inay noqdaan kuwo waalidka soo dhoweynaya oo wararka ku bixiya af sahlan oo la kasi karo. Weydii maamulaha dugsiga hadaad wax ku yaala warbixinta garan weydo.

## NCLB iyo Tayada Macalinka (Teacher Quality)

Sida sharciga NCLB dhigayo, degmooyinka dugsiyada idili waa inay xaqiijiyaan in macalimiinta oo dhan e dhiga maadooyinka «dhextaalka» tacliinta ay ahaadaan kuwo «xirfad tacliin sare leh» (highly qualified). Maadooyinka dhextaalka tacliintu waa xisaabta, sayniska, akhriga, taariikhda, fananka af Ingiriisiga, afafka ajnebiga, dhaqaalaha, dawlada iyo arrimaha shacbiga (civics), joqraafiga, iyo fanka. Macalimiinta aan dhigin maadooyinka dhextaalka tacliinta maaha inay noqdaan kuwo xirfad tacliin heer sare leh.

### Maxaa looga jeedaa xirfad tacliin heer sare?

«Xirfad tacliin heer sare» micnaheedu waa in macalinka ilmahaagu:

- haystaa dibloomka jaamicadeed ama wax ka sareeya
- haystaa rukhsada bilawga, ama kowaad, ama xirfada macalinimada; iyo
- awood u leeyahay/leedahay muujinta cilmiga iyo xirfadaha looga baahan yahay inuu dhigi karo/inay dhigi karto maadadda uu dhigayo/ay dhigayso oo imtixaan ku aflaxay; ama haystaa Qorshaha Horumarinta Xirfada Shakhsi (Individual Professional Development Plan) ee kobcinaya aqoonta.

Sharciga NCLB wuxu dhigayaa, in dugsiyada Title I ay qoran karaan oo keliya macalimiin cusub oo leh xirfadaha tacliin heer sare ah. Xataa macalimiinta sanado badan wax dhigayey waa inay tababar joogto ah qaataan siday u daboolaan cabirrada tacliin heer sareah.

### Maxad ka ogaan kartaa xirfadda tacliinta macalimiinta ilmahaaga?

Waxa xaq u leedahay inad ogaato xirafadda tacliinta macalimiinta dugsiga ilmahaaga, iyo xogta gaarka ee macalimiinta ilmahaaga. Dugsiyadu waa inay rugta ku hayaan xogta tayada macaliminta, waana in xogta lagu siiyaa hadaad weydiisato. Dugsiyada qaarkood waxay ka rabaan in codsiga qoraal ugu gudbiso.

Waxad soo heli kartaa:

- in macaliinku buuxiyey cabirrada waxbaridda ee gobolka xagga fasalada iyo maadooyinka uu dhigo/ay dhigto;
- in duruufo gaar ah awgood macalinka wax ku dhigo sidii gurmad degdeg ah;
- waxay ahayd macaliinka maadadiisa kowaad ee jaamicaddu;
- inuu macalinku haysto shahaadado sii sareeya ee jaamicadeed iyo maadooyinkooda;
- in xirfad-yaqaanada la dhaho "paraprofessionals" adeego u fidiyaan ilmahaaga, hadii taasi jirtona, waa maxay heerarkooda tacliimeed.

Sanadkiiba hal mar, waa in degmada dugsigu kuu sheegaan tirade macalimiinta dugsiga ilmahaaga ee haysta xirfadda tacliin heer sare ah. Xogtani waa qayb ka mi kaadhka warbixinta dugsiga ilmahaaga. (Fiiri Qaybta Kaararka Warbixinta Dugsiga iyo Degmada, ee bogagga 56 -57 .)

### Maxaa sharciga NCLB ka sheegaa "paraprofessionals" ama xirfad-yaqaan hoose?

Xirfad-yaqaanada hoose waa dad waaweyn ee taageero siiya macalimiinta iyo waalidka. Xirfad-yaqaanada hoose ee cusub oo idil ee macalimiinta ku taageera dugsiyada Title I waa inay ugu yaraan laba sano jaamicad dhigteen ama ay ku aflaxaan imtixaan uu ka qaaday degmada dugsigu.

Xirfad-yaqaanada hoose ee turjumaanimo ugu shaqeeya barnaamijyada kaqaybgalka waalidka loogama baahna inay shardigan buuxiyaan.

### Ma la ii sheegayaa hadaan ilmahayga macalinkiisu ahayn mid leh xirfad tacliin heer sare?

Siduu dhigayo sharciga NCLB, waa in maamulaha dugsiga ilmahaagu kuu sheegaa hadaan macalinka ilmahaagu ahayn mid leh xirfad tacliin heer sare. Maamuluhu waa inuu kalee kuu sheegaa hadii ilmahaaga macalin gacanyare ahi u dhigo in ka badan afar usbuuc oo isku xigta isagaan ahayn mid leh xirfad tacliin heer sare. Maamulayaashu waa inay waalidka ogeysiiyaan macalimiinta gacanyare ah ee muddada dheer markay shan wiig oo isku xiga shaqeeyaan.

# NCLB iyo Nidaamka Kaqaybgalka Waalidka (Parent Involvement Policy)

Waalidku waxay muhim u yihiin aflaxaada ilmahooda ee dugsiga. Sharciga NCLB wuxu dhigayaa, in dugsiyada Title I ay lahaadaa qoraal u lahaadaan Nidaamka Kaqaybgalka Waalidka, oy isku dubarideen ansixiyeena waalidku. Nidaamkan waa in lagu qeexaa sida waalidku iskaashi ahaan uga qayb qaadanayaan waxbarashada ilmahooda. Nidaamkan waa in mar waleetaba dib ufiirin lagu sameeyaa hadba sida waxa waalidku daneeyaan isu bedelaan. Waa in waalidka laga qayb geliyaa horumarinta, dibufiirinta, iyo qiimaynta nidaamka.

### Waa maxay xogta ku jirtaa Nidaamka Kaqaybgalka Waalidka?

Sharciga NCLB wuxu sheegayaa in nidaamku daboolo sadex walxood ee muhim ah: (1) horumarinta nidaamka, (2) mas'uuliyad loo dhan yahay ee aflaxaada ilmaha, iyo (3) awooda macalimiinta iyo waalidka inay wada shaqeeyaan siday ardayda idil ugu caawiyaan hanashada himilooyinka waxbarasho.

- **Horumarinta nidaamka.** Waa in nidaamku sheegaa sida waalidku uga qayb qadanayo horumarinta nidaamka kaqaybgalka waalidka ee dugsiyada. Waa inuu sharxaa waxa waalidku ku kordhinayaan iyo ansixinta nidaamka iyo qorshaha barnaamijka Title I. Matalan, waa inuu jiraa qorshe lagaala tashanayo waalidka go'aamada culus xagga isticmaalka lacagta Title I. . Nidaamkanu waa inuu sheegaa sida dugsiyadu u taageerayaan in waalidku ka qayb galo shirarka muhimka ee Title I, sida u fidinta gaadiidka, cuntada, xanaanada caruurta.
- **Mas'uuliyad loo dhan yahay (shared responsibility).** Nidaamka waa inuu ku jiraa nuqul ah Isafgaradka Waalid-iyo-Dugsi (School-Parent Compact) ee sheegaya sida dugsigu ula shaqaynayo waalidka siday ugu caawiyaan ardayda korukaca tacliimeed. Nidaamku waa inuu dhigaa himilooyinka isafgaradka. Waana inuu kaleesheegaa sida waalidka iyo dugsigu u wada abuuri lahaayeen isafgaradka. (Wixi faahfaahin dheeraad ah ee isafgaradka, fiiri bogga 59, ee "NCLB iyo Isafgaradka Waalid-iyo-Dugsi.")
- **Xirfadaha iyo aqoonta macalimiinta iyo waalidka.** Nidaamku waa inuu tixgeliyaa baahiyaha tababarada iyo warelinta waalidka iyo macalimiinta. Waalidku waa inay fursad u helaan inay wax ka bartaan:
  - cabirrada iyo himilooyinka gaarka ah ee ardayda xagga waxbarasho ee laga rabo inay keenaan;
  - sida loo qiyaaso ardayga korukaciisa;
  - sida loo qiimeeyo ardayga;
  - sida waalidku ula shaqayn karo macalimiinta si loo hagaajiyo hawlgaadhka ilmahooda; iyo
  - qalabka iyo fursadaha tababarada jira si waalidka loogu caawiyo la shaqaynta ilmahooda.

